I taalkaygii iyo Abaalkii Internetka



Qora: Muna Mahamoud Mouse

Tusmada Buuga

Afeef 7
Hibayn 7
Mahadnaq 9
Erayga Qoraaga Buuga 10
Taariikhda Buuga 12
Xaaladii Qoraal ee aan Buuga 14
Caafimadkaygii iyo Caqabadii Buuga 16
Kalinimadaydii iyo Iskafayntadii Qoraanimo 19
Itaalkaygii iyo Abaalkii Internetka 20
Maskaxda Qoraaga iyo Maxsuulka Buuga 21
Dar-daaran Aan Duugoobayn 22
Nuxurka Buugu 23
Buugan Muxu Kaga Duwan Yahay Buugta Kale 24
Cutubka 1aad 26
Baro Naftaada oo Hel Hankaga 26
Farqiga u Dhaxeeya Nafta iyo Ruuxda 28
Noocyada Nafta 30
Sidee ku Baran kartaa Naftaad ! 31
Adigu yaad tahay? 34
Faa'iidada ay Leedahay is Barashadu 47
Naftaadu Maxay u Baahan Tahay? 48
Yaa ku Hogaaminaya? 51

Yaad ku Dayanasaa? 52
Maxaynu kala Qaadanana? 54
Dadka Mantu Waa Xadaarad Mood 54
U jeedada sheekada:- 56
Waa Qaaliye Qiimihiisa Garo 57
AQbal Ahaanshiyahaga Qofeed 58
Sir Yeelo 59
Qiyaano Qarsoon 61
Maku Hagay oo Ma Baratay Qofkad Tahay? 62
Cutubka 2aad 64
Isbadal u door Naftaada 64
Tilmaamaha Saldhig u ah isbadalka Naftada 65
Sheeko 73
Dulucda sheekada 74
Marxaladaha Ugu Adag Isbadalka 77
Qaali bad Tahee Garo Qiimahaga 78
Haka Dalban Dadka Daryeel 79
Isbadalka Waayuhu Waa Baraha Naftada ! 80
Akhyaar Noqo 82
Waari Mayside War Haka Hadho! 84
Samee Sidan way ku Sacabo Tumi doonaane 85
Cutubka 3aad 88
Naftaada ku kalsoonow 88

Kalsooni ku Abuur Naftaada 89
Xidhiidhka ka dhexeeya kalsoonida iyo Quruxda 96
Calaamadaha Lagu Garto Dadka isku Kalsoon 97
Karaame Naftaada oo Qadari 103
Dabuubtadu Yaysan Dadka Dhibin..... 104
Cutubka 4aad 106
Maare oo Maamulo wakhtigaaga 106
Mudnaanta Sii Wakhtigaaga 109
AHmiyada wakhtiga 117
Wakhtigu Wax Haka Badalo..... 118
Maxsuulka Wakhtigaaga u dhabar Adayg..... 119
Hadalo Xikmadaysan Oo Laga Yidhi Wakhtiga..... 121
Cutubka 5aad 125
Kobci Garaadkaga iyo Maskaxdada 125
Qaybaha Maskaxda..... 127
Culayska Maskaxda 128
Qaab Dhismeedka Maskaxda..... 130
Dhoohananta Muslimiinta Iyo Dhiirananta Gaalada 131
Tusaalaha Ilaahay Iyo Tijaabadii Gaalada 135
Ma isku Midbaa Caqliga, Garaadka, Wadnaha iyo Qalbiga 137
Boos Ahaan Halkay Kaga Yaalan Jidhkeena 138
Maxay Kala Yihiin Maxayse Qabtaan 139
Maxa Cidhib Xumo ah Oo Ka Dhalan Kara 141

Waxqabad Wada Jira 143
Qaadashada Amarada Diinta Malaga Horaysiin Kara Fikirkeena? 144
Caqli Badnow Oo Calaamadahan Lahow 146
Sidani Maku Dhaqanbaa 152
Cutubka 6aad Cafi oo Calool Fayoobow 155
Faa'iidada cafisku u leeyahay dadka 158
Qisooyin cafiska ah 161
Qisada kobaad 161
Qisada labaad 163
Ha Muujin OOHintaada 164
Cutubka 7aad Guulayso Guusha Dhabta ah 167
Waa Maxay Dheefta Aan Dhibi Ka Danbayn? 170
Ha Quusan 171
Guusha Waxa Keena Dadaal 173
Side Loo Noqda Guulayste 178
AQbal Naftaada Guushana Isku Diyaari 181
Noqo Qof Nasiib Badan 182
Guusha dhabta ahi waa raaligalinta ilaahay 183
Same wad samayn kartaye 183
Hadafku yaanu kaa lumin 184
Hal abuur yeelo 185
Cutubka 8aad Ha murugoon 187

Balanqaadka Ilaahay iyo Moogananteena 190
Maxad Bani'adam ka Rabta? 196
Xili dhamaad ayey leeyihiin dhibaatoyinku 197
Noloshu Maha Dhamays 198
Muhiim Kuma Ahan Dadku! 200
Faa'iidada Murugada 200
Daawada Murugada 202
Albaabkan Maba Xidhmo 205
Baro oo balwad ka dhigo 207
Cutubka 9aad Noqo Mahadiye La Mahadiyo 209
Sobobto ay u Burburaan Qoysaskeenu 211
Hano Qalbiyada Dadka 214
Noqo Same Falle Wanagsan 218
Maxa Samo Fal Noqon Kara? 219
Faa'idooyinka Samo Falka 219
Wax Anad Ka Helayn Dadka Kale iga Hoo! 221
Mudane Wanagsan Ka Noqo Ilaahay Agtiisa 222
Cutubka 10aad Farxadu waa Gundhiga Nolosha 224
Halkee Laga Helaa Farxada Dhabta ah 226
Siraha Farxada 228
Farxadu waa Qanaacada Nafta 238
Ha Is Raacin Aduunka 240
Cutubka 11aad Xakamee oo xisaabi Naftaada 242

Goorma la Xakamaynaya Nafta?..... 250

Waa Maxay Waxyabaha Aad ka Xakamaynaso Naftaada?.....**Error! Bookmark not defined.**

Xakamaynta Farjiga.....**Error! Bookmark not defined.**

Xakamaynta Carabka .....**Error! Bookmark not defined.**

Xakamaynta Shahawaadka Nafta ..... **Error! Bookmark not defined.**

Ku Qanac Qaybta Rabiga Ku Qorsheyey 263

Aduunkan Dadaal Ayaa Dad is Dhaafshay 264

Noqo Qof Bani'adantinimo leh 265

Safarku dheeraa sahayduna yara..... 267

XUQUUQ DHOWR

Xuquuqda buugan waxay u dhowrsan tahay Qoraayada buuga lamana ogola in lagu xadgudbo fasax la'aan.

Afeef

Camal kasta oo uu Aadamuhu qabto ma waayo gaabis ama nusqaan sidaa darted waxan ka cudur daaranaya gef kasta iyo fahan yaraan kasta oo ka timaada qoraalada buuqan ku xusan, waxan ahay bani'adam astaantiisu tahay gaf iyo ilowshiyo, qof kastana waxa lagu qiimeeya heerka garowshiyihiisa iyo garadkiisu yahay, Aan si kale u dhigee hadad ku aragto meelo muhiima oon ka tagay ama wax ay ahayd inan ka reebo oon ku daray waxad ii xisaabisaa basharnimo wixii talo ahna wan ogolahay mahadsanid.

Hibayn

Dhiganahan la magac baxay ***itaalkaygii iyo abaalkii internetka!*** waxan u hibaynayaa waalidkayga iyo macalimiintayda kuwaso ah laf dhabarta noloshayda xisaab li' ayey igu Hagar baxeen mar walba fikirkoodu wuxu ahaa siday iiga dhigi lahayeen qofka aan manta ahay, waxay ahayeen shumacyo iftiin badan oo noloshadayda mugdiyo badan kaso saaray, sido kale waxay ii ahaayeen garab aan liicin,waxay ii ahayeen dhiirigaliyayaal aan daalin, gacan qabtayaal aan caajisin, murug tirayaal aan galad sheegan sidaa darteed anfaca noloshayda iyaga leh, waxanan u hibaynayaa dhiganahan

waalidkayga ugu horayn ajarka iyo intifaaca kaso baxana ilaahay ayaan ugu baryaya inu ugu daro miisanka xasanadka abaalkodana jano ka yeelo.

Ma ilaawin heeganayashii noloshayda waa macalimiintayda e' Macalimiintaydu waxay ahayeen ficilka waalidkaygu sameeyen jawaabi celintiisii markay waalidkay ii garteen inay wax I baraan macalimiintayduna waxay ahayeen kuwo ka jawab celiya ficilka waalidkay oo wax I bara waliba si Hagar la'aana rabi abaalkoga jano haka yeelo, si gaara waxan u xusayaa macalinkaygii ugu horeyey ee I baray wax la barto waxa ugu qiimaha badna oo ah kalaamka Rabi jalla wacala (***Macalin Aw siciid Auh)*** Ahaana sheekhii magalaada gabiley isaga ayaa aflixiyey xaga Qur'anka wan jeclaan lahaa inuu garabkayga ahaado oo uu ogaado inan xaafidad noqday dardaaranadii qur'aanka ku saabsanaa ee uu isiiyeyna aan intifacsaday buugana aan isaga u hibeeyey balse xabaal ayaa manta iga xajinaysa, waxanan ka codsanaya akhriste kasta marku akhrisanayo buugan inuu faataxada u maro macalinkaygaa iyo macalimiinteno dhanba.

Mahadnaq

Mahad dhamaanteed waxay u sugnaatay daah-furka dunida, khabiirka cilmiga iyo xikmad u saaxiibka ah ee suurtagaliyey inaa hirgaliyo buugan, alle swt ayaa ii fududeeyey inaan halkan soo gaadhsiiyo bandhiga buugan dadaal dheer, habeeno tiro badan oo soo jeed badan iyo baadhitaano aan ku xaqiijinayo xogta buugan rasminimadeeda waxa alle ii ogolaaday inaan dhamaystiro oon hor keeno bulshadayda si ay iila dhuuxan ilaha muhimka badan ee buugan ka hadlayo.

Mar ka xigta waxan u mahadcelinyaa waalidkayga oo ahaa garab iyo dhiirigaliyayaal aan hagrasho lahayn ugu horayntiiba iyagan la wadagay inaan doonayo inaan hirgaliyo qoraalka buuga, buugas iyo anigaba waxay nagula garab istaagen hiil iyo hoo waxanay sobob u noqdeen dhamaadka buuga iyo bandhigiisaba mar kale mahadsanidiin.

Marka sadexaad waxan u mahadcelinayaa macalimiintaydii background ka u ahayd noloshayda runtii intay I bareen in ka badan ayaa ii ahaatay, waxan u hayaa abaal buura, abaal badha iyo abaal bur iyo dheerad ah waayo waxay sobob u ahaayen inaan noqdo qofkan manta ahay waxay iguso dulqaaten yarantaydii iyo jaahilnimadaydii, waxay iguso dulqateen fahmo yaridii iyo ciyaalnimada, waxay mar walba rajo ka dhiganayeen inaan maalin uun noqdo aqoonyhanad buuxda oo

bulshadeeda waxtar u leh wana ugu mahadcelinayaa abaalkogana alle jano haka yeelo.

Waxan u mahadcelinayaa abtigay ***khaddar xaamud cabdilahi*** oo ah dhiirigaliyayaashayda gaarka ah mar walba iga waraysan jiray xaalad kasta oo buuga marayo iguna dhiirigalinayey inan dhamaystiro noqdana buug hirgala, mar kale mahadsanid abti.

Ugu danbaynta waxan mahadcelin Qadim ah sii siinaya asxaabtayda iyo bulsha weynta buugan uu gaadhi doono isla markana garab istaag iyo kaso qayb galba usoo muujiyey dhigahan sido kale baahintiisa, daah-furkiisa qayb muhiima ka qaatay, waxan idin leeyahay kaso qaybgalka iyo akhrinta bugan kuma khasaari doontan waayo ah waxad nasiib wacan u yeelan doontan inad heshaan dhiganihii hagaha iyo hogatusaalaynta noloshiina idinku noqon lahaa, mar kale waxan idin leeyahay saaxiibayal abaalkiina beerka ka ogsooni.

Erayga Qoraaga Buuga

Qoraaga buugani waa ***Muna Mahamoud Mouse*** waxan ku dhashay kuna barbaaray ***Gobolka Gabiley/ Somaliland*** halkasan kuso qaatay heerarkaygii nololeed ee kala duwana haday tahay koriin iyo waxbarashada qayb ka mid ahba.

waxan ka mid ahay ardayda wax ka barata jaamacadaha dalka baratana caafimadka gaar ahaan kuliyada ***Medicine and Surgey*** (Daawoyinka iyo Qaliinka) kuliyadayda labaadna waa ***Education*** (Macalinimo) waxan leeyahay han iyo himilo ah bulshadada waxtar oo garab istaag labada kuliyidood een hadana gacanta ku hayaaba waxay ahaayeen hadaf aan ilaa yarantaydii lahaa maan jeclayn inaan wax kale barto waayo waxan ogaa muhiimada ay u leeyihiin bulshada iyo sidan ugu han weynahay inan noqdo kaaliye caawisa bulshadeeda haday tahay dhanka waxbarida iyo dhanka caafimadkaba.

Waxan aad u jeclahay aqoontayda inaan ugu deeq bulshadayda qaaliga ah hada waxan ahay mid ka mid macalimiinta ka howl gala dalka waxan ilaahay ka rajaynaya inuu hankayga igu saacido si aan uga dhabeeyo rajadan ka leeyahay waxqabadkayga.

Buugan wuxu noqday buugaygii ugu horeeyey een qoro waliba aan bulsho hor keeno taa macnaheedu waxa weyi waxa jira buugag kale oon qoray balse anan so bandhigin, lakin hanka ah qoraa inaan noqdo muu ahayn mid hada bilow ah waayo waxan ku dadaali jiray xiligii secondaryga buuganta manhajka ah ee sanad dugsiyeed kastaba aan dhameeyo inaan marka fasaxa la galo anigu aan gacantayda dib ugu qorto iyago summary ah wanan sameeyey oo ku intifacsaday xiligaygii aan ku gudo jiray waxbarshada, mar kasta maan jeclayn in qof ama maclin aan idhaa casharada iso koob balse summary book aan

leeyahay ayaan gacantayda ku samaysan jiray taasina waxay cadayn hordhac ah u ahayd hankayga Qoraanimo.

Taariikhda Buuga

Buugan waxan bilaabay Qoridiisa dhalashadii/curashadii sanadkii ***2022*** waxan fikir buuxa kasii haystay waxan qorayo iyo ujeedada aan u qorayo iyo waliba qaabka aan u qori doono, maan jeclayn in qorshaha buugani uu noqdo mid isku dhexdadsan oo aan fahmi waayo sidan u kala guri lahaa intanu dhamaan sanadkii ***2021*** ayaan sii qorshaystay waxan doonayo inan qoro lakin si taarikhdu igu toosto waxan la sugayey curashada sanadka cusub xiligas oo ayna wax bil ka yarba ay ka hadhsanayd.

Xiligas xaaladayda caafimaad taam may ahayn balse waxan ku jiray xaalad xanuun oon isbitaal ugu jiray mudo 3 sanadood ah, hadana waxa jirtay awood I riixaysay oo isiinaysay dareen aad u xoogan kuna dhalinasay maskaxdayda hindisahan qaaliga ah, Amarna ku siinaysay inan ka fikiro buugan qori lahaa. fikir ka dibna xiiso iyo xalad igu yeeshay inan bilaabo qoristiisa sanadka cususb 2022 ahaa mudo ama wakhi ahaana igumay qaadan wax badan oo waxa ban kuso dhameeyey Qorida ***buuga 3 bilood ama 90 maalmood*** laga yaaba inad tidhahdo gacan fududaa ama gacan culusaa balse hadba waxad wakhtigaa ku qiimayso ahaan maayan wax saxan waayo ah hadad tidhaa gacan fududaa bal qiyaas maalintiiba inta page een qorayey, sido kale hadad tidhaa

gacan culusaana bal qiyaas qof sariir saaran oo bukaan ahi inta page ee uu qori karo iyo xaalada uu ku qori karo? ! Cajiib!!!!!!

Kama jawaabi karid laba gooraba qiyaastada balse ilaahay ayaa I karan siiyey anoo xaalada ku sugan inaan alifo buugan wax awoodayda ahaana may ahayne hibo ilaahay ayey ahayd, lakin sirta ka danbaysay inan ku dhamaystiro buuga intaa leeg wakhtigan shegay waxay ahayd hanka iyo doonista igu jirta oo ahayd mid tamar badan siinasay maskaxdayda iyo murqaha gacmahayga una diidaysay inan ka caajiso ama aan dareemo daal badan, sido kale ahayd xanuun baabiye aan kuso jeedi jiray habeeno badan si aan isku ilowsiiyo xaalada caafimaad daro ee dareemayey الحمد لله علي كل حال.

Dadku markay maqlaan buug baa la qoray waxay u maleynayaan inuu sahal yahay sida buuga lagu qoray lakin sahal maaha inaad wax qortaa waa ***xirfad*** una baahan **b*arasho,*** lakin inaad hadal yaqaan noqotaa waa u ***dhalasho*** ee maaha wax u baahan ***barasho*** sido kale howsha qoraalku waa howl adag oo u baahan ***dhiiranaan iyo dhabar adayg badan*** taasina maaha wax la abarto ee waa loo kala dhashaa kartida.

Ujeedadu aan idin la wadagayo tariikhda buugu waxay tahay inaad ka qaadatan dhiirigalin nafeed ood Aamintaan shakhsiyadiina iyo awoodaha gaarka ah ee ilaahay idinku manaystay xili kasta ood ku jirtidna ha quusanin ee lahow Samir iyo iiman saadiq ah hana ku gafin qaybinta qadarka ee ogolow wax kasta oo Rabi

qayb ku siiyo, Aamin naftaada rabigaana talo saaro, hankaaguna ha sareeyo.

Xaaladii Qoraal Ee Aan Buuga ku Qoray

Waxan wada ognahay akhristaha wanagsani inuu noqon karo Qoraaga wanagsan ee barito, waxan aad u jeclaa mihnada ah inaa noqdo qoraa wax qora oo aragtideeda cabirta meelaha wax lagu qoro waxa ugu badan social media lakin aniga mihnadaydu taa way ka duwanayd oo ka balaadhnayd mana jeclayn inaan media fikradaha dadka kula wadaago lakin waxan jeclahay inaan aqoontayda dadka ugu gudbiyo wax anfacaya oo wakhtiyo badan aduunkan sii yaalaya sidaa darted waxan go'aansaday inaan noqdo Qoraa.

Xiligu marku ahaa **10/8/2020** malin isniina ayaa qadarta alle waxan galay shil gaadhi kadib xalad caafimad oo sanado qaadatay ayaan halka kala kulmay, allle weyne wuxu ii qadaray inaan noqdo qof waxbarashadii iyo xaaladii caafimaad ay meel ugu wada kulmaan, caafimad la'aantiina waxna baran maysid waxna qabsan maysid, waxay sidaasi ahaato xaaladi ee xaaladii caafimadna ay sii durugto uun tii waxbarashada ay taagan tahay ayaa waxan sameyey inaan kala hakiyo caafimadka iyo waxbarashada oo aan dib u dhigo waxbarshadaydii kadib markan caafimado aan bilaabo.

Sanad ayaan hakad galiyey waxbarashadii jaamacada sanadkas waxan ku fikiray inan wakhtigayga galiyo wax I anfacaya aduunkayga iyo aakhiradayda sidan kuso sheegayba taarikhda buuga waxan go'aansaday inaan buugan qoro hankas oo ahaa mid hore igu sii jiray ayaa noqday mid aan markan fursadiisa helay, waxan diiday inan sariirta wakhti la qaato

dabeecadayduna waxay ahayd mid ay ku lifaaqan tahay waxbarasho iyo dadaal bixin aqooneed second kasta oo noloshayda isoo maray wuxu ahaa mid xisaab la dhamaada markan hadaba waxan raali ku noqon wayey inuu wakhtigaygu ku dhamaado xisaab la'aan waxan la qabsan waayey inay qoraxdu igu soo baxdo iguna dhacdo anigo ku jira qol afar darbi ah oon waxba faa'idaysan maalintaasi.

Hadaba waxan uga faaidaystay xaaladii fadhiga ah een ku jiray aqoon iyo waayo-aragnimo Ayna suurtagal ahan lahayn inaan helo waligay sidaa darted waxan go'aansaday si anan ugu mashquulin xaalada ilaahay igu keeney iyo ka hadhida hadafkaygii waxbarsho taasina markad ka fikirto waxay kugu keeno kartaa inad ku qanci waydo qadarka ilaahay ood qoonsato hadaba waxan keensaday waxan ku mashquulo oo wakhtigayga ii qurxiya bulshadaydana ugu cabiro awooda jidheed iyo maskaxeed ee uu qof leeyahay marku hadaf leeyahay, hadaba maahan mowduucyada buugan ku qorani kuwo ikhuseeya ama khuseeya caafimadkayga balse waa kuwo aan ku diraasayey ahaanshiyaha dhabta ah ee

bani'adamka iyo lunsanaanta ay lunsan yihiin dadku ooy u ilaawen dhabnimadoodii loo abuuray.

Buugan mar naftyada ayuu dhiirigalinayaa marna macalin ayuu ii ahaa oo xanuunka iyo awoodayda gudaha ayu barasho ka dhaxaysiinayey idinkana khibrad ayuu idin noqonayaa idam alle markad akhridaan.

Caafimadkaygii iyo Caqabadii Buuga

Bilowga shay kasta waxa jirta inaad la kulanto ama aad dareento dhibaato taas oo ka hor istagasa inaa dhamaystirato hadafkaga markad tahay qof xanuunsanayana waba kasi daran tahay, hadafkaga iyo dabarka caafimad la'aantu heshiis mar walba kuma noqonayan inta badana caawinta aad bani'adam waydiisata waxay iska noqonaysa wax kooban ama sidad rabtay aan lagugu qaban taasina waxay hakad ku keeni karta hankaga.

Ani ahaan waxan dareemayey xiligaa maso wada bandhigi karo balse waxa ugu weyn een marka baahida ugu badan u qabay waxay ahayd caawin dhanka computerka ah iyo talo bixin howlaha qoraanimo ah waayo markan caafimad qabay ee hore waxan ku dhex jiray barashada computerka lkn dhamays man ahayn sido kale heer qoraa la noqdana maan gadhin sidaa darted taasi ayan tilmaamo uga baahna.

Magaca buuga sobobtan ugu bixiyey waa tan waayo ah markad itaal daran tahay kaliya lagu ordo uun yaa I caawiye horta bal waxa la tijaabiyaa awoodada iyo aqoontada iyo fursadaha agtaada yaala, waxan isku dayey inan ka faaidaysto internetka oo itaalkayga ku xoojiyo waana waxa ugu faa'iidada badan een haysano wakhtigan aan nool nahay balse ma wada dareensanin

Caqabadihii aan dareemayey waxan uga faaidaystay internetka isagana ii nolqay kaaliye bilaa hagrasho ah waa ilaahay mahadi bal hadi hadafkaygi uu rumoobayo maxan uga baahanahay bani'adam bariba k sheeganaya waxqabadkiisa, intaa ka dib waxan noqday akhriste buuxa si aan uga qaato cilmi iyo waayo-aragnimo buuxda wana noqday akhriste wanagsan.

Fariintayduna waxa weyi noqo akhriste wanagsan si aad u noqotid qoraa wanagsan oo cabiri Kara fikirkiisa, buugagtan akhriyeyna waxa ka mid ahaa.



1. ***Noqo Qoraa***
2. ***Qadarka iyo Qadaha***
3. ***Garo Qiimaha Naftada***
4. ***Quudhsiga iyo Qiimaha aan yeeshay***
5. ***Kitaabka Waxyiga***
6. ***Muu Akhriyo waalidkay***

7. *Laabta ka soco*
8. *Mashruucii la dagalanka nuurka*
9. *Maalmihii Maldahnaa*
10. *999 xikmadood*
11. *Qab iyo Quudhsi*
12. *Aabe hodan ah iyo Aabe faqiira*
13. *Dabadeed Qofna ma Hadhin*
14. *Wad Riyoote Runtu Maxay tahay*
15. *Salaadba I dhaaftay*
16. *Sirta Guusha*
17. *Takoor iyo Tacadi*
18. *Nolol ka baxsan wel-welka*
19. *Maguuran*
20. *Hankii Saqiiray*
21. *Furaha Akhriska*
22. *Cawodaran*
23. *Baadigoobkii Ruuxda*
24. *Dhanbaalka qur'aanka*
25. *Jidkii janada*
26. *Is dhexgalka aqoonta*
27. *Dhambaalada Qur'aanka*
28. *Furaha fahanka qur'aanka*
29. *jiraalkaygii*



Buugagtas aan soo tiriyey waxay ka mid yihiin buugagtan ka khriyey chanelka ***Somali books*** buug kasta oon dhameeyana waxan ka qoranayey nuxurka uu gudbinayo buugasi iyo fikrado kale oo aan anigu ka dhex arkayey, sidaan filayo odhaahdii ahayd ***akhristaha wanagsani waa qoraagga barito*** wan kaso baxay kaalintasi

Kalinimadaydii iyo Iskafayntaydii Qoraanimo



Doonis iyo hadaf makugu jira mase baqaysaa oo kalsooni daro ma dareemaysaa? Aqbal ahaanshiyahaga iyo hankan kugu riixaya doonistan ka duwan dadka kale, kula hadal naftadaa hadal naxariis leh haday xaaladuhu kugu adkaadana ha niyad jabin ilaahay talo saaro intanad dadka u bandhigin fikirkaga adigu is day inad falanqayso fikrada kugu jirta si aad naftaada u siisid dhiirigalin gudeed kadib kaasho qof kasta ood isleedahay kaalmo ayad ka helaysa.

Itaalkaygii iyo Abaalkii Internetka



Caawiyaha kaliya een haystay wuxuu ahaa internetka xaqiiqatan aduunkan aan hada ku noolnahay wax kasta barashadiisa ama helitankiisu waxay kaga xidhan tahay kaliya dadaalkaga inad ku bixiso, aduunkuna wuu isbadalay oo wax isbarid wax la yidhaa ayaa jira waa laga baxay in wax lagu baro ood macalin uun waxad ka sugtid waxana fican mar walba inaad ahaato qof update ah oo dunida la talaabsan kara, sidan kor kuso sheegayba markan waxan adeegsiga ugu badan siinaya internetka wakhtigayga ugu badana isagan ku bixin jiray si aan u barto xirfadaha iga dhiman waxan kaga maarmey waxkasta oo igaso galayey dad wuxu ii noqday lugo aan ku talabsado waayo ah anigo sariirtayda saran ayan bartay xirdaf kasta oo computer ku jirta sido kale wuxu ii noqday maskax oo waxan dhiirigalin dheeri ah ka heli jiray muuqaalo internetka ku jira oo ka hadlaya Qoraaga Wanagsan intaa wixii ka danbeeyey uma baahan qof danbe naftaydana kuma xidhin oo ma odhan wax ka dhiman oo qof kaga xidhan ayaa jira ilaa laga so gaadhayey dhamaystirtka buuga.

Maskaxda Qoraaga iyo Maxsuulka Buuga

jid dheer oo tabaabusho ahaa kadib waxan go'aan saday inaan qoro buugan waxan cabirtay xaaladayda iyo xaalada dhalinyarada aan isku faca nahay ku jiraan sikale hadan u dhigo waxan cabirtay xaalada iyo fursadaha uu qofka caafimadka qaba dheer yahay qofka xanuunsanaya iyo baraarug la'aanta inaga haysa wakhtigeena soconaya iyo sida hagrasho la'aanta ah ee ilaahay inogu shegay qaflada iyo mooganantа aan ku jirno isla sidana aduunkana loga tagi doono iyado la leeyahay wakhtigii goormu dhamaaday.

Maskaxdaydu waxay ahayd mid ku mashquultay oo ka fikirta siday dadka u baraarujin lahayd uguna cabiri lahayd xaalada dhabta ha ee jirta waxan dareemay nicmoyin badan oo aynu haysano inay jiraan intaan caafimad qabno lakin aynu ogaano markaynu xanuunsano ee itaalkeenu inoo run sheego waxan ku fikiray sidaan xog buuxda uga diyaarin lahaa xaaladahasi naftaydana xasuusin ugu noqota dadka kalana baraarujin u noqota ***maskaxdaydu*** taasay ahayd ***maxsuulka buuguna*** wuxu noqday marjac aan la wada ilaawi doonin aniga iyo idinkaba inoo noqda xasuus Reeb.

Dar-daaran Aan Duugoobayn



Dad iyo Duunyaba Dar-daaran uu ilaahay ka ilaaway ma jiro ilaahay waa dhamaysitare aan cidna la sinayn Rabi (swt) Qur'aanka kariimka ah wuxu u kala qaybshay qayb-qayb qaybo ka mid ahi waxa rabi (swt) kaga hadlayaa dardaaran uu ibnu-adamka uga dardaarmayo aduunka iyo waxa ku dhex sugnaaday oo halaag iyo dhibaato ah ilaahay si cad oo badheedha ayuu inogu shegay aduunkan waxa yaala iyo aakhiro waxa yaala, Anbiyadana ujeedada ugu horaysa ee uu u diri jiray waxay ahayd inay noqdaan digayaal cadaana oo dadka uga diga waxa danbeeya.

Ilaahay subxanahu watacala waxa uu inoga waramay qisooyin wanagsan iyo kuwo xunba oo aduunkan soo maray xiliyo kala duwan sobobtuna waxay tahay inaynu wax ku qaadano lakin hore ayaa loo yidhi dhagihii alle waaniyaa wan samee buugan wuxu salka ku hayaa dardaarakii ilaahay iyo kii suubanaheena muxamed (scw) in badan oo ka mida buuga waxad ku dhex arki donta daliilo qur'aan ah iyo kuwo axaadiis ah waxan uso qaatay si aan uga dhigo nuqulkan gudbinayo wax sugan oo raad-raaciisa la heli karayo waxna waa aragtidayda waxna waa qowlka ilaahay (swt) iyo rasuulka (scw).

Akhriste sidan ku sheegayba buugan waxa ku qoran kuna badan kalaamka ilaahay iyo axadiista

suubanaheena (scw) ha dayicin o danbi ha mudanine dhowr oo dhugasho u lahow.

Nuxurka Buugu

Quruxda sawirkan ka muuqata markad sidaa u aragtaba



turjumad weyn ayad ka qaadanasa sidaa waxa la mida nuxurka buuga ku qoran waxu ku tusinayaa tusmada noloshaada waxanu kugu taageeraya inaad kaligaa istaagto waxanu kugula hadlayaa hadal dhiirigalineed oo aad u sareeya kac oo faca ka roonow ayuu ku leeyahay, kaalingal oo kariimka irko ayuu ku leeyahay kasmadada adeegso kor wax u fiiri buu ku leeyahay kalsooni qab oo koree buu ku leeyahay.

Buugan Muxu La Gooni yahay?



Waxa jira farqi kala duwanaansho ah oo u dhaxeeya buugan iyo buuga kale ee ka hadla bani'adamka noloshooda taasina waxa cadaynasa u jeedka aan u qoray buuga waxan soo koobid mug iyo miisan leh ku sameeyey qaab kasta oo qof bani'adam ah loola hadlo ama lagala hadlo sida buuga magaciisaba ka muuqataba, Sido kale marka qodobadan laga eegana wuu kaga duwan yahay buugan buugata ay isku beesha yihiin

- ✓ Magaca buuga
- ✓ Qoraaga buuga
- ✓ Taariikhda buuga
- ✓ Qaab qoraalkiisa iyo adeegsiga sawiro
- ✓ Mowduucyada ku qoran
- ✓ Nuxurka uu gudbinayo

Waxan alle weyne waydiisanaya inu nagu anfaco dhiganahan kana dhigo mid kaalmeeya akhristayaasha akhrin doona buugan ha ilaawin akhriste inad u ducaysid waalidkeen, macalimineena iyo muslimka oo dhanba

Muna Mahamoud Mouse
Gabiley- Somaliland
1/01/2022
Kala so xidhiidh muuna3m@gmail.com
Facebook: Drs Muna mahamoud

Bilowga buugan iyo ciwaanka buugu isma quseeyan macno ahaana lakin wuxu ka hadlaya buugan wax badan oo tajriibooyin ah oo quseeya dhismaha Nafta.

Cutubka 1aad Baro Naftaada oo Hel Hankaga



Waa doorasho la yaab leh markad raadinaysid ahaanshahaaga meshad ka heli lahayd sobobaha ugu badan ee aan nolosha ugu fashilano waa aqoon darada inaga haysata nafteena iyo awoodaheeda waxan barana qayreen nafteena ka hor, waxan ilaalinaa qayrkeen nafaheena ka hor, waxan danbiyadooda xisaabina qayrkeen nafaheena ka hor, waxan darajaynaa qayrken nafaheena ka hor bal maxa na daaliyey?

Kaalay akhriste oo isoo raac aan dib ugu noqono yaranteeniiye maxad ka xasuusata yarantadii? Maxad jeclay ama maxadse ku hamin jirtay inaad noqoto markad weynaato mase noqotay hada markad weynaatay qofkad yarantadii ku hamin jirtay, waxa hubaala inaad xasuusato wax kasta oo aad jeclayd inaad hesho ama noqoto markad weynato balse hada oo aad weynaay maad noqon qofkad ku riyoon jirtay waayahee maxad yarantadii dib ugu xasuusan weyday si aad u hesho rajooyinkagii aad lahayd yarantadii ma waxad I odhan wan weynaday oo wakhtiga I ilowsiiyey wax kasta mise waxad I ledahay wakhtigaa ii saamixi waayey inaan noqdo qofkan ku hamin jiray?

Waxa runa inaad tahay qof gaara oo ka soocan Aadama kale waxana dhab ah inaad ledahay shaqsiyad cid kula

wadagta ayna jirin kumananka bilyan ee aduunkan kugula nool waxa jira waxyabo ay dadku ku kala soocan yihiina waxa kamida ***diinta,dhaqanka,deeganka,luuqada, muuqalka,sinjiyada iwm*** hadad qof weydiiso su'aal ah kumad tahay/tumad tahay waxa ugu horaysa ee jawab ay ka dhiganayan waa intan so shegay ee ah waxa lagu kala duwan yahay lakin jiri mayso qof si dhaba kugu qeexaya naftiisa waayo ah lama barinba isna maba raadin qofku yahay! Taasina waa mid ka mida ujeedoyinka buuga aan u qoray tasoo aan doonayo inaan si cad u iftiimiyo.

Waxa muhiima inaad naftada barato kadibna fahanto dhaqankeeda iyo dabeecadahad la gaar tahay si aad u ogaato qofkad tahay, badana waxa la arkaa dadka qaarkii inay is moodayaan qofkay isku haystaan lakin maaha oo waxay yihiin qofka ay ku dayanayaan ama tusaalaha ay ka dhigtaan maad fahmin miyaa aan ku jilciyo hadalka adigu hadanad is baran oo anad baran waxad jeceshahay iyo waxad neceb tahay lakin heblaayo/ hebel kale oo aad ka heshay qaabkiisa ama qofnimadiisa aad ku dayatay kadibna sidiisii aad isku aragtay makula tahay inaad tahay qof yaqaana naftiisa?

Ogow akhristow qofna ma noqdo shakhsi ilaa uu barto naftiisa, qofna hadafkiisa ma gaadho ilaa uu kartidiisa barto, qofna ma maro wado sax ah ilaa uu ogaado ujeedkiisa, waligana horumari maysid ilaa aad noqoto qof naftiisa ku filan hadaba manta laga bilaabo kuma wareeri doontid macnaha dhabta ah ee naftaada markad akhrisato kadib.

Nafaheena waa in aynu wakhti siina waliba dhagaysana codka gudaheena ka so baxaya si aynu u helno waxa aynu doonano, maalinta aad naftaada fahanto ama barato ayaad afgaranasaa dadka kalena hadaba waa inaad la mid noqota shinida waxay cuntaa ubaxa waxyna samaysaa malabka sidasa adna laga raba baro naftada kadibna hel hankaga.

Farqiga u Dhaxeeya Nafta iyo Ruuxda

Waxa jira fahan laga haysto naf iyo ruux inay isku mid yihiin balse isku mid maaha fahan buuxa iyo falanqayn dheerba aan kaa siiyo farqiga u dhaxeeya, Ilaahay (swt) mar kasta oo uu ruuxda ka hadlayo isaga ayaa isku nisbeeya yacnii sheegta inu leeyahay ruuxda sida ayaadahan kaga muuqata **فادا سويته ونفخته من روحي فقعو له ساجدن**macnaha Aayada ***(Markan ekeeyo kuna afuufo dhexdiisa ruuxdayda ugu dhaca sujuud)*** lakin muranka lagu muransan yahay nafta iyo ruuxdu hada uun ma bilaabmin ilaa wakhtigii nabi muxamed (scw) waa lagu muransana markii la weydiiyey nabi muxamed (scw) waxay tahay ruuxdu ilaahayba ka jawabay oo yidhi **قل الروح من امر ربي** macnaha ***(waxad tidhahda nabi muxamadow Ruuxdu waxay ka mid tahay arimaha rabigay)*** arimaha ilaahayna cidi ma ogaan karto waxa la saara oo baxda waa nafta ee maahan ruuxda oo ilaahay ayaa qur'aanka ku shegay oo leh **اخرجو انفسكم اليوم تجزون عداب الهون .....** macnaha ***(soo bixiya nafihiina manta***

waxa laydinku abaal marini cadaab darane…) ta dhimashada marta waa nafta ee mahan ruuxda oo ilaahay ayaa leh **كل نفس دائقة الموت** macnaha ***(Naf kastaba geerida way dhadhamin doonta)*** naftu sideedaba ma dhimato ee waxa dhinta jasadka iyadu geerida way dhadhamisaa uun kaliya lakin waxay marta mar xalad jidhka laga saarayo jiritanka naftuna waligeedba wuu jiray xitaa anigon jirinba laahaybana ku leh qur'anka **واد اخد من بني اءدم من طهورهم دريتهم واشهدهم علي انفسهم الستم بربكم قلو بلا شهدنا ان تقولو يوم القيامة انا كنا عن هدا غافلين** macnaha ***(ilaahay ayaa la hadlay nafaha intuu soo xaadiriyey dabadedna su'aalay miyaanan Rabigiin ahayn markasay ku jawabeen haa rabigeen ayad tahaydabadedna naf waliba waxay dooratay wixii laga dhigi lahaa balse ma xasuusanaso sidii rabigeen yidhi).***

Bal u fiirso kalaamka ilaahay nafta adiga ayuu ku tiirinayaa oo waxa uu muujinaya inad adigu ledahay sida ku cad qur'aanka kariimka ah **فطوعت له نفسه قتل اخيه** macnaha **(*Naftiisa waay u qurxisay dalka walalkii)*** **بل سولت لكم انفسكم امرا فصبر جميل**macnaha ***(waxa idiin qurxisay naftiina wana Samir badan yahay)*** waxan ka qaadana macnaha Aayadka ilaahay inuu ruuxda saraysiinaso oo uu weynaynayo sida aayadadkan inoga muuqata suurada Maryam Aayada **17** **فارسلنا اليها روحنا فتمثل لها بشرا سويا**

ILaahay adoomada wuxu u shegaya inay nafta iyagu leeyihiin lagana saarayo laguna soo celin doono waliba laga xisaabinayo maalinka qiyaame wixii uu ku qabtay, waa naynu ognahay naftu inay jidhka oo dhan ku jirto

taaso marka laga saarayo laga soo bilaabayo lugaha ilaa laga gaadhayo madaxa

Lakin ilaahay ruuxda isaga og macnaheeda adiguna cilmi uma lihid oo ma taqanid xagay kaga jirto lagamana xisaabinayo oo waxay ka mid tahay umuuraha ilaahay taasi oyna maskaxdeenu gaadhi Karin.

Waxana xaqiiqa in qofka bani'adamka ahi ka kooban yahay saddex qaybood oo kal ah ***Naf, Jidh iyo Ruux*** hadana naftu iyado ay ka maqan tahay jidhka wuxu sameeya dhaqdhaqaaq mana dhiman oo wuu nool yahay oo wakan hurda hadana wadnihiisu shaqaynaso lakin ruuxdu wata uu ku samaynayo xarakaadka marka aynu hurudno ee aynu riyoonano waxaynu aragna inago meel kale joogna waxa mesha kale joogana waa nafteenii oo riyada dhexdeeda ma awoodno inaan wax akhrino sobobto ah waxasi waa naftii oo qudha oo waxa maqan ruuxdii oo ku hakatay jidhka badana waxa la yidhaa ruuxdu waxay keenta araga, maqalka yo dhaqdhaqaaqa ilaahaybana inaga og walahu aclam.

Noocyada Nafta

Waxan kaso hadalnay farqiga u dhaxeeya nafta iyo ruuxda waxan cadaynay in anay isku mid ahay labadasi inago tusaalayal uso qadanay kalaamka ilaahay haatana waxaynu tilmaamayna qaybaha ama nocyada nafta maadama mowduuceenu ahaa baro naftada waa inaynu ku dabaqnaa diinteenu intay sheegtay si aad u ogaato kaalinta ilaahay ku qiimeyey naftada oo aad isku

miisanto aad isku xisaabiso, Hadaba Rabi subxanahu watacala waxa uu Nafta u qaybiyay saddex qaybood oo kala ah

1. Naf kugu Amrasa xumaanta
2. Naf kala dagaalanta xumaanta
3. Naf Qanacsanaan badan

Hadaba naftada qiimee oo kaalinta aad ku jirto adiga is garanayee is qabo intaan lagu qaban naftana layli waa wax la laylin karayee.

Sidee ku Baran kartaa Naftaad !

Waxa jira markad baranaso naftaada waxyaabo laga doonayo inaad barato sida goobaha waxbarashadaba laynaga doono inaan haysano dirays, bugaag iyo qaliman ayaa nafteenana laynaga baahan yahay inaan ka barano.

Labadana haku kala saarnadan la haanshiyo iyo ahaanshiyo ***Lahaanshiyo:*** waa waxad adigu leedahay ee anay jirin cid kula wadagasa oo hanti ah ama wixii la halmaala ah ***Ahaanshiyo:*** waa waxad adigu tahay shaqsi ahaan.

1. ***Waa inaad garata Qiyamkaaga:-*** Bulsho walba waxay leedahay dhaqan iyo diin u gaara oo ay ku dhaqman hadii aad isku daydo in bulsho kale oon tada ahayn aad ku tijaabiso waxayna dhaqan iyo diin

u lahayn waxad kala kulmi doonta waxan ku raaligalin doonin yacnii Waxan kawada markad tahay qof muslima waliba Soomali ah waxa jira wax dhaqan ahaan iyo diin ahanba ay tahay inaad ka dheerato oo ay tahay inaad ka taxadirto in lagugu fitneeyo sida hadii lagula imaado cabitaan ama cunto muslimka ka xarana waxa kugu wajiba inaad diido oo aad la dagalanto xata hadii dhimasho lagugu hanjabo maaha inaad noqoto muslim daciifa oo diintiisa ka hor marinaya noloshiisa Adigoo diintada haysta oo difaacanaya ayaa ka sharaf badan inaad dhimato adigon diina haysan danbina ku dhacay,waxa taa la mida hadii aad la kulanto wax dhaqankaga kaso horjeeda oo ay samaynayan dad kula faca ama lagugu khasbo inaad samayso waxa kugu haboon in anad diido oo anad u dhawaan, Halkana waxad ka baratay waxad qiyam u ledahay.

2. ***waa inaad barata waxad jeceshahay***:- waxa muhiima inaad barato waxad xiisayso si aad u doorato wax kugu haboon haday noqoto cunto, cabitaan, midab, meel, magac, muuqal iwm waxayabahas iyo kuwo kaloo badanba waxay ka caawinayan inaad doorato doorasho kugu haboon waxa dhacdo ah inaad xiisayso qof aad kala diin tihiin oo kala dhaqan tihiin balse aad xiisayso inaad kaga dayato horumarkiisa hadana qiyamkaga maha oo wad kala duwan tihiin mana aha inaad cid kasta

iskaga dayato waa inaad garata qiyamkaga iyo xiisahaga kadibna cida ay tahay inaad ku dayato aad ka raacd.

3. ***Baro Balwadaada:*** Balwad markan leeyahay Kama wado maandoorye noocu doono ha ahadee balse waxan ka wada waxa jira waxyaabo kale oo aad balwad u yeelan karto waxana ka mida inaad yeelato caadoyin wax akhris, sports noocyadiisa kala duwan ama waxyabo ka duwan oo si maalinle ah aad u qabato hadad ka tagtana aad dareento caajis waxyabahasa inad barata oo naftada ku dabaqda waxay ka dhigasa qof nidaamsan oo noloshisu habaysan tahay.

4. ***Waa inaad barata xidheenkaaga:*** Qof kasto bani'adama waxa jirta meelo uu ka adag yahay iyo meelo uu ka jilicsan yahay waxa jira meelo qaar hadii laga soo maro inaad naftada halis u galiso laga yaabo, hadaba markad barato xidheenkaga waxad si fican iskaga dhex saartay bulshada waxanad si fican u qeexday naftadu shakhsiyaday tahay waxyabaha shucuurtada kicinaya o dhan wad ka fogaanasa qof noca ahna hadad aragto waa qof naftiisa yaqaan waxa u roon iyo waxa u daran.

Hadaba akhriste Waxad si fican u baraty ***dabecadahaga iyo waxad jeceshahay, waxad xisayso, balwadada, xidheenkaga*** intaa markad barato waxad fikrad bilow ah

ka haysata naftaada hadaba waxa muhiima inaad is waydiiso su'ashan **Adigu yaad tahay?**

Adigu yaad tahay?



Hadaba hadii aan ku waydiiyo su'aal ah ***(Adigu yaad tahay)*** ma iiga jawaabi karta adoon jawabtaada raacinayn ***magacaga, qabiilkaga, iwm*** sidaan hubo badankeena way inagu adagtahay isku dayga jawaabtasi hadaan isku daynana waxan ku wareegaysanaa xayndaabka ah lahaanshiyaheena macnaha waxan ka wada waxan leenahay iyo waxan haysano si dhaba uma abaarno shakhsiyadeena iyo waxan ka naqaano, Maalin walba waxad u cararasaa gaadhida yoolkaga iyo ka dhabaynta riyooyinkaaga marar badan waad guuldaraysataa, waad niyad jabta maskax ahaan ayad u daasha, hadana waxad intaa u cararasaa sidii aad u arki lahayd shakhsiyadaada oo horumartay taasina waxay kaga xidhan tahay barashada naftaada.

Hadaba anigoo fikirkaaga ka go'aan qaadanaya ayaa waxan jeclaystay inaan kula wadaago qodobo dhowr ah oo ku tusinaya cida aad tahay kuwaso aan ogahay inay wax kuu tari doonan sida anigaba ay wax iitareen.

1. ***Qof Baajin Badan*:** Midan Aan idhaahdo dadkeena somaalida aad aya***y*** ugu badan tahay sobobto aha waxad mooda shakhsiyad dabeecadeed kaliya inayna ahayn ee ay noqotayba dabecad dadka dhan ka wada siman yihiin inta badan dadku way kusii kala xeel dheeryihiin gaar ahan dadka dabeecadan lihi maaha kuwo ilaaliya balanta kala dhaxaysa dadka wax walba sahal ayay kaso qaadan iskumana culaysiyaan wax kasta oo aad weydiiso ama aad ku balantaan wuxu ku leeyay inshalah wan qaban doona ama wan samayn doona mana qabtaan haday qabtaana wax walba dhayalsi ayay ku dhamaaadan.

2. ***Qof Dhibaato Badan:*** Shakhsiyada noocan ahi badana waxay tahay mid rabshad iyo musiibo hor tagan tahay oo mar kaad aragto ama maqashaba waxa lagu leeyahay hebel waxba ku dhacay wuu ***jabay, shaqadiiba laga so eryay, schoolkiiba laga soo eryay, qofbu jiidhay, xaaskiisi ayay isku dhaceen, way so duday, waa la furay*** shakhsiyadan markad aragto waxabad u malaynasa iyada dhanba inay dhib socda tahay macnuhu maaha inay iyada uun dhibtu la dhalatay balse macnuhu waxa weeyi mushkiladaha laso darsa xal uma hesho mar walba waxay kasii qaada uun isku buuq iyo niyad jab ilaa ugu danbaynta ay sobobto inuu qofkasi nolosha la qabsan wayo oo uu ka dhaco.

3. ***Qof Bukaan ah:*** Bukaanka laba kala ah Kama hadlayo bukaaankii alle keenay balse waxan ka hadlaya bukaan nafsiyan ah oo qofkan muqaal ahan markad eegto waa iska caadi oo markad noloshiisa eegto waxa walba waxay u yihiin sidii la rabay dhaqaalahiisana hadad eegto maxuma,

Hadad familkiisa eegto way wada nool yihiin yacnii noloshiisa waxba kama maqna hadana **pressure** ayunba haysta, wax anay qudhaanjadaba danqarin ayaa isaga danqaraya oo manta dhan ka walwaleyaa, hadad sheeko wadaag noqonata wuxu kaga sheekaynaya balanbalkiisa oo ah waxa uu isagu balanbal u hayso ah Bal qiyaas inta qof ee sidan ku dhacday si aad u ogaato xaqiiqada shakhsiyadan.

- ✓ Imisaa tahriibay iyagoon jirin sobob rasmi ah oo ka danbaysa tahriibkaa oo baduhu liqeen.
- ✓ Imisaa is gubay oo noloshaba is dhaafiyay.
- ✓ Imisaa is daldalay oo macasalameeyay nolosha aduunyo.
- ✓ Imisaa sun cabay sobob la'aan.
- ✓ Imisaa dabaqyo iska soo tuuray isku buuq yaro ay kala kulmeen noloshooda.
- ✓ Imisaa dibjiray oo dugaagu cunay?
- ✓

- ✓ Imisaa ka dhacay noloshii waxbarasho ama shaqo sobob la'aan haday ku sobobeeyana jawab gaaban ay kugu odhanayan ***waan nacay waxbarasho, ama shaqadan***

Way badan yihiin hadad sii waydiisana wuxay ku odhanayaan ma aqaan noloshaydu waxay sidan la tahay, waan nacay nolosha, inaan kali ahaado ayaan raba oo dadka ka dheerado, waa cajiib run ahaan tii balse xanuunkodasi wuxu salka ku hayaa cibaado la'aan iyo towbad la'aan, Haa ma ogtahay hadad alle ka fogaato in noloshaada dhanba halis iyo khalkhal galaso hadaba si anay tasi kugu dhicin ku dadaal u dhawanshaha alle swt.

4. ***Qof Isku dhexdaadsan:*** Shakhsiyada noocan ahi mar wabal ood aragto waxay tahay mid is dhextaala haday guri tahay, haday xafiis shaqo tahay xata hadii laysku dayo oo la yidha ka habeeya mesha wax yar ka dib waaba sidiisi ogow xata qofkan Kama aha basarinimo lakin waka dabci maba rabo inuu nidamsado qolkiisa iyo dharkiisa hadad tidhaa iska hagajina wax dhibaato ah umaba arko wuxu ke leeyahay meesha ana iska leh maxa ka galay cidii rabta haso gashee qofna waji kama lihiye cajiib!.

5. ***Qof Dagan:*** Shakhsiyadan waa mid dagan oo cagaha dhulka ku haysa sida ilaahay (swt) qur'aanka **ku وعباد الرحمن الذين يمشون علي الارض هونا**

(Adoomada ilaahay waa kuwa dhulka ugu socda si degenaan ah) socodkaa degan ee rabi **(swt)** shegay waxay ka turjumasa inu yahay qof garanaya khaaliqii abuuray kana abuuray candhuuf yar oo macno lahayn kana dhigay qof dhan oo soconaya oo maamulanaya noloshiisa wuxuna garanayaa tani inay nimco gaara tahay oo ilaahay ugu deeqay ay tahayna inuu ku mahadiyo, sido kale dadka ku sifoobay sifadan waxa alle ugu balan qaaday janada. Shakhsiyadan waa mid ka fiirsata fal walba intanay falin, waa mid indho dheeri u saaxiiba oo wax kasta cabiri karta intanay dhicin yacnii waayo-araga oo fiiri dheer, Waa mid inta badan buuqa neceb, oo jacel inay nolosheeda maarayso iyado kali ah macnaha ma jecla asxaabta badan Waa mid inta badan bixitaankeedu yaryahay oon socsocod badnayn, waa mid af gaaban oon duul duul badnayn, badanaa hadad wax ka waydiiso dadka yaqaana qofkasi waxay kaga sheegayan wax fican oo ku raaligalinaya.

6. ***Qof isla weyn*****:** Shakhsiyadan waa mid isla weyn oo Aaminsan in dhigeed aduunkaba joogin oo iyada la'aanted ayna waxba kala soconaynin mar walbana iyada loo baahan yahay meshay ka maqan tahay mugdi weyi waa siday shaqsiyadan aaminsan tahaye balse shakhsiyada dhqankeedu noocan yahay

waxanay ogayn in anay kibirka bini'aadanku sifo u lahayn oo ay tahay sifo Rabaaniya waayo adigu manta hadad isku haysato inaad dadka ka maarmi karto waa been oo daqiiqad qudha Kama ahaan kartid, balse ilaahay waa khaaliq oo waxa ugama baahna makhluuqa sida ilaahay qur'aanka ku shegay **ان الله لا يحب كل مختال فخور** ***(ilaahay ma jecla kuwa is waaweyneya ee faanka badan)*** sido kale rasuulkenu **(scw)** waxa u yidhi **لا يدخل الجنة من كان في قلبه مثقال ذرة كبر** ***(jano ma galo qofka qalbigiisa ku jirto in daro leeg oo kibir ahi ku jiro).***

Kibirka laba ayuu ukala saaray rasuulku (scw) xaqa oo laysks waynaysiiyo oo la diido iyo Dadka oo la yaso ama layska waynaysiiyo ayuu nabigu kibir ku tillmaamay, Hadaba waxa haboon waxad dadka dheertahay ee ilaahay kugu gaar yeelay waa inaad u garataa inay tahay nimco aad dadka dheertahay oo ay tahay inaad ku mahadso, ama inaad u garato inay nimcadan tahay mid aad dadka kaga su'aalo badnan doonto maalinka Aakhiro waayo ka xoolaha leh ee ilaahay hantida siiyey iyo ka aan xoolaha lahayn waxay kala danbeeyaan ***500 oo sanadood*** ayuu nabigu (scw) yidhi.

7. ***Qof saluugitan badan:*** Shakhsiyada noocan ahi waa mid quudhi waa iyo qanaaco la'aan isku darsatay oo inta badan ma aragto waxay haysato balse waxay aragtaa waxa qayrkeed haystaan, waana mid inta badan mahadnaqa iyo shukriguba ku adag yahay inta badana waxay indho gaara u ledahay ***cayda, ceebaynta, xumaha, dhaliilaha iwm,*** haday wax tabanaso ama khalad dhacana waxay dhaliilaha xooga badan saarta cida marka howsha ama goobta joogta waloy yeyna shaqaba ku lahaane iyadu mar walba waxay rabtaa inay wax walba u hesho siday u rabto kumana filna waxyar.

8. ***Qof yabaalsan:*** Shakhsiyadan waa mid u malaysa uun ama u fikirta xaga xun ee afka qalaadna lagu yidhaahdo **pessimistic** wax walba wuxu ka eegayaa uun xaga xun dhamaan rajooyinkiisa iyo fikradihiisuba waa rajo xun, hadaad fikir uga baahato ama wax saadali tidhaa sidu noqonayo wuxu kugu bilaabaya rajo xumo, iyo cabsi galin sida: bileeyood guulaysan waydaa, bileed fashilantaa, bileed waxa heli wayda, bile hadad sidaa yeesho dadku ku caayan, bilood kuftaa intaad dadka hortooda maraso, iwm wuxuna aaminsan yahay in aduunkuba wada xun yahay mushkilad oo dhana korkiisa tahay ilaa uu gaadho heer uu mar walba yidhaa noloshan geeri baa dhaanta.

9. ***Qof caajis ah:*** Sifadan waxa lagu tilmaamaa mar daraasad la sameeyay waxa la shegay iyadoo la is barbar dhigayo caajiska iyo khatarta sigaarka in caajisku ka dhibaato badan yahay maantana xanuunada ugu badan ee dadka ku dhaca waxa loo sobobeeyaa caajiska iska fadhiga badani caqligana uma fiicna, caafimaadkana uma fiicna, nolosha aduun iyo ta Aakhirana midna uma fiicna, waxa mesha taala qofka muslimka ahi inuu muntij noqdo oo wax soo saar yeesho badalkeeda halku ka fadhin lahaa ee uu noqon lahaa mid waxun suga Hadaba shakhsiyaadka sifadan lihi haduu manta is dhibo oo is yidhaa bal manta waxqabso oo farta yara fiiqo hadaa waa far fiiqitan kaliya wuxu u haystaa inuu gaadhay heerkii ugu badnaa ee dadaalkiisa markii la arkaba waa tacbaan.

10. ***Qof guulaystay:*** Shakhsigan waa mid Aaminsan samaha iyo rajada wanagsan dooratana wakhtiga iyo goobta ku haboon howl walba qabashadeeda maxsuulkeeda ku kalsoon kuna faraxsan dadka isaga agjooga ee ay howl wadaga yihiin howsha uu hayana ku niyad san kana adag mushkiladaha so wajaha,shakhsigan waa mid is kuday badan wax kasta oo noloshiisa caqabad ku noqdana wuxu isku dayaa sidii uga gudbi lahaa, shakhsigan waa mid isku filan oo intii tamartiis iyo tag tiisa ah halgama

noloshana aan aqoon waxa isdhibitanka loo yaqaan, dhaleecayn kasta oo kaga timaada dadkana xagoodana wuxu u arkaa inay hogaan wanagsan u tahay oo tusinasa wadada saxan.

11. ***Qof calool fayow:*** shakhsiyadan waxay fursad gaara u heshay inuu alle qalbigeeda ka maydho waxa loo yaqaan cuqdada khalad iyo gaf kasta oo noloshiisa loo gaysto wuxu kaso qaada mid isaga lagu imtixaanayo intii tamartiisa ah wuu adkaysta wuuna Samir badan yahay wax kasta oo uu tabanayana ilaahay ayuu usheegta mar walbana isaga wax cafiya waana shakhsiyad qalbiga deeqsi ka ah.

12. ***Qof faxal ah*:** shakhsiyadan ma taqaano waxa ma hayo wax kasta oo la waydiiyo way dhiibta lakin shakhsiyadan waxa badana loo kala qaada laba nooc mid garanasa waxay bixinaso iyo halkay ku bixinaso iyo waliba sobobto ay u bixinaso iyo mid aan garanayn sobobto loo weydiinayo lacagta iyo cida weydiisanasaba lakin waxuun bixisa badana waxa haboon in anad noqon qof wada furan sido kalena anad noqon qof wada xidhan oon shilinnlaga qaadi karayn lakin nabigu (scw) wuxu ummadayda waxa ugu khayr badan kuwa dhexdhexaadka ah marka hadii alle ku siiyey hanti garo inay ka danbayso maalin adiga iyo ilaahay aad isku kali

noqon doontan oo laga weydiin doono shilin kasta halkad ku bixisay.

Ka digtoonow wixii aduunkaga iyo aakhiradada fashaadinaya wax bixi lakin ha u bixin halagu yidhaa waa faxal ama halagu amaano lakin ilaahay dartii haka ahaato garo oo maskaxda ku hay waxad bixinaso iyo cidaad siinaso ama waxad ku iibsanasaba in maalinka qiyaame laga xisaabin doono.

13. ***Qof farxaana*:** shakhsiyadan badana dadku ma wada laha waayo waji furnaanta aan xumaan ka danbayn waa hibo ilaahay dad gaara siiyo waa macquul inad hesho qof waji furan lakin qosol kugu dilaya yacnii afku kugu qoslayo ayuu kugu maagaya lakin shakhsiyadan maaha sidaa waa mid afkay kugu qososho kugu wanajinasa intaad u jirtana kuma so dhaafaso oo duul-duul kuma laha soomaliduna waxay ku mahmahda ***waji furanba la galaya aqal furan lama galo*** macnaha marti haday kuso martido oo aad wanajiso balse anad waji furnaan iyo sheeko wadag la lahayn waxba kuma taalo soo dhawayntadu.

14. ***Qof afku xoogle ah:*** shakhsiyadan waa mid dhib badan shaqayso laguma karo sagashan kaba waxay doonasa xoolo dad leeyahay inay cunto oo ku noolato subixii ayaa laso labisanaya waxa la imanaya maqaaxiyaha iyo meelaha coffee tea ah dadka agtooda laso fadhiisanaya walaga qoslinaya cabaar marka sheeko madaxa lagag waalo dadka ayaa la leeyahay Aar bal koob shaaha keen ood hebel ka qaado! Amase wuxu tagaya hudheelada cuntada laga cuno kadibna mid cuntaynaya ayaa lagu dul dagaya oo loo waayo sheeganaya saxib manta way iga castahe iga cadee oo kale qofkii waba kaa ka naxay ee manta is idhi bal is dhibo ka habee saxibka kadibna xariikii waka u bartayba ee shaqo howl fudaydsi ah mooday lakin waa maangabnimo iyo badilaad aad naftada u gaysanaso oo aad xaqiraso xoogaga kana doorbidaso xoolaha dadka.

15. ***Qof casuuman Markad Aragtaba:*** shakhsiyadan dadka leh markad aragtaba waxay dhexatagan yihiin xaflad kasta oo dhacda ha ahaato aroos,school, qalinjabin ama duco melba kama qadayaal ayaa la yidhaa hadad weydiiso waxay ku leeyihiin hebel oon saxib nahay ayay wax isku yihiin ama maba yaqaanane way ka qabsatay uun inay tagaan lakin ma ilaaweyn dadkasi hadalkii soomalidu ee ahaa ***meel walba ka muuqo waalagu muunad beela***

waba ka dabci inay is hagajiyaan oo xaflad kasta tagaan hadad joojiso ama wa usheeg is tidhana waxa lag leeyahay horumarkaygad ka xun tahay cajib!

16. ***Qofkan waxa la yidhaa cali tiisa hayste:*** waxba ma maqlo sax iyo qaladna makala yaqaano waxa u saxan wuxu arko ama maqlo odhaah kasta ood tidhaa haku sugin inuu ka maqlo ama fikirkaga aamino wuxu ku leeyahay aniga I rumayso ama ka og waxasiye waxa jirta mar loo bahan yahy inaad noqoto cali tiisa hayte balse mar walba hadad la timaado dhaqankan waxa hubaal ah inaad ku fashilmayso go'aa'ada qaldan ee maskaxdyda kaso fulaya kun danbayn doonto shalayto hadanad wax ka badalin flimka.

17. ***Qof muran badan:*** shaksiyadan qofka leh waba madaxa muranka waxa is odhanasa ma isaga loso xilsartay muranka dhanba waxan waxba ahayn ayuu manta dhan kugula marmaraya markasanad ku karayn aamus way dhamatee wuxu sii leeyahay uun siday wax u jiraan sheeg runtad diidantahee mana jecla shakhsiyadan in laga gar helo mar walba waxay ledahay anaa saxan waxany jceshahay inay kaga danbeyso hadalka.

18. ***Qof Run Badan:*** shakhsiyadan waxa mar walba lagu dhaliila maxad runta usheegasa waynu ognahayoo hadan Soomali nahay runtu way ina dhibtaa lakin qof kan wax walba runtu ka sheegi wixii la weydiiyana qarin maayo dadkuna runtiiba intay kula coloobeen ayey u bixyeen war badane inta badana way iska ilaaliyaan inay waxa la wadagana mana jecla sobobtuna waa runta darted.

19. ***Qof faan badane fariid is Mooday:*** shakhsiyadan nolosheeda dhanba sawir gacmeed ayay jeebka ku sidato ayay ka dhigatay markasta waxa layska sawiranaya jawi camiran oo dagan, dad wada faraxsan, reero wada taajiriina oo laga daba dhacay shakhsiyadan dadka ku sifaysan waxay rajo aan run ahayn ka qaatan naftada iyo noloshooda waxad mooda in looga waramay waxa danbeeya aad waxay u jecel yihiin nolosha mala'awaalka ah nay ku noladan ma jecla runta iyo in la tusiyo xaqiiqada noloshooda.

20. ***Qof Anaani ah:*** shakhsiyadka noocan ahi way ku baan yihiin bulshadeena dhexdeeda waxay dabeecad ahaan u leeyihiin inay dantooda ka hor maryaan danaha dadka kale wax kasto loo diro wuxu ku odhanaya aniguba taydii man qabsan aniguba sidan maan yeelin sideen adiga sidaa kugu yeeli yacnii shakhsiyadan markad dhinac kale ka eegto

xaasidnimo ayay waxedu salka ku hayaan dhinacna lexejeclo iyo danaysi ayay salka ku hayaan kala saari karimaysid qofka ay xaasidnimo ka tahy iyo ka ay dabeecad ka tahay shakhsiyadan waa mid Aan kula talin lahaa qofka ku sifaysan inuu dhaqanka ama dabeecada wax ka badalo.

Faa'iidada ay Leedahay is Barashadu

- ✓ **Faa'iido kobaad:** waa inaad si togan iyo si tabanba u garan karto naftaada walibana aad qadan kartana go'aan ah waxa ku wanagsan naftada kana tansuli karto waxa dhibaya.

- ✓ ***Faa'iidada labaad:*** waxad si fudud u dooran karta qofka kugu haboon mustaqbalka taasina waxay ka saacidasa waxad si xeel dheer u garanasa naftada iyo dabeecadhega isla markaana waxad si fudud u xulan karta gayaankaga mid kugu haboon waxanad ka foganasaa dhamaan xidhiidhada khiyaaliga ah ee wakhti lumiska ah dooran karana mid daacada oo runta salka ku haya, Waxan inta badan maqalna dad fara badan oo ku guul daraystay doorashada qofkii ku haboona isla markaan aan garanayn mesha dhibku ka haysto oo ah inay garanayn naftooda tasina ay u sobobi karto inay doortan qof aan ku haboonayn.

- ✓ ***Faa'idada saddexad*:** qofka naftiisa yaqana wuka dulqaad badan yahay qofka aan naftiisa aqoon waayo kan naftiisa bartay hadii uu la kulmo wax dhibaya oo uu ka xanaqayo wuxu isku dayaya inuu naftiisa dajiyo oo dulqaato blase qofkan aan naftiisa baran Makala saari karo waxa dhibaya iyo waxa u wanagsan.

Naftaadu Maxay u Baahan Tahay?



Naftu waxay u baahan tahay in hogaanka loo hayo oo la kobciyo, waxay u baahan tahay in la barbaariyo, waxay u baahan tahay in la ilaaliyo oo lagu ilaaliyo dhaqanka fican oo lagu ilaaliyo akhlaaqda wanagsan oo lagu ilaaliyo towxiidka, naftu waxay u baahantahay in la daahir yeelo oo laga daahir yeelo xanuunada ku dhaca nafta iyo qalbiga sida**: *Shahawaadka, Gaalnimada,Shirkiga, Munafaqnimada, Istuska,Magac-doonka iyo Maamuus-doonka,*** inuu muuqdo bani'adamku wuu iska jecelyahay in laga yaqaano bulshada uu la nool yahay hadad doonto kuba muuqo wacdi iyo waano lakin soo bixidu khayr male waxa khayr leh inu qofku mutawaduc yahay oo ilaahay ku xidhan yahay nafta mar walba cadowgeeda u horeeya waa shaydaanka isku day walbo samayso wuu kaga dabo imanaya haduu shaydaanku kaa calin kari waayo khayrka wuxu isku dayaya inuu ku marin habaabiyo oo

adigo khayrkii shaqaynaya hadana khayr bilaa ajara aad shaqaysato oo camalkaga ka dhigo mid istusnimo, magac iyo mamuus aad ku raadinaso ilaahay agtiisana waxba anad kaga helayn,waayo rasuulku (scw) wuxu yidhi Aakhiro kuwa naarta logu hor shido waxa kamida*:* ***ku waxbixin badnaa, ku qur'aan akhris badnaa,ku jihaad badnaa***,sadexdaba naarta lagu shidaaba ayuu rasuulku yidhi sobobto markii la waydiiyayna waxa uu tillmaamay sida tan.

Kuwa kobaad: Gal naarta ayaa lagu yidhaa kadibna wuxu yidhaa Maalin walba waa nigii qur'aanka akhrinayay markasa lagu yidhada waxad is lahayd halagu yidhaa hebel wuu quraan akhris fican yahay intiina waad ka heshay oo waa lagu yidhi aniga agtayda waxba kuma yaalan.

Kuwa labaad: kii aduunkan badnaaba lagu yidhahdaye maxad ku qabatay aduunkii badnaa markasu yidhahda ilaahow waa nigii bixiyay wixii nimco aad isiisay oo dhan waxa lagu yidhahda waxad u bixinaysay waxay ahaayen uun in la yidhaahdo hebel waa deeqsi oo waa Nin gacan furan intiina lagu yidhi aniga agtayda waxba kuma yaalan.

Kuwa sadexaadba: kuwii jihaadka ku dhintayna waxa la yidhaahda waxad u diriraysay uun in la yidhaahdo hebel waa geesi oo xagu kaa xigo lagaga soo dhici maayo intiina waalagu yidhi aniga xagayga waxba kuma yaalan, Waa kaa isku dayga shaydaanku heerka uu

gaadhsiisan yahay xata hadad cibaadadii joojin waydo adigo wada ayuu kaa Marin habaabinaya oo ajarkii aad ilaahay agtiisa wax kaga heli lahayd ayuu qalbigagi iyo niyadii aad camalka u qaban lahayd kaa jeedinaya.

hadaba si taa looga hortago waxan u baahanahay inaan nafta ilaalino oo nafta sanka iyo madaxa taagasa in hoos loso celiyo ood ilaahay u mutawaadicdo ood hogaanka u xajiso ood ka ilaaliso ***xaasidnimada, bakhaylnimada, isla waynida,iscajabinta***, ***aduun jacaylka*** ka dhowrtid intaaso dhanba inaad ka ilaaliso ayaa loo baahan yahay . Gabyaagii Almusayi waxa uu gabaygiisa ku laha **مخالف نفس والشيطان** nafta iyo shaydaankaba haday ku nasteexeyaan nasteexadooda ka shaki ayuu yidhi waxa haboon in nafta aad ka xakamayso waxay doonto waayo naartaba waxa lagu hareereyay wax kasto naftu jeceshahayba.

Yaa ku Hogaaminaya?



Bulsho walba waxay leedahay hogaamiyayaal ay ku daydaan sidaa si lamida bulshada muslimiinta ahina waxay leedahay hogaamiyeyaal ay ku dayato waxa iswaydiin mudan maxay kaga dayanasa hogaamiyayaasha? Ilaahay waxa uu inogu sheegay qofka doonaya aduun iyo aakhiraba inuu liibano inuu ku daydo nabigena muxamed (scw) oo uu kaga daydo sifooyinkan ***Caqiidada, Dhaqanka, akhlaaqda,*** Ummadana waxa u hormuuda cidda alle doortay iyo inta raacday kuwas ayaa lagu dayanayaa nabiguna (scw) waxa uu ino dardarmay in la raaco sunadiisa iyo jidkii khulafadi honoonsadayd, si loo ilaaliyo nafaheena ayaa waxa la tilmaamay in aynaan ku dayan qayrkeen.

Tusaale ahaan ku dayasho markaan leenahay waxan ka wadnaa qofku waxa uu ku daydaa waxa uu u haysto inay wanagsan yihiin ee isaga la qurxoon mararka qaar waxaba dhacda inanu qofku eegin waxad ku dayanaso maxay diintada waxyeelo u gaysanayan ama dadnimadada oo uu ku daydo uun, hadaba ku dayasho intaa uu nabigeenu inoo tillmaamay ayaa inogu flilan,Waxana uu tilmamaya nabigenu (scw) inaan ku khilaafno gaalada waxyabaha yaryar ee dhaqanka ah tusaale ahaan: ***yuhuudu ma xinaystan ee idinku***

khilaafo oo xinaysta ayuu leyahay nabigu scw sidaan wada ognahayba xinuhu maha wax wayn balse madaahirtu waxay ka warantaa {madaakhisha}Yacnii waxa gudaha ku jira waxa tilmaama ama sawir guud ka bixiya waxa muuqda.

Sidaa waxa la mida suubanahena oo tusaale kasta oo nolosheena ah Ina siiyey ayaa ino diiday inaan gaalo isku eekaysiino manta xaalka aan ku jirto wan ognahay ma nihin ummad u tarbiyeysan sidii nabigu (scw) uu rabay mana so bixin bulshadii uu nabigu (scw) jeclaa inay aduunkan iyo diintaba usoo baxaan.

Yaad ku Dayanasaa?



Bani'adamku waxa uu jecelyahay mar walba inuu ahaado ka lagu daydo ama isagu wax ku dayda Nabigenuna (scw) waxa uu shegay qofka qof kale ama qoom isku ekaysiiyaa inuu iyaga ka mid yahay macnaha (***waxad isku eekaysiso ayunbad tahay***) Sidaa darted ilaahay waxa uu leeyahay In badan oo Ehlu kitaabka ka mid ahi waxay donayaan inay diinta idinka saaran hadaba su'asha mesha taala waxay tahay side bay diinta inoga sari karaan? Jawaabta su'aashu Waxay tahay waxay inoga saari karaan inaan qaadano dhaqamadooda

taasina waxay u fududaynasa inay diinta si tartiiba inoga saran ku darso walibana llaahay waxa uu leeyahay ***(kaa raali noqon mayaan waa gaalada'e ilaa aad tooda aqbasho ood ku dayato)*** Inagu waxan Aaminsanahay ku dayashadoodu inay tahay ilbaxnimo iyo horumar Taasina waxa tusaale cad u ah caalamkan aan manta ku noolnahay xadaarad walba waxay ka timaada xagooda hadii Aanad taa aaminsaneyna waxa lagu xisaabinayaa mid dunida ka dhacsan inaa tahay sidaa owged ayu ilaahay u leeyahay ehlu kitaabku ka tanaasuli mayaan inay mar walba idinla diriraan ilaa inta ay idinka saaran diinta.

Dunidan manta aan joogno awoodena muslinimo ma sarayso oo waa laynaga awood iyo dhaqaale badan yahay iyado tasi jirto hadana waa inaynu ka taxadarna wax kasto diintena inaga fogaynaya cida kaliyee isku eekaysin karna ama ku Dayan karna waa suubanaheni muxamed (scw).

Maxaynu kala Qaadanana?



Bani'adamku kama maarmo inuu wax kala qaato Dadka badankoodu waxay moodan in wax kasta la kala qaato balse taasi maha wax jira waxase jira wax la kala qato iyo waxan lakala qaadan, Waxyabaha la kala qato waxa ka mida dhaxalka bani'adamka oo waligiiba ***Gaal,Muslim,Afrikan,Cadaan,Carab iyo Cajamba*** ay kala qaadan jireen oo aan ula jeedo (cilmiga) ilaa Nabi Aadam wala kala qadanayay kolba qoomka nool ayaa wax ku darayey oo sii gaadh siinayay kuwa ka danbeya, Mana laha summad u gaara oo hadii sida xisaabta oo kale ahaan lahaa cilmigu cid gaara iska lahaan lahayd oo intaana soma gaadheen.

Dadka Mantu Waa Xadaarad Mood!

Sidaan horeba uso sheegnay waxa jira wax ay tahay in la kala qaato oo bulsho bulsho ka qaadan karto iyo waxan lakala qaadan Karin Waxyabaha aan la kala qaadan Karin waxa ka mida waxyabaha khuseeya ***diinta, Dadnimada, Caqiidada, Akhlaaqda, iyo Dhaqanka*** sida isago Rasuulku (scw) uga digaya asxaabta u ku yidhi ***waxad raaci doontaan wadooyinki kuwii idinka***

horeeyay ay mareen wakhtigaa asxaabtii noolayd waxay ahaayen kuwo ku faana diintoda iyo dhaqankoda dadka gaalada ah waxba aan u ogayn ayay ahaayen, Marka la eego qalabka iyo horumarka oo lagaga xariifsana lakin marka diin ahaan la eego iyo waxyiga xagga Rabi ka imanaya iyaga u sareeyay markasu Nabigu ku yidhi kuwii idinka horeyay halkay mareenbad marasan saxaabadi way yaaben! Oo ay su'aleen nabiga (scw) siday macquul u noqonaso inay ku dayano yuhuud iyo nasaaro? Mar kasu rasuulku (scw) yidhi ***(Haa way dhici dontaa mar aad ku dayataan)*** wakhtiga may jirin wax ku dayasho ahi lakin sarbeeb ayay ahayd oo mustaqbalka ayuu nabigu (scw) ka hadlayey balse asxaabtu way layaabanayen siday u dhici donto xaqiiqadii malintii nabigu (scw) ka dhawaajiyey haday taagan tahay oo xata dharkii aynu kaga dayanay intaan wax walba aynu soo dhaafnay dhaqamadan hada taagana waxay tusaale cad u yihiin waxyabaha ayna haboonayn in lakala qaato balse dadku ay kala qaatan.

Akhriste dhuux sheekadan yar ee dhex martay ***Nin Hindiya*** iyo ***Nin British*** ah oo dalka ingiriiska u dhashay waxay si waadixa ku fahansiinaysaa macnaha guud ee ciwaankeena waxbadan oo faa'ido ahna waka qaadan doonta.

Waxaa jiray Nin la odhan jiray ***Mahatma Gandi*** oo ahaa Nin hindiya xornimadeeda u doodi jiray ayaa wakhti wakhtiyada ka mida wuxu tagay wadanka ingiriiska marka ninkan loo yaqaano mahatma gaandi wuxu

xidhnaa laba go' oo sida dhaqanka u ah hindida hadaba isago iska xidhan labadiisi go' ayuu Nin cadaan ahi ku yidhi waa maxay maryahan aad xidhan tahay? Wuxu la yaaban yahay go'a sida uu xaga danbe uga xidhay asal ahaana hindidu qaab ka duwan dadka kale ayay u xidhaan dharka Ninki mahatma gaandi ahaa ee su'aasha la weydiiyey lamuu yaabin weydiinta ninka cadaanka ah tartiib ayaa wuxu soo qabtay Raqabada /qoorta ninkii cadaa oo ku xidhan qoorta karaafad ama tie ayuu mahathma si fudud ugu yidhi waa maxay waxan Aad adigu qoorta ku xidhan tahay? Markasu ugu jawabay ***this is a neck tie*** oo la micno ah ***kani waa luqun xidh***, hadaba ninki mahatma ahaa ismu waaline si fudud ayuu ugu jawabay wuxuna ku yidhi ***this is a back tie*** oo la micno ah ***tana waa dabo xidh*** isla maradaa yare qoorta aad ku xidhatay ayuun baan ana xaga danbe ku xidhay ayuu ku yidhi.

U jeedada sheekada:-

Nuxurka shekadan ayaa waxay tahay muxuu mahatma doonayay inu usheego ninka cadaanka ah? Wuxu rabay inuu u sheego inay maradani dhaqankiisa tahay Kana dhaadhiciyo inay jiraan dhaqano badan oo kala duwan wuxuna mahatma ku yidhi [dhaqan dhaqan Kama fiicna].

Hadaba wuxu ninkaa hindiga ahi ino faa'ideeyey in anay muhiim ahayn inaad dhaqankaaga ka tagto ood mid kale qaadato ado u haysta in kaga laga fiicanyahay u jeedka

sheekaduna waxay tahay waa in aynu garanaa maxaynu dadka ka qaadananaa maxaynu se ka taganaa.
Dadku inta badan waxa faa'idadu ugu jirto ma qataan oo wakhti iyo juhdi iyo caqli ma galiyaan waxan macno samaynayn ayay qaatan.

Waa Qaaliye Qiimihiisa Garo

Waxan u baahanahay waxa qaaliga ah een sidano sidii aynu ku ilaaalin lahayn oo ah Dadnimadeena, Dintena, iyo Iimaankena waxa lo baahanyahay inaynu xifdino diintena oo dadkeena barno waxa dadku Ina dheeryihiina ka qaadano oo cilmigii ah, lakin taa layna dheeryahay intan so qaadanano maaha Tii aynu haysanay inaanu sii dayno ama ka tagno, Sidaa owged waxa waajiba inaan garano ilaahay weynidiisa iyo ku xidhnaanshihiisa oo aynu weydiisano tubta toosan inuu Ina waafajiyo sida marka aynu salaada tukananaba aynu ku ducaysano **اهدنا الصراط المستقيم صراط الدين انعمت عليهم غير المغضوب عليهم ولا الضالين** ***(inuu inagu hanooniyo jidka toosan jidka kuwii alle u nimceeyay ee anu u cadhoon inuu inaga dhig)***
Bani'adamka marka laga hadlayo sax iyo qaladka waxa loo kala qabiyaa sadex qaybood

- ✓ Qayb intay xaqa garatay raacday
- ✓ Qayb intay xaqii garatay ka weecatay
- ✓ Qayb aan xaqaba garanayn

Qaabka labaad een ku ilaashan karno dadnimadeena iyo iimaankenu waa kalsoonida ilaahay inaan ku qabno

Diintiisa, qofka bani'adamka ah haday kalsoonidu iyo yaqiintu ka lunto ma kala saari karo saxda iyo qaladka waxa muhiima inaad garato ilaahay inuu yahay mid kasto cilmi sheegtaba ka kasii cilmi badan, mid kasto wax xukuma ka ugu xukunka fican, mid kasto khabiira kii abuuray cilmi oo dhana xaga alle ayuu ka imaadaa. Kalsoonida intaa leeg hadad rumaysan tahay waxad garanasa oon shaki kagalayn jidka toosan ee xaqa ah

AQbal Ahaanshiyahaqa Qofeed

Markad is barato eed taqaano qofka dhabta ah eed tahay



waxa muhiima noloshaada inad ka dhigto mida ugu saxan ee bani'adam ku hamiyo inuu ku noolado macnaheeda maha inay kaga xidhan tahay inad yeelato hanti ama haysato wax kasta ood jeceshahay balse waxay kaga xidhan tahay inaad tahay qof qanaaco leh oo ku qanacsan waxa uu alle siiyey.

waa inad aaminta qofka dhabta ah eed tahay tusaale waxad tahay qof dabeecad xun oo xanaan dhow sido kale aan bulshada soo dhexgalin oo neceb isdhexgalka kalinimada jecel oo hadal yar qofbaa wuxu u arkaya dabeecadahagu inay yihiin dabeecado xun wuxuna isku dayayaa inu kugu qanciyo inad ledahay dabeecad xun oon la la socon Karin mana aha inad qofka la muranto

ood tidhahdo dabeecadayda waxba haka sheegin adigo diidaya inad maqasho dhaliilaha xun ee laga sheegayo

Balse waa inad Aaminta naftada kuna kalsoonata ahaanshiyahaga qofeed ood tidhahda anigu sidan ayan ahay hadad ila soconaso iyo hadii kaleba muhiimna maaha in dadka dhan aad wada cajabiso oo qof kasta ku aqbalo.

Sir Yeelo

Bashar kasta oo aduunkan ku sugani wuxu leeyahay waxyaab u gaara oo ay tahay inaanu dadka la wadagin, inad ahaato qof waayihiisa labtiisa ku haysta waxay kaa dhigasa inad noqoto qof la Aamini karo oo wax loo sheegan karo markad adigu siraha naftada laabtada ku haysato dadkuna tooda wey kugu Aamini donan, Waa muhiim inaad ahaato qof ku dhaqma xeerarka laso tijaabiyay ee nolosha waa inaad ku socotaa tabaha guushaada aad ku tiigsan lahayd.

Mid ka mida hal ku dhigyada ugu dhiirigalinta badan ayaa ahaa hadal yarow oo howl badnow Halbegeenu ha ahaado, Qasab maaha talaabo kasta ood qaadaso inaad markhaati galiso ama kala tashato dadka qasabna maaha inaad la wadaagto maxsulka talaabo kasta ood qaado markad dadka u sheegto qorshahaaga dadku waxay u kala baxaan saddex midkod

Qof kugu dhiirigaliya hadafkaaga iyo horumarkaaga kuna farxa talabadad qaadaso

Qof kaa waaniya talaabada aad qaad is ledahay oo ku cabsi galiya cabsi galintaasi lama mid ayay noqon karta

a. Mid waa mid kaga aqoon badan talaabadad qaadaso oo khibrad leh dhibkeeda iyo dheefteeda kuna shegay waxad kala kulmi karto si daacadniimo ku jirto kuu waaniya.

b. Midna waa mid aan waxba ka garanayn balse is leh uun guulbu kala kulmiye xaasid oo ka jooji oo cabsi iyo walaac ku fur si uu uga joogsado.

c. Kuwa sadexaad waa kuwo xogtaad kala tashatay u adeegsanaya dacaayad ujeedkoduna ay tahay uun inaad ka caajisto waxqabadkaga.

Hadaba sidaad ku aragto qormadan 75% hadad sirtada dadka la wadagto qorshahagu wuu fashilmaya ama ku guulaysan maysid taasina waa khatar ay tahay inaad ka feejignaato, way jiraan waxyaabo ay tahay inaad dadka la wadaagto ood kala tashato horayna Soomali u tidhi ***(kaligii tashade karaam maleh)***

Waxa jirta sir aan la furi Karin oo dadko dhana ayna wada daalacan Karin ka digtoonow faafinta iyo daacadnimo waranka, Badana inta dad ee wax xumaan ah ay ka sheegayaan kuwii ugu dhawaa markad weydiisana ku odhana marka horeba sir ma lahayn oo

qof kasta xogtiisa haya miyey kula wacan tahay inad iska sheekayso adigo is leh dadka ku nafis oo ku aamin sirahaga kadiban bari markad is qabatan laga faafinayo waxad ahayd iyo waxanada haydnba.

Qiyaano Qarsoon



Kalmada igu kalsoonow ama I Aamin waxay noqotay dilaaga qarsoon ee manta laysku adeegsado dhaawactirkeeda ama ilintirkeedana waxay u adeegsadan iga raalinoqo ama wan ka xumahay muhiim maha inay ku raaligaliyaan kadib markay kalsoonidad ku qabtay burburiyeen, Dunidan Aan hada ku nool nahay waxa fududaatay sida laysku khiyaamo qalbiyo badana looga oohiyo ma aqaan sobobto balse waxan u aanaynaya alle ka cabsigii oo yaraaday ma ogid miyaa akhristow qof bani'adam ah xagtin yar hadad jidhkiisa u gaysato in malinka qiyaame laga jari doono ilaahay hortiisa maxad u malaynasa qof adiga dartaa hurdo iyo raaxo nololeedba uga tagay intee inleeg ayuu leekanaya danbigad gashay?

Markad ku leeyahay sir yeelo hadii macnaha ciwankasi kula fududaadey yayna kugu adkaan aqbalada eryga iga raalinoqo! Waayo waxa la yidhi qof aan garan waxa joga ma garto waxa soo socda waxan kaa ogahay oon kaga

digayaa inad si fudud kula kulanto sobob yar oo cudurdar ah oo waxan ku leeyahay kayd samayso oo qasnaji isku ahow yaanayba si fudud kugu so galin cudurdarada beenta ah ee qalbiyada dadka lagu xado Haday ku yidhahdan I Aamin ha Aaminin waxa kula hadlaya waa qof bani'adam ah oo damac iyo doorasho leh ku xisabtan sida uu hada ku leeyahay igu kalsoonow in isagaba loguso yidhi oo laga baxay kadbna uu doonayo dhaawicii uu dareemay inu qof kale kagaso Aarsado.

Maku Hagay?



Akhriste waxan kuso shegay qof ahaan qofkad tahay intaso dhan markad barato waa inad garata oo iska hubisa qofkad ku Dayan lahayd iyo qofkii ku hogaamin laha lagama yaabo qof intaso dhan naftiisa ka bartay inuu weynayo doorashada uu u doorayo naftiisa iyo noloshiisa meel saxan.

Haani gun bay ka tolantaa ba la yidhiye nuxurka cutubka kobaad wuxu gudbinayaa barashada qofka iyo hanashada hankaga waxan bilow uga dhigay mowducan howl kasto la qabanayaba meel laga bilaabo ayey ledahay tana waa biowga isfahanka naftada.

Cutubka 2aad Isbadal u door Naftaada

Cutubka 2aad Isbadal u door Naftaada



Isbadalku waa marka bani'adamka la badalo siduu u fikirayo, sidu wax u baadhayo, sidu wax u qabanayo, sidu wax soo Saar u leeyahay, siduu naftiisa iyo bulshadisaba u badalayo waxtar ahaan iyo la noolansho ahaanba kaas ayaa la yidhahdaa isbadal.

Akhriste waxan kaso hadalnay mowduuc ahaa ***baro naftada o Hel hankaga*** buugan wuxu hage iyo hogaamiye u noqonaya naftaada mowduucyaduna waxay ahaanayan kuwo xidheedh dheerad ah ka dhaxeeyo oo midba mid kusii tilaamamo! Maxa diidaya markad naftadii baratay inaad isbadal u doorto si aad u noqoto qofkad baratay una gaadho hankaga nololeed.

Dunidan aan manta joogno waxa la yidhahdaa bani'adamka qori la gulama dagaalamo ee maskaxda lagala dagaalama hadaba isbadalka naftaadu rabtaa waxay ku xidhan tahay adiga doonis taadu intay leeg tahay waxa hubaala inay macno kala duwan ku samaynaso markii hore waxad iska Aaminsanayd iyo hada markad buuga akhriday nooca shakhsiyad ah ee kaga so baxday taasi waxay sobob noqonasa inaad is tidhahdo waxad ku fican tahayna sii xooji waxad ku xun tahayna ka tag macnaheeduna wuxu yahay isbadal ayaad a rabta naftaada.

Akhriste haday adiga kaa go'antahay inaad isbadal dhaba oo lagu doogsado bilowdid waxan garab kugu siinaya tilmaamihii kaa caawin lahaa isbadalkaga aniga waa iga diyaare adigu ka go'naanshiyo ma ledahay? Fikir badan iyo faalo badan kadib waxa iso baxday fikradahan ama talaboyinkan Aan kula wadagay waxanan ku rajo weynahay inaad isbadal wanagsan ku Arki doontid noloshaada hadaad sidan yeesho.

Tilmaamaha Saldhig u ah isbadalka



Dhamanteen Waxaynu nahay dad garanay dhibaatadooda hadana maalin kasta gaadha go'aan ah inay isbadalan balse isbadalka oo ah mid u baahan ka go'naansho qofeed iyo Samir badan ayaa waxa inagu adkatay inaan isbadalno nolosheenuna waxay la qabsatay inay ahaato midaan isbadalin.

Waxan malin kasta dajisana qorshayaal tiro badan inago nafteena la rabna horumar iyo hore usocod balse marka ugu horaysa een xalada tijaabinaba waxa ino so baxda oo nafteenu ina tidhahda iska daa wad ku daalasa waxna kuma kordhayaane, hays dhibin kuwiii ka horeeyayba waxbay ku waayene, aduunku waa malmo koobane ka qaado dheeftada,

wixii alle ku qoray ma waayasid! Hadaladas waa kuwa aan ku baajinaso isbadalkeena iyo go'aamadena aan nolosha u dhiganay oo markay nafteenu sidaa inogu sheekayso inagana wan dhagaysan inago u arkana talo soojedin muhim ah kana dhiganan dadka fashilmay tusaalayal.

Waxad is weydiisa waa maxay sobobtad hore ugu talaabsan la'dahay adigo qoomamoonaya ka dibna jawab markad weydo wad is dhiibta adigo aaminaya inanay waxba ku hirgalayn balse timaamahan ka dib niyad jabi maysid hadad sidoda u raacdo.

1. ***Jeclow Waxad Necebtahay:*** Ma ogtahay akhriste inay jiraan dhaqamo ama dabeecado aad ledahay balse aad is tidhahdo iska badal hadana ay dhib kugu tahay inad badasho, ficilka ah isbadalka aad ayad u neceb tahay dhaqankan aad leedahayna waa mid xun oo shakhsi ahaan iyo bulsho ahaanba waa mid lagugu nici karo sidaa darted dadku iyago talo kugu siinaya waxay ku yidhahdan sidan iska badal, wad go'aansata inad iska badasho hadana waad dhibsata isbadalkas adigo naftada ku leh maxa ka galay dadka dabeecadan ilaahayba ku siiyee tusaale ahaan waxa laga yaaba inad xanaaq dhow dahay ama aad qaylo badan tahay ama aad qosol badan tahay dabeecadahas inta badan lama jecla haday siyaado noqdaan adiguna iskama jari kartid oo wadigan isku qanciyey in ilaahay ku siiyey hadaba dhaqanka ah isbadalka eed nacaso ha nicine jeclow siyoofinkad

ledahay ee lagugu nacayana iska badal halka ayuu isbadalka kobaad ee nolol lagu badalaa ka bilaabma.

2. ***Buuqo mustaqbalka Anad doonayn:*** markad jeclaatay inaad iska badasho dhaqanadad leedahayna aad ka dhigto kuwo saxan waa inaad buuqata mustaqbalka anad doonaynin.

Yacnii waa inaad ogaata ood baadha meelaha aay mudan tahay inaad naftaada ka badasho waa inaad warqad ku qorata waxyaabaha aad rabto inaad badasho kuna qorata dhinaceeda kale waxad doonaso inad ku badasho markad intaa qorato waa inad naftaada si kor ah ula hadasha ood tidhahda ***Naftaydaay ma mudan tahay inaad nolol noocan ah kusii jirto?*** Ka dibna isku qanci manta laga bilaao inaad iska badalaso nolol noocan ahna anad mudnayn inaad ku noolato.

Isbadalka waa wax fudud markad go'aan qaadasho dhab ah la timaado naftadu waxay helaysa awood ku riixasa inay isbadasho xata ma niyad jabasid haday waxii aad rabtay sidii aad u rabtay ku noqon waayan waxad ledahay hore usoco wad gaadhasaye adiga isku noqonaya dhiirigaliye nafeed oon caajisin

3. ***Xadid waxyabaha aad samaysid:*** Aad bay u wanagsan tahay inaad xadidid waxyabaha aad samaynasid is weydii maxay yihiin waxyabaha aad donasid inad samaysid? Waxa jira waxyaabo aad hada samaynasid oo aad ogtahay inay qalad yihiin hadana Aanad isku karayn inaad iska dayside hadaba kuwaas xad u yeel oo ka dhig bar bilowga isbadalkaga midna iga qaado isbadal la iman maysid ilaa aad qoroto oo aad taxdo waxyabaha aad rabto inad isbadal ku simaysid, tusaale ahan ardayban ahay waxa I dhibaya akhriska casharada oo wan ku liita waxan so qaadanaya warqad waxan ku qoronaya waxan rabaa inaan iska dhiso akhriska casharada waliba anigo taxaya maadoyinka aad rabto inaan iska dhisto ka dibna warqada dhinaceeda kale waxad ku qoraysa sidaad iskaga dhisi lahayd iyo waxyaabihiii kaa cawin lahaa inaan akriska ku wanagsanato wad qoroysa ka bacdi jadwalkaga maalinle ayad ka dhiganaysa halkasanad ka bilaabaysa isbadalkaga malin walba waxanad samaynasa qorshahad dhigatay taasi waa talaabada saddexaad ee aad u qaadayso dhinaca isbadalkayga oo ah inaan xadeyso waxad rabto.

4. ***Ogonshuhu waa bilowga isbadalka:*** isbadal ma yimaado ilaa aad ogaato waxad doonaso inad badasho xata is fahmi maysid oo garanba maysid inad u bahan tahay isbadal oo markay dadku

dabeecad kugu dhaliilan waad la yaabi donta adigo is bidaya saxsaanaan qofeed waayo isma taqanid mana ogid waxa ka qaldan marka inaad is ogaato waxad ku liidato waxay ku noqonasa difaac ka dhan ah dadka hadaladoda turxanta ah ama caajiska kaga imanaya naftada ee ka hortagan inad horumar gaadho.

5. ***Samayso dhiirigaliye:*** dhiirigalintu waxay ka caawinasa inaad naftada ka dhigto mid bilaa cajis ah oo aan niyad jabin wax kasta oo ay qabanaso hadaba laba meelod uunba laga helaa dhiirigalinta mida waa inad adigu is dhiirigaliso oo aad naftada la hadasho intad muraayad hor istaagto ama meel cidlo ah la tagto kalana hadasho waxa gudahaga ku jira oo dhan waayo adiga isgaranasa waxad u baahan tahay inad naftada kala hadasho qofka ka masuulka iska ahi waa adiga noloshada iyo go'aanadada maxsuulka kaso baxa cida wajahasaana waa adiga marka dhiirigalinta kobaad waa inad adiga kaso fushaa.
Mida kalena waa dhiirigalin banaanka ah taaso hadan awoodi wayno inaan nafaheena la hadalno oo kula hadalno hadalo dhiirigalina waxa muhiima inaad dhagaysato ama daawato vedio dhiirigalin ah kaso ka caawinaya intaad is odhan weyday inuu ku maqashiiyo ama ku daawadsiiyo ka dibna Tamar aad ka dhigato ood hore uga socoto.

6. ***Samayso qorshe:*** isbadal ayad diyaar u tahay waxad rabta inad noloshada wax ka badasho qodobadan waa lagama maarman markad doonaso inad talaabo hore u qaado qof qorshe la'aan meel gaadha ma jiro aduunkaba ilaahay wuxu u sameeyey si qorshaysan oon khilaaf lahayn maxa adigana ku diidaya inad noloshada qorshe aad ku qaabayso u samaysatid qof kasta oo guul iyo horumar loo tiriyaba waa mid noloshiisa dayactiray oo qorsheeyey kadibna iska ilaaliyey waxa loo yaqaan baajinta ama bariyeynta oo u qaabiley qorshihiisa siduu u dhigtay kaidbna noloshiisu noqotay mid la wada hiigsado adiguna la imo qorshe aad adigu ledahay ka dibna hore ugu soco isbadalkad doonaso inad gaadho.

7. ***Ficil la imo:*** howl ma qabsoonto ilaa ficil yimaado adiguna isbadali maysid ilaa aad la timaado ficil hadad samaysato qorshe oo anad la iman ficilkii side bay kugu hirgalaysa inad gaadho hadafkaga nololeed macquul ma tahay hadan I dhahdo guriban dhisaya oon so diyaariyo dhamaan agabkii lagu dhisi lahaa oo dhan ka dibna aan halka fadhiisto anigo sugaya gurigasi inuu dhismo ma dhismaya guri anan shaqaale dhisa ugu yeedhin jawabtu waa ma dhismayo taa waxa la mida isbadal iman maayo ficil la'aantii.

8. ***Qiime isbadalkaga:*** markad samaysatay qorshe eed la timiday ficil waa inad qiimaysa bal halkay wax ku marayan iyo waxa iska kaa badalay tusaale ahaan hadad doonaso inaad dhisto jidhkaga ama inaad is dhuubnaysiiso bilowga horeba qorshahad dajisanaa waxa uu noqonaya inad saxdo cuntadada iyo jimicsigaga jidhed eed samaynaso intu leeg yahay waxad joojinasa wax kasta oo isbadalkaga kaa hor istaagaya waxanad ku dadaalasa xirfad kasta oo ku gadhsiin lahayd hadafkaga ka dibna markad isbadalkii ku dhaqaqdo eed guulaysato waa inad naftada ugu hanbalyeysaa shaqaday qabatay ood tidhahda ***Naftayday Mahadsanid*** shaqo wacan bad haysaye ka bacdina hore uga sii socota u maba baahanasid inaad dadka tidhahdo maxa iska kay badalay adiga iskugu filan qiimayn.

9. ***Isla soco oo is ogow:*** kadib markad qorshe dhigatay eed ficil la timiday hadana aad qiimaysay isbadalkaga waxa markan laga rabaa inaad si joogto ah ula socoto oo aad ogaato inaad gaadhay hadafkagii iyo in kale haday wax ku dhiman yihiina waa inaad isku dhiirigalisa sidad u gaadhi lahayd hadafkasi, sida xaqiiqada ah wad ka maarmi bani'adam qiimayntiisa waayo bani'adamka hadaladiisa waxa ku jira niyad jab iyo cabsi galin adigana horan kugu sheego waxad u baahan tahay hadalo dhiirigalina inad naftada kula hadasho balse

kuma odhan hadalo niyad jab ah dhagayso marka intay kolba wax ka sheegi lahayeen naftada aqbal oo adigu is qiimee haday wax ku dhiman yihiina naftada dhiirigali hadad gaadhayna hore uga sii soco oo naftada jeclow waxqabadkeeda.

10. ***Ka fagow kuwan hadafka lahayn:*** akhriste waxad tahay qof hadaf leh oo raba inuu noloshiisa meel gadhsiiyo waxa jira bulsho inagu hareeraysan oo kala duwan bulshadas waxa kamid ah qaar aan jeclayn inad talaabo hore u qaado xasadnimo iyo xumaan ay ka tahay hadaba waxa laga raba inaad naftada la tashato go'aana aad ka gaadho asxabta ku habon inad la saxibto iyo kuwan ku haboonayn waxana ku mihiima inad noloshada habayso waxa ugu weyn ee isbadalkaga saamaynta ku yeelanaya waa asxabtad la saaxiibka tahay inad hore u socoto ood hadafkaga rumayso ama inad dib dhacdo waxay ku xidhan tahay falcelinta togan ama taban ee asxbatada aad kala kulmaso marka ka fagow kuwan hadafka lahayn si aad u xaqiijiso.

11. ***Ha sugin badalkaga:*** qofka la rabo inuu naftiisa horumariyo waa adiga qofka la rabo inuu noloshiisa ka badbaadiyo dabaylaha halowga waa adiga hadaba waa in anad sugin inta lagu gacan qabanayo ama lagu tilmaamayo qorshaha ku darso qofna masuul kama noqon karo qof kale naftiisa mana horumarin karo naf aan naftiisa ahayn hadaba ha sugin hana

dhagaysan dadka yidhaa iscaawiya oo hebel taagero weydiiso maya warkasi mahan wax saxan naftada adiga masuul ka ah horumarin karana hadanad adigu iska u istaagin qofna kuma kicinayo.

12. ***Marnaba waajibadkaga ha dayicin:*** waajibadka naftada ka sarani waa mid adiga laga xisaabinayo ee maha mid dadka kale wax laga weydiinayo waxad ogaata markad adigu qabsato masuuliyadada inad gudi karto oo qaban karto baylahda kale ee dadyowga subixii inad kacdo oo goobta shaqo ama waxbarasho aad iska xaadiriso waa masuuliyad adiga laga rabo ee mahan masuuliyad dadka kale laga rabo inay ku qabtan hadad iska habsanto ood tidhahdo isii xaadiriya wan so socdaye ogow wad dayacday masuuliyii naftada ka sarnayd bal sheekadan daalaco dulucdeeda.

Sheeko

Wakhti wakhtiyada ka mida waxa jiray boqor xukumi jiray tuulo tuuladii waxa ka dhacday abaar dadka waxay la il darnadeen macluul iyo haraad boqorkii wuxu dadkii ku yidhi waxa loo bahan yahay in lays taakuleeyo si laysku caawiyo sida darted wuxu dhigay weel weyn badhtamaha magaalada waxa uu ku amray dadka in qof kasta ku shubo weelka hal koob oo caano ah, hadii qof kastaaba ku shubo hal koob oo caano ah si fudud ayaan isku kaalmayn karnaa ayu yidhi boqorkii, Amarki waa la qatay goor habeen ah ayaa weelkii la buuxiyay balse ma

garanasa waxa weelka laga buuxiyay? Subixii marki waagu baryey ee uu boqorkii meshii yimiday ayuu arkay weelkii oo laga buuxiyay biyo wuu yabay boqorkii! Wuxu yidhi waa maxay biyahani so ma odhan caano ka buuxiya?

Qof kasta oo ka mid aha dadkii tulada dagana halku jogay kama dhaqaqin yaab darteed sobobto ah dadkan dhamantod waxa mid kasta qalbigiisa ku jiray mar hadii boqorku yidhi caano ka buuxiya weelka adiguna Aanad ahayn kala caawinayo hebel ayaa caano ku shubi doona adigu hal koob oo biyo ah ku dar si ay u badato oo loo moodo in caano laga buuxiyay balse dhamantodna sidasay ku wada fikirayen iyadoo ayna is ogayn sidasayna biyo uga wada buuxiyen.

Dulucda sheekada

U jeedka Shekadani waxay tahay inaan lays ku halayn dadka haday shakhsiyadada noqoto iyo haday howlo guud noqotaba maaha inad waajibadkaga u dayso dadka kale ado ku tashanaya oo is leh inta lagaga baahan yahay iyaga dhamayn doona.

Ogow ma jiro qof kaa qabanaya kaalintad ku ledahay noloshaada kana dheefi maysid hadad isku halayso waxan lugooyo iyo shalayto ahayn mooye.

Sheekada gudaheeda waxan ka fahmana inay xun tahay dhaqanka ah danaysiga waayo hada bulshadan waxa la

yidhi aan is caaino qof kasta haye intu yidhi ayuu naftiisa ku yidhi ma adiga lagu caawinaya ma adiga baahan waa maya koob biyo ah kugu shub ilaa dhamantood ay isku fikir noqdeen.

Fiiro gaara sheekadan kaba soo qaad inay mala awaal tahay balse badana boqolaal la mid ah oo danaysi darteeed wax ku waayey.

13. ***Haka cabsan falcelinta dadka:*** Hadii aad is leedahay dadku waxbay ka shegi doonan ama way ku dhaliili doonan iga raali noqo walaal Midas waxay tahay Riyo Aan marnaba Rumoobayn, Ma jiro qof ka bad baadaya falcelinta dadka hadii aad samayso wax wanagsan waxad tahay kii wax laga sheego sido kale hadad samayso wax xuna waxad tahay kii wax laga sheego uun marka ma jirto meel aad ku nabad galaso iyo sobob aad uga cararto falcelinta dadka.
Waligaa ha filanin inay dadku ku wada jeclaan donaan oo ku wada Amaani doonan midaas hadaa Aaminsantahay waa riyo aan marnaba dhaboobeyn xalka kaliya eed ku badbadaso ayaa ah same adigu waxad ku qanacsantahay iyo waxad ogtahay inay sax yihiin sido kale same waxad ogtahay in alle uu kaga raali noqonayo kadibna hore ugu soco ta dadkana iska ilow oo haba isku mashquulin waxay rabaan ha sheegane.

14. ***Masuul ka noqo Naftaada:*** Dadka nolosha ku guulaystay iyo dadka saamaynaha badan ku leh noloshuba waxay masuul dhaba ka noqdeen nafahooda markasay so dhafen nafahooda oo kuwo kale masuul ka noqden, miyanay sumcad xumo ku ahayn adigo nool oo talaabsanaya in noloshadu baylah sananto oo mar walba cudur daar iyo marmarsiyo u raadiso khladadkaga, Ma ogtahay dadka Aan masuul ka noqon naftoodu waxay noqdaan kuwo marmarsiyo u raadiya khaladaadkoda oo ka cago jiida horumarinta naftooda ogowna aduunka kaligaa ayaa timid kaligaana walaga kaxayn doona kaligana waa lagu xisaabin doona waxad kuso lumisay wakhtigaaga iyo dhalinyarnimadaadii Hadaba ku filnow oo damaano qaad naftaada.

15. ***Ilaali hab fikirkaga*****:** Manta waxad joogta mesha uu ku keenay fikirkagii shalay barina waxad tagi dontaa mesha uu ku geeyo fikirkaga mantu, noloshaada si fican u fiiri xalad walba ood ku jirto waxa sobob u ah fikirkaaga iyo go'aanada aad saldhig uga dhigtay noloshada, Ma ogtahay fikirkeenu inu leeyahay saameyn aad u weyn uuna samaynayo nolosheena oo dhan iyo qaab socodkeda hadii qorshaha fikirkaagu kaa xumaado waxa kaa xumaanaya qorshaha noloshaada oo dhan, ku darsoo wax walba ood ku fikirtid caqligagu inu kuu balaadhinayo noloshadana

waxay isbadalkedu ku xidhan yahay hadba fikirkagu sidu yahay.

Marxaladaha Ugu Adag Isbadalka

Bilow walba caqabad iyo dhibaato ayuu leeyahay hadaba



markad doonto inaad isbadal ku samayso noloshaada waxa ugu adag ee kaa hor imanayaa waa markad ka dhaadhicinasid naftaada xaqiiqada dhabta ah si aad uga dhabaysid hamigaaga.

ogow isbadalku waa sida gantaalka oo kale kaasiyo u baahan awood aad u badan oo kaso saarta hawada si uu ugu gudbo hawada sare haduu u duulo hawada sarana wuxu soo celiyaa qiiq sita hawadii la siiyay kadibna wuxu si fudud ugu dabashaa hawada cufusjiidadka leh taasi waxa la mida markad bilaabsid isbadal inaad xanbaartid culaysyo badan waana in adiga laga helo rabitaan tasiyo ku noqonasa awood ku socodsiisa ood naftada uga masaxdid caadoyinkii xumaa ee aad go'ansatay inaad badasho hana joojin ilaa aad gaadho heer dadkii hore ku yaqanay ay ku garan wayaan yacnii isbadalka wanagsan ee balaadhan eed samaysay dartii, ogow qofkii anan lahayn bilow isbadal oo culays iyo dhibaato badan ma yeelanayo dhamaad ka farxiya oo uu ku nasto.

Qaali bad Tahee Garo Qiimahaga

Sidaan wada ognahay wax walba oo aduunkan kor kiisa yaala qiimo ayuu leeyahay ha yaraado ama ha badnaado adigo ah bashar alle weyne khalqay oo qimo garaa ku siiyey xataa markad dhimato alle waku karaameeyay waliba xuquuqda uu ku siiyey bashar kma siin karo qofna kumaso xaqgudbi karo balse adigo waxaso dhanba og ayaad hadana tahay qof bilaa qiimo ah oo dadka ka hooseeya waxan ka wada gaal warkiisaynu Aaminay oo inagu leh haween hadad tihiin ilaahay xuquuq idinma siinin waan Aaminay oo tii ilaahay ka tagnay sid kale hadan baahano waxad barinaa oo wax ka sugnaa bani'adam inala mid ah oo haduu doono inu diidi kara hadu ina siiyana mano-sheegasho ku jirto waxtarkiisa bal hadaba isweydii meeday sharaftii iyo karaamadii rabiniga ahayd eed bashar oo dhan aad kaga sarayn lahayd.

Waxad ku sharfan tahay kuna karamaysan tahay inad ilaahay adoon u noqoto hadad baahatana aad ilaahay gacanta u taagto ood tidhahdo Rabiyow adigan gacmaha ku hoos haysta ilaahayna isaga balanqaaday noloshada oodhan waxad ku noolan lahayd kuna yidhi I bari wan ku ajiibayaye bal hadaba adigu maxad hoos iskugu dhigi? Inad bani'adam adoon u noqoto ayad ka dooratay inaad ilaahay adoon u noqoto yeedhmadii ilaahay wad diiday sharaftii iyo karamadii rabiga ku siiyeyna wad iska xoortay tii Gaal aan aduun iyo Aakhiraba meel ku

lahayn oo isagiiba lunsan ayad qaaratay qiimaha aad ledahay marka halku jira akhristoow waa iga su'aale?.

Haka Dalban Dadka Daryeel



Akhriste markad doonaso inaad noloshaada badasho sidaan hore kugu so shegay waxa muhima inaad fahanto macnaha isbadalka iyo ahmiyada ugu weyn ee adiga uu ku leeyahay kadibna waa inaad go'aansata waxad badali lahayd iyo wixii aad ku badali lahayd, intaa ka bacdi waxa dhacdo ah markad isbadalka samayanasid inay kaa hor yimaadan culaysyo badan maadama oo wax badan oo caado iyo dhaqan ku ahaa aad ka tagasid oo wax cusub la imaanasid waxa dhici karta inaad garab ama cid ku dhiirigalisa waydo marka waxa muhiima inaad adigu is qadariso oo qiimo isku yeesho garatana isbadalka aad samaynasa inu yahay midkii ku gayn laha badhaadhaha noloshaada.

Midna ogow akhristow tani haku ahaato hal ku dhig iyo dhiirigalin aad ku dhaqaaqdo hadaba markad adigu isku kalsontahay garanasana inaad hayso wado saxa uma baahnid inaad qof ka dalbato inu ku garab siiyo ama ku daryeelo waayo tani waxay hoos u dhigasa qiimahaga iyo sumacada naftaada waxanay caqabad ku noqon karta hadafkagii sidan kor kugso shegay taarikhda buugan aan

ku qoray waxan kula wadagay si aad uga dhigato tusaale dhiirigalineed hadaba ha soconin qof gadashiisa si aad u xasusiso inu u istaago sidii uu ku daryeeli laha ama uu ku garab istaagi lahaa, ha u horseedin naftaada dib u dhac iyo qiimo la'aan.

Waxa jiri doona hadalo xanafa oo kaga iman doona dadka dhinacooda maadama adigu aad ka dalbatay caawimo sidii aad u samayn lahayd isbadal.

Isbadalka Waayuhu Waa Baraha Naftada !

Sida dhaqanka iyo curfiga ah waxay nolosha bani'adamku martaa maraaxilo kala duwan marka laga yimaado koriinka hadaba inta marxaladaha lagu gudo jirana waxa jira isbadalo badan oo yimaada Ta ugu muhiimsan ayaa ah intaad la nooshahay waalidkaga way kaga duwanaanasa intaad ku dhex jirto maraaxilada kala duwan ee nolosha wax badana sidan waad samayn doonta adigoo isbarbar dhigaya marxaladahad ku jirtay markad waalidkaga la noolayd iyo tan aad hada kaliga nooshahay ama dadka kale la nooshahay markastana waxad ka bilaabi doonta intan joogay gurigayaga sidan ayaan ahaa, waxana lay siin jiray, waxana lay qaban jiray,iwm waxan uga socdaa intaad ku gudo jirto la nolanshaha waalidka way yartahay inaad dareento dhib ama mushkilad way kaa ilaalinayaan oo kaa ilaalinayaan

ilaa wixi taagtoda iyo tamartoda noqon waaya mahane inta badana waxay isku dayaan wax kasto wanagsan inay ubadkooda ka hormariyaan naftooda,Taa marka laga yimaado waxa balaadhanasa noloshadii oo waxa isbadalaya la noolanshihii waalidka iyado ay jiraan siyaabo kala duwan oo sobobaya isbadalka hadana ilaa saddex isbadal ayaa lagu soo ururiyaa- inaad guursato, inaad wadanka ama magaaladadii ka guurto, iyo inaad Aakhiro u guurto, mid mahane labada kaleba waxad kala kulmasa isbadalo Aanad hore u arag waxyaabo cajiiba oo kugu cusub oo qaadanaya wakhti ayaa jiri doona sidaad ula qabsan lahayd labadasi waa isbadalada dhaca inta nolosha aduunyo lagu gudo jiro waxa kuso hadhay mida loo gurayo Aakhiro waa ta ugu mucjisada iyo layaabka badan balse nasiib xumo iyadu uma baahna la qabsi iyo waayo-aragnimo sidaad geedida ugu ambabaxday ayaad ugu maqnaanasa soo noqon ma jiro waana ta u baahan inaan ahmiyada siino oo xoojino maadama ayna jirin kaso laabasho iyo dib u sixid.

Akhyaar Noqo

Intaad noloshahay isbadal inuu dhacaa waa ku khasab waana wax lagu qasban yahay maray ahato iyo si uu u yimaadaba isbadal wuu imanaya hadaba waxa muhiimada isbadalka imanaya inaad uga faa'idaysatid dhanka wanagsan ee aduun iyo aakhiraba ku anfacaya, Waxan ku sheegaya faa'idoyinka isbadalka togan laga helo

1. ***Koriin maskax iyo fikirba ah****:* Markad badalato meshii aad ku dhalatay eed ka badalato dadkii aad la dhalatay, dariskaga ahaa, qaraabadaada ahaa eed u badalato dad ay daan wada dhalan, is garanayn xaalado ka duwan kuwii aad kuso noolayd waxad ka aaminsanayd goobta aad hada u badalatay waxyaabo kala duwan ayaad kala kulmasa waxa isbdalaya afkaartad ka aaminsnayd, waxa balaadhanaya qaab fikirkaaga iyo caqligaaga, sido kale waxad noqonasa qof aragti fog oo waayo-araga oo si qoto dheer wax u sheega.

2. ***Bilow cusub:*** Isbadalaku waa fursad aad wax badan ku sixi karto sido kalena wax badan oo anad aqoon ku baran karto tusaale ahaan waxa mudada badan lagu raago ka shaqayn tiisa ama ku sugnaanshihiisa walaga caajisa oo waa la nacaa hadanad ka badalan waxa dhici doonta inaad maalin walba ku tagto

mesha karaahi ama adigo dhibsanaya marka inaad isbadal samaysa mararka qaaer way fican tahay si aad naftaada iyo noloshaadaba u raaligaliso.

3. Fursad cusub: Qofku halka uu joogo fursadaheda wuu madhsadaa hadii aad meel shaqo ah joogto fursada kala duwan ee shaqadaasi leedahay waad ka gun gaadhasa adoo dhameeyay dhamaan fursadihii kala duwana ee shaqadaasi hadii hadana sanado kale oo badan siii joogto waad ku caajisi doonta ugu danbayntana waad nici doonta kana heli maysid wax khibrada sii joogtaynta shaqadasi hadaba isbadalka cusub eed samaynaso waxad ka faa'idasa fursado kale oo cusub iyo khibrado badan iyo xidhiidho ka gadisan kuwii hore marka isbadalka cusubi wuxu ku siinaya fursad cusub.

3. ***La qabsasho dag deg ah:*** Markad samayso dhowr isbadal oo kala duwan waxa howl yaranasa ama fududanasa la qabsashada mesha cusub eed u badalatay waayo waxad soo aragtay dhowr isbadal oo waxad tahay waayo-arag wax badana kugu qaadan mayso inaad dalka iyo dadkaba fahanto waayo soomalidu wxay tidha (nimaan dhul marin dhaayo la') marka inaad shaqo ka tagto oo mid kale tagto, inaad wadankaga ka tagto oo wadan kale tagto, inaad familkaga kuwo ka duwan barato oo xidhiidh la yeelata waxay kaa dhigasa qof fahmi kara dadyow

badan lana qabsan kara isbadalada kala duwan wanay ku caawinasa digo rogoshadaasi oo waxay ka dhigasa mid meel dheer wax ka cabiri kara waxanay ku siinasa bar bilow cusub.

Waari Mayside War Haka Hadho!

Nolosheenu way kooban tahay balse waxa baaqi noqon doona isbadalkii iyo raadadkii wanagsana ee aynu samaynay haday noqoto kuwo ficila ama kuwo odhaahyo ah, dabcan waxan maalin walba ku maahmahna maahmahyo kala duwan oo midba nooc iyo sobob gaara ku timiday mahmahyadsiba dad hore ayaa laga hayaa ilaa mantana waa dhaxal waaray, taasi waxay cadayn buuxda u tahay in waxtarku Aanu ahayn kaliya waxqabad ee xataa uu nqon karo Qowl ama odhaahyo waxa intaa inoo raaca murtiyihii kala duwana ee dadkeni hore dhaqanka u ahaa manta inagaa layna baraa si aynaan wadadii soo jireenka ahayd uga lumin. Odhaahda mowduuca adigo dhaqangalinaya naftada iyo bulshadaba inta la nool yahay ayaa wax laystaraye noqo qof waxtar leh oo noloshiisa wax laga faaido lakin ha noqon dhinte aan la tabin.

Samee Sidan way ku Sacabo Tumi doonaane

Aduunkan aan joogno dhamaantii waa wada tijaabo u fiirso wax ma dhacaan ilaa xal iyo xog laga helo taa waxa la mida waxyabaha agtaada ka dhacaya adiga waxay kuu yihiin imtixaan dadkuna way kugu tijaabinayan bal sidad u xalin lahayd, hadad samayn weydo wax isku day ahna waxay kugu xaman doonan fashilkaga balse hadii aad samayso isku day kasta oo aad ku heli karto xalka mushkiladada waxay kugu sacabin doonan helida iyo xalinta muskhiladii ku haysatay.

marka si aad u noqoto qof wanagsan oo xalin kara mushkiladihiisa haka cabsan caqabadaha kaa hor imaanaya kaliya ku kalsoonow Rabigaa Aamina inaad guulaysanaso intaad ku gudo jirto howshaa xalinteedana hala wadaagin dadka xogoha kaga soo baxay mushkiladahaaga ha xumaadan ha samaadan waayo hadad xog walba dadka la wadaagto arinkaagu wuu badhxayaa dadka xagoodana waxa kaga imanaya hadalo ku niyad jabinaya isku day kasta oo aad samayn lahayd dadku wayka cabsi galinayaan wax walbana waxay kaga Qsheegi doonan waxan aaminsanayd.

waxyabaha tuhunku kaga jirina soo wayso qaado laba rakcadood oo salaatul-istikhaaro ah tuko kadibna dheh Rabiyow sidii Roon I waafaji sidaana waxad ku xalisay mushkiladii iyo dhibaatadii ku haysatay dadkuna waxa kaliya ee ay ogaanayan waa maxsuulka mushkiladaadii markaa iyagoo kugu farxsan ayey ku dhiirigalin doonan

waxayna kuu arki doonaan halyey lagu daydo waxna laga waydiiyo talooyinkiisana aad loo daneeyo.

Ku xidhnaanshaha Rabigaa iyo kalsoonida naftaadu waxay ku dhaxalsiinayan quluubta dadka meel kastoy joogan waxad tahay mid Maamuusan oo sharfan hadalkiisana anu hadal ka danbeynin ogowna waxad adigu iska dhigto ayuunbad dadka agtooda ka ahaanasa.

Cutubka 3aad ku kalsoonow Naftaada

Cutubka 3aad ku kalsoonow Naftaada

Kalsonidu waa inaad Aaminto kartidaada, Awoodaada, xirfadaada iyo khibradaada aad adigu leedahay ee iLaahay ku siiya sido kale waa inaad Aaminto go'aankagu inu sax yahay waa inad aaminto hadafka aad u socoto inaad xaqiijin karto, sido kale kalsoonidu waa Awooda aad dadka ugu sheegi karto asal ahaan qofka aad tahay.

Kalsoonidu waa bilowga wax walbo cusub hadad isku kalsnontahyana waxad bilaabi karta qorshe walba oo noloshaada ku horumarin karto.

Kalsoonidu waa inaad naftaada u aragto mid wax soo Saar leh oo wax so kordhin karta guulna gaadh karta markad naftada ku kalsoonato ayaa hiigsan karta hami kasto aad ledahay.

Kalsooni iyo ixtiraam ka heli maysid dadka hadad naftaada ku kalsonan waydo ogow hadad xaqirto naftaada iyo jiritaankedana waa bilowga jabkaaga iyo guul daradaada Kama turjumaso qofka aad tahay iyo waxad aaminsantahay, balse iyagu kaliya waxay cabirayaan fikirkoda iyo sidaad ula muuqato.

Kalsooni ku Abuur Naftaada

1. ***Qor Qaybaha nolosha ee kalsooni daradu kaa hayso:*** Waxa muhiima inaad naftada ka warhayso ood ogaato halka kalsoni la'antu ka hayso ay tahayna inaad ka howl gasho hadaba qor oo qodobee xiliyada iyo xaaladaha aad darento kalsoon la'anta in badan oo ka mida xiliyada iyo xaaladahasi ogaanshiyaha kaliya eed ogaatay ayaa daawo u ah.

2. ***Ogow waxyabaha aad ku wanagsan tahay:*** inaad ogaato waxyabahad ku fican tahay waxay kaa caawinasa inad noqoto qof isku kalsoon dadka hortoodana kalsooni ku hor istaagto waayo waxad ogtahay waxad ku fican tahay Kama hadli dontid waxad ku xun tahay ama anad aqoonin.

3. ***Haja cabsan falcelinta dadka:*** Cabsidu si dabiiciyan ah ayay qofka bani'adamka ah ugu abuuran tahay balse cabsida dhowr nooc ukala baxda middi waa mid ay keento kalsooni la'aantu waxay qofka ka dhigasa mid aragti gaaban oo aragtidiisa ku cabira kaliya waxay dadku odhan doonan, waxay dadku jecel yihiin, kaliya wuxu wax walba qofkani ku qiimaynaya aragtida dadka tasina waxay ka horjoogsanasa inad hore u dhaqaqdo.

Ma ilowday akhristow kaliya dadku waxay arkaan muuqalka guud waxanay wax ka cabiraan ficiladaada taasina kama turjumaso waxay kugu tilmaaman inaad adigu tahay, Maya ma tihid Aamin naftaada oo rumayso qofka aad tahay kolayba dadku maaha kuwo Aamusaya hadad wax qaldan iyo wax saxanba la timaado mar walba waxay ahanayaan kuwo ka falceliya ficilkaga sidasoy tahayna maaha inad ka cabsato muujinta fikiradaada iyo xaqiijinta jiritaankaga waxad tahay qofka kaliya ee naftiisa garanya waxay ku wanagsan tahay iyo waxay ku xun tahay same wixii sumcadada iyo sharaftadaba u wanagsan kana tag wixii diintada iyo dadnimadaada Waxyeelaya.

4. ***Yeelo kayd macluumad:*** Noloshu Kama maaranto ogaalka waxanay ogayn aqoontuna mahan kaliya tan schoolada ama jamacadaha lagu qaato kaliya lakin inta way ka balaadhan tahay hadanad wax badan baadhin aqoon badana raadin lama doodi kartid oo lama gorfayn kartid asxaabta aad sheeko wadaga tihiin waayo waxba kama taqanid waxay ka hadlayan aqoontuna muuqalka qofkay ka muuqata hadba intu yaqaana run ahantii qofkasi waxu daremaya kalsoni badan waayo wuxu daremaya ugu yaran wxa laga hadlayo inu fikir uun ka haysto tasina waa sharaf oo ceeb kalama kulmayo hadaba yeelo kayd macluumad oo ogaalkaga badi si kalsonidadu u korto.

5. ***Ogolow khaladadkaga:*** Ma khaldame waa ilaahay mar iyo laboba waad khladami kartaa inaad kuftaa ceeb maaha lakin inad kici wayda ceeba waxa taa la mida waxa qofka ka dhiga mid ka kalsooni baxay naftiisa waa inuu khaladkiisa ka dhigo mid uu noloshisa dhan u xidh-xidhnaado oo una waligi hore uga socon macnihiisu mahan hadad mar iyo laba guuldaraysatay in noloshadii halka ku dhamatay balse ogow khaladku waa bilowga guusha iyo kobcinta nafta fursadaha noloshu ma dhamaadan balse adigu khladkaaga how noqon maxbuus.

6. ***Badal hadaladad kula hadasho Naftaada****:* Dhamaanten waan isla hadalnaa nafteena waxban ugu sheekayna hadaba waxa su'aala hadalo nocee ah ayaad ku tidhaa naftaada ma is weydisay wali? Ma ogtahay hadalada aad naftaada kula hadasha inay ka qayb qadanayaan kordhinta kalsonidada ama ay kaa dhigayaan mid bilaa kalsooniya Waxad noqonasaa inta badan waxad nafta ugu shekaysid hadaba aad uga taxadir hadalada aad ku dhahdo naftaada adeegso mar walba hadalo dhiirigalina xata hadi aad guuldaraysatay is dhiirigali adigu.

7. ***Ogow aduunku ma dhamaystirno***: Kalsonida macnahedu Mahan dhamaystirnaansho aduunyadu waa sagaal oo ma tobonowdo qof kasto inaga mid ahina waxa uu leyahay dhaliilo iyo nusqaamo ugaara waxa muhiima inaad kalsooni ku qabto naftaada si kasto ceebo u leedahay haka niyad jabin inaad hore ugu sii socoto wadadaada adoon eegin hareeraha iyo kuwad ku tuhunsan tahay inay ku dhamaan balse fiiri naftaada oo dhiirigali meelaha dhaliilaha ama ceebuhu ka imanayaana oo ka toosi.

8. ***Jooji cabsida:*** Cabsidu waxay dishaa riyada iyo rajada waxay kaa dhigasa curyaan meel iska fadhiya, waxay ka dhigasa mid gaadhi waya hadafkiisa nololeed sido kale waxay ku horseedi kartaa caafimad daro In badan oo inaga mida waxa dib u dhigta cabsida ku jirta naftoda, jooji cabsida oo ku badal geesinimo aad go'aan ku gaadho Waxad u baahantahay geesinimo aad maya ku tidhaa, Noloshu waa Safar gaaban lakin waa Safar qurux badan adiga oo kaliya ayaana ka masuula inaad tayayso ama aad talo xumayso, Haka cabsan mustaqbalka, haka cabsan fashil ama diidmo, haka cabsan waxa dadku ku odhan donaan, naftaada been ha u sheegin Runtana haka cararin.

9. ***Baro sida loo yidhaa maya:*** Xaq ayaad u leedahay inaad diidid waxa aanad Rabin maxa yelay wakhtigaga hibo uma lahan inay kula yeeshan dadku, maalkaguna deeq uma ahan dadka, adiguna uma tihid iyaga shaqaale, mana tihid shamac ay iftiinsanayaan marka ay ku baahan yihiin oo kaliya, Dheh **May**a xitaa hadii ay dhibaso, wayo waa jawab dhamaystiran oo Aan lahayn wax laalabada, Ha noqon qof Aamusan oo wax walba ogolaada kuna dhaqma waxkasta oo ay dadku ku amraan yaan laga yeelin sidii la rabo, yaan lagula dhaqmin waxanad raali ka ahayn xata haday kaa awood sareeyan qadari naftaada oo ixtiraam ha yeelin in sharaftaada iyo sumcadaada adoo nool dhulka lagu jiido hadal oo codka sare u qaad gaadhsiina intii tamartada ah meel walba ood jogto dhacso xaqaaga Aamin oo ku kalsonow in hadi adigu naftaada difaaci waydid aysan jirin qof kale oo ku difaaci doona naftada waxanad waayi doonta jiritaankaga qofeed oo waxad noqon doonta qof nacas ah oo laysku wada tilmaamo laguna maadaysto, Ogolaanshiyahago bataa waxay hoos u dhigasa karamadaada qofeed.

10. ***Daryeel Muuqalkaga:*** muuqalkagu waxa uu si wayn u saameynayaa kalsonida naftaada waxa kula gudboon inaad mar walba ku labisato dhar fican oo asturan hadad rag tahay ama dumar tahay ku labiso dhar asturan oo diintena iyo dhaqankeena wax

yeelayn tani maaha waxad hada baranaso oo diintena macaan ayaa inoo shegtay balse waa qayb ka mida koriinka kalsoonida naftaada.

11. ***Ka sheeke badhaadhahaga****:* Waa qayb ka mida kalsoonida nafta inaad ka sheekayso badhaadhahaga Wana muhim inaad ka sheekayso guulahaaga waayo waxad ka helasaa dhiirigalin nafeed lakin macnaheedu maaha inan ku leeyahay dadka ufaan oo ushegsheg waxad adigu dheer tahay balse waxa weyaan inaad dareento nimcada rabiga ku siiyey kuna mahadiso aragtana kuwa kaa hooseya.

12. ***Jooji dib u dhiga*****:** Dib u dhigu waa waxa lagu magacaabo bariyeynta ama inaa tidhaa Bari ayaa samayn donaa, Bari ayaan qaban donaa iwm, waliba adigo og in dib u dhigasi khasaare iyo wakhti lumis kugu keenayo hadana naftaada caajiska iyo raaxada jecel waxay kugu dhiirigalinasa inaad manta mashquul tahay ood bari qaban doonto inaad howlahaga dib u dhigto bilaa cudur daar waxay ka turjumasa kalsoni daro iyo caajis kugu jiro hadaba kuwan adeegso si ay kaga horjogsadan dib udhiga.

13. ***Lahaanshiyo wacyigalin:*** Waa inaad si maalinle ah u dhagaysataa ama u akhridaa dhibaatoyinka wahsiga iyo dib udhiga si aad uga dheeraato ugana foojignato bariyaynata qorshahaga.

14. ***Geesinimo isku qalabee***: Arin walbo cusub cabsi bu leeyahay haka cabsan qorshe u dajiso iskuna day rajeena inuu maxsuul wanagsan kaso bixi doono rabigana talo saaro.

15. ***Ku tarbiyee naftaada ka tanasulka caajiska*****:** Diintenu inbadan ayay inoga digasa caajiska iyo wahsiga hadad aragto wax laga digayana waa wax dhibaato inoo leh sidaa darted noloshada aduunyana dib u dhac iyo burbur uunbad kala kulmi tii Aakhirana waxba adoon meel dhigan ayaa laga yaaba inaad ka hayaantaba.

16. ***Bare u Noqo Naftaada:*** Side bad uga tanaasulaysa caajiska iyo wahsiga hadii anad adigu naftaada bare u noqon oo anad is dhisin yaa ku maqan oo naftada meel gadhsiin kara wali ma isweydisay su'ashan? Inago joogna wakhti xadaran badan oo wax kasta oo wanagsan aad naftada bari karto miyad I ledahay wali waxan macalin I barin ma baran, xaqiiq hadad sida tahay waxan ku odhan lahaa dhiirigalin iyo wax ku qaadasho nool waxa kugu filan ***aniga*** oo ah

qoraaga buugan eeg oo dib ugu noqo bal xaladahan laso maray qorida buuga iyo sidan uga so gudbay kadibna naftada la sheekayso.

Xidhiidhka ka dhexeeya kalsoonida iyo Quruxda

Quruxda aan ka hadlayaa waxa weeyi sida uu qofku isku arko balse Kama hadlayo sida ay dadku u arkaan waxay kala yihiin laba quruxood oo kala duwan waxa laga yaaba qofku inuu u arko muuqalkiisa mid qurxoon balse taa kaso horjedkeeda ay dadku u arkaan mid foolxun, waxa laga yaaba in dadku ilkihiisa ay qurux u arkaan balse isagu uu dhibsado oo intu dhakhtarka tago soo xidho, hadaba xidhiidhka ka dhexeeya quruxda iyo kalsoonidu waxa weyi tusale ahaan hadii uu qofku isku arko mid cod foolxun waxa dhacasa inuu ka hadli kari waayo goobaha fagaaraha ah ama bulsho dhexdeeda, sido kale haduu isku arko qofku inu yahay qof dabecad xun maso dhexgalayo bulshada oo mar walba wuxu ku cudur daranayaa inaanu jeclayn buuqa iyo isdhexgalka bulshada, sido kale hadii qofku fahmo adag yahay wuxu nacayaa waxbarashadii isago ku marmarsiyoonaya in ayna faa'ido mustaqbal lahayn waxbarashadu dhaqaalaha kaga baxaya waxbarashadana uu ku maaraysan karayo xirfad shaqo Sidaasi ayuuna iskaga daynayaa gabi ahanba waxbarashadii bulshada ka ag dhawna mar walba

waxa uu ku dhiirigalinayaa in sidiisa oo kale la yeelo taasina kuwo badan ayay dib udhac ku keenasa oo tala qaadanaya.

Ogow akhristow kolba waxad u aragto inay qurux tahay ayuunbad ku kalsoon tahay.

Calaamadaha Lagu Garto Dadka isku Kalsoon

Akhriste waxa muhiima markad barato habka naftaada kalsooni ugu beeri lahayd hadana inaad dadka kala barato ood si fudud ku aqoonsan karto qofka isku kalsoon adigo adeegsanaya habka cilmu nafsiga.

1. ***Kasloonida oo ka Muuqata Muuqalkiisa:*** Siyaaabaha lagu garto qofka isku kalsoon kaliyata maaha inaad ka aragto qaab hadalkiisa balse marka u horaysa eed qofka aragtaba waxad ka garan karta inu yahay qof isku kalsoon iyo inaanu ahayn aniguna waxan ka eegayna astaamaha cilmu nafsi ahaan lagu garto:-

a. ***Labadiisa gacmood oo uu isdul dhigo:*** badana waxay sifadan ku tilmaamen aqoonyahanada cilmiga uleh cilmu nafsiga inuu yahay qofka astaantan leh ama badana isticmalaba qof madax ah ama maamul ah oo magac iyo martabad ayay muujinasa astaantani ayay yidhahdan hadii aad aragto qofka oo labadiisa gacmood is dul saaranyihiin ama xaga danbe ee dhabarka marinaya waxay timaamasa kalsooni uu

qofkasi ku kalsonyahay naftiisa iyo ficiladiisaba waa sida ay ina leeyihine badanana maaha astaan muhiim sii ah oo aaynu odhan karno waa bardhig laga dhaqaaqayo.

b. ***Inuu u istaago qaab saxan oo toosan:*** waxad is weydiinasa maxaa ahmiyad ah ay leedahay inuu qofku si saxan u istaaga waxay leedahay oo ay tilmameen khubarada cilmu nafsigu inuu muujinayo qofkasi kalsooni gudo iyo dibadba ah sido kale waxad ka garan karta qofka isku kalsoon qaab socodkiisa sobobto ah qof cabsoonaya ama danbi soo gaystay waxa socodkiisa ku jira harero daymood iyo tuhun uu cid walba ka qabo labadii wada hadlayaba waxa uu modaya in isaga la hadal hayo marka qofka isku kalsooni ficiladasi malaha waayo ah wuxu ogyahay inanu wax danbiya soo samayn sida darted si taxadar leh ayuu usoconaya isagon isqaaqadayn.

c. ***Isticmaalida xubnaha:*** tani waa sifada ugu muhiimsan ee inta badan dadka laga Eego siiba markay kulman labo qof oo isku cusub waxa midba midka kale la socdaa dhaqdhaqyadiisa kuwaso ka turjumaya dareernka guud ee uu dareemayo qofkaasi waxana si fudud loga akhrisan karaa wax badan oo dabeecadahaga ah waxana afka qalaadna lagu yidhaa

(body language) hadaba waa muhiim markad kulamo gaara ledahay inaad dabeecadahan iska hagaajiso waayo ah qofku wuxu ku cabiranaya waxay indhihiisu kugu arko badana waxa la yidhaa daragtida kobaad waa qiimeynta ugu danbaysa ee qof la saaro, Hadaba macnahu waxa weyi waa inad isla socotaa ood fiiro gaara siisa hadalkaga, jawab celintaada, dhaqdhaqaaqaga mida kale xaaladan isku filnow oo ahow mid ka fiirsi badan oo dagan cabsida badan ee aad wakhtigaa dareemasana iska ilow oo daganaanta laasim.

2. ***Daganaan*:** Daganantu waa tilmaan Aan dadku kuwada sifaysnayn balse qof walba uu jecel yahay in la yidhaaa ***Hebel waa qof Dagan*** tana waa astaan kale oo u gaara waxana jira dad fiiro badni iyo caqli u saaxiba badanaa markay dadka la hadlayaana waxad ka dareemasa hadal qabow oo ka fiirsasho ku jirto sido kale soomalidu waxay ku maalmahda ***hadal aan fiirsi loo odhan wuu kula fogaada*** tas*i* oo ay ku tilmamayan in hadalka hadii iyadon laga fiirsan la yidhaa inu kula gaadhi karo meel anad filayn waxan uga socdaa fiirsiga mar ay soomalidu qiimaynasay waxay ku qiimeyeen qiimaha hal neef oo geela o halkasay gaadhsiiyeen.

3. ***Way u dulqatan dhaleecaynta:*** Hadad Eedaha dadku ay kuso jeedinayan u dulqaadato maha macnahedu inad tahay doqon ama fulay balse waxay muujinasa mar hadanad ku sifaysnayn waxa dadku kugu eedaynayan kaliya inaad iska dhago marto hadaladooda dantadana raacato balse hadii ay jirto dhaleecaynta lagugu dhaleecaynaya waxa muhiima inaad ka digtoonato inaad mar kale qaladka gashid una aragtid baraarujin toosa inay tahay.

4. *Dhagaysigooda ayaa ka badan hadalkooda*: Tani waa tilmaan u gaar ah dadka caqliga leh mahan kaliya kuwa isku kalsoon dadkan badana waxay hadlaan in yar waxay dhagaystaan in badan hadaba maxay tahay xikmada halka ku jirta waxa ugu muhiimsan ee kujira waxa weeyi hadal kago bataa waxa uu cadaynaya caqli yaraantada iyo fudayd badnidada, soomli ahaan hadii loo eegana aad bay dadkeenu uga maahmahday oo tidhi (***tanag madhan ayaa u qowqow badan)*** sido kale waxay yidhahdan (***hadal waa dheh iyo dhagayso),*** Marka laga yimaado waxay soomaliduna ka tidhi diinteenu in badan ayay ka hadashay oo inaga waanisay hadalka tirade badan een macnaha lahayn sido kale waxa jira xadiisyo fara badan oo nabiga (scw) laga so wariyay sida من كان يؤمن بالله واليوم الاخر فليقل خيرا او ليصمت { inta badan inaad hadasho iyo inad wax dhagaysato waxa qiimo badan inaad dadka hadalkoda dhagaysato ood ka qaadato wixii

faaido ah kana tagto waxa aan ku anfacayn sido kale dhagaysigu waxu ka dhigaya mid wax badan garanaya oo fahmi kara kolba halka lagala hadlayo oo saaxibul caqliya.

4. ***Waxay Joojiyan sobob u yeelida ficilaooda:*** Dadka isku kalsooni Kama baqaan inay sameeyan qalad haday sameyaana uma raadiyaan cudur daar ama marmarsiyo wixii khalade ka dhacana siday tahay u qaatan isbadal dagdagana way sameyaan.

5. ***Waxay Ilaaliyaan caafimadkooda jidheed:*** Dadka isku kalsooni waxay ilaaliyaan caafimaadkoda oo waxay wakhtigoda u badan la qaatan naftooda si kastoy u qabsato xaalad nololeed ama dhaqaale kama hor istaagto inay naftooda daryeelan ugu yaraan shanta wakhti oo ay tukadaan ayay naftooda ku daryeeli karaan daryeelka caafimad een ka hadlaya maaha mid si khaasa aan uga hadlayo waxa jira dad ilaahay u nimceeyay oo aan hadana muuqal ahaan wacnayn macnaha isku qanacsanayn oo wax ka badal ku sameeyay jidhkooda balse dadkan isku kalsooni waxa alle siiyay ayay ku qanacsan yihiin naftooda ku ilaashadan wana taa kalsoonida dhabta ahi.

6. ***Kama cabsadan inay caawinad way diistan dadka:*** Dadka isku kalsoni Kama baqaan waxay garan wayaan inad dadka waydiiyan balse hadad aragto qof wax garan la' hadana cabsanaya oo qarsanaya wixii aanu garanayn dadka waydiinaya isago isleh waxa lagugu tilmaamo doona wax anad raali ka ahayn ayuu qarsanaya somaliduna waxay tidhhada ***(waxad qarsata way ku qarsadan)*** balse dhaqankasi ka lama sina dadka isku kalsooni oo way ka duwan yihiin oo waxay garanayan iyo waxayna garanayn way kala yaqanaan dadkana inay wax ka korodhsadaan kama caajisan kama xishooda.

7. ***Waxay daraaseeyaan tarikhihii hore*****:** Ma ogtahay faa'idada ku jirta inaad dib u raacdo taariikhihii hore ee dhacay haday noqdan kuwo ah halgankii diinta iyo horumarkedii iyo haday noqoto kuwa khuseeya halganka nolosha dhankay dontaba ha ahaate? Waxay faaido leeyihiin inaad ka qaadato xog iyo aqoon kaa horeysay oo ay tahay inaad ogaato kuna qaadato dhiirigalin,Tusale ruuxiya waxa inoo ah nabigena muxamed (scw) dhibta uu uso maray faafinta diinta islaamka waliba lagana rabo dhamaan khalqiga oo dhan ino gaadhsiiyo waliba intii raacdayna lagu dhibaataynayo maxad u rumaynasan sido kale suubanaheena lagu dhaleecaynayo waxyiga ilaahay anu yahay hadal uu nabigu scw iska yidhi hadaba markad dib u raacdo tariikhahas waxad noqonasa qof dhiiran oo jacel diintiisa siodo kalana doonaya inuu wax

badan taro diinta oo uu noqda mujaahid ilaahay faa'idadas ayey ledahay badhianka tariikhihii hore axad noqonasa qof dhexe oo wixi hore iyo waxa danbeeya ee ilaahay qur'anka inogu sheegayba og o garanaya.

Karaame Naftaada oo Qadari

Ha siinin dadka wax ka badan inta ay xaqa kugu leeyihiin oo ah ***kalsooni, ixtiraam,kalgacal,iyo qadarin*** waayo u baxuba wuu ku dhintaa biyaha badan ilintu ama oohintu kaliya maahan dhibco balse waa kalmado ay adagtahay inaad heshid qofkii fahmi lahaa mararka qaar waxad soo xasuusanasa wanag lagu sameeyey oo aad abaalkiisii garan weyday ama wanag aad qof u samaysay oo xumaan lagugu abaal guday dhibmaleh waxay ka mid yihiin dhacdooyinka nolosha la qabso wax kasta oo ay adag tahay inad la qabsataa aamina aduunku inuu isbad-badal badan yahay hadii wakhtiga iyo waayuhu ku diiden waxad doonasay ama aad rabtay ahow waxay ku ogolaaden oo aqbal kuna Samir waxa soo socda wacnaan doone, karaame naftada oo kalmaysi ka dhigo digriga ilaahay kana dheerow wax kasta oo dhaawac ku gaysanaya ogowna hadad weydo waxad jeclayd in ilaahay ogyahay maslaxadadu meshay ku jirto wixii dank ugu jirtana isaga kaa yaqaana qanaaco lahow.

Hadaba afartana waa dilaaga sharaftada digtooni ka lahow ***Hadalka badan, Faanka badan, Muranka badan iyo Balan furka*** sobobto ah sharaftada iyo qofnimadada uma fiicna waxanay ku horseedayan wax anad cidhibtiisa danbe mahadin doonin karaamada aad bulshada dhexdeeda ka rabtana heli maysid.

Dabuubtadu Yaysan Dadka Dhibin

Maxay tahay kalsoonida aad sheeganasa hadiiba anu hadalkagu ahayn mid naxariis iyo daganan ku dheehan tahay oo aan dhibayn qalbiyada dadka hadii wax lagu mooday oo maciin ama masuul laga dhigtay macnaheedu maaha inad dadka ugu sarayso oo aad xaqirto markay wax ku su'aalanba ma aad xamato oo xumayso

Ogow wax kasta oo aad tahay ama aad haysato ilaahay sobobtad ku noqotay waxad tahay dadka ayuu ku so mariyey iyaga wax ka dhigay waxna aad ku tahay wax kasto kugu dhacayana iyaga ayuu ilaahay sobob kaga dhigaya hadaba ka kibir badnaanin dadka s isku mid aula soco oo hakala xigtaysan nina waalidka ma dhaline.

Cutubka 4aad Maare oo Maamulo wakhtigaaga

Cutubka 4aad Maare oo Maamulo wakhtigaaga

Wakhtigu waa mid ka mida Nimcooyinka iyo hibooyinka qaaliga ah ee Allah (swt) mooye aanay cidkale bixin waana hanti hadii ay mar ku dhaaftana Aan dib loso celin Karin waxa la yidhaa ***wakhtigu waa noloshena*** iyadoo laga cabiraayo qiimihisa aan wax lo dhigaa jirin sido kale waxa la yidhaa ***wakhtigu waa lacag*** iyado laga cabiraayo qiimaha uu leeyahay sido kale maahmah somaliyeed ayaa *tidhaa* ***wakhtigu waa sida seefta hadaanad goyn isaga ku goynaya*** iyado laga cabiraayo socodkiisa iyo orodkiisa aan joogsi lahayn ee uu ku jiro.

Wakhtigu waa nolosheena maadama Aan ku xisaabino Da'aha, sanadada iyo wax qabadkena maalinlaha ah waliba Wakhtiga wala dareema sobobto ah waxad kaliya ee aad dareenta wakhtiga xiliga dhibaatada, murugada iwm markad faraxsan tahay kuma tirsana wax culays ahna kuguma haayo.

Wakhtigu waa mid kamida khalqiga ilaahay abuuray iLaahayna waa abuurha wax kasta oo dunidan saaran sidaas darted wakhtigu Alahii abuuray kuma socdo mana saameyo, Waxa macquula inaad isweydiiso side ayuu wakhtigu ku noqday mid ilaahay abuuray ama la yaab kugu noqoto hala yaabin waxad ku qanacdo ayan ku hayaye waxanan kaga sheegaya intii alle iyo rasuulkiisu (scw) ka yidhahden, ILaahay waxa uu inogu tillmaamay

meelo badan oo qur’aanka ka mida wakhtiga fiiri sida qaybo ka mida suuradaha ilaahay ugu dhaarto isago tilmamaya wakhtiga iyo xiliyadiisa kala duwan waxana kamida **سورة العصر, سورة الفجر, سورة اليل, سورة الضحي** Sidaa darted culimadu waxay yidhahdan waxa ilaahay ku dhaarto waa tilmaam lay nogu tilmaamayo shayga muhiimadiisa gabayaagi carbeed ee gabyey waxa uu yidhi ***garaaca wadnaha qofku wuxu fariin u dirayaa qofka laftiisa isagoo leh noloshuba waa daqiiqado iyo ilbidhikhsiyo.*** Nabigeenii suubanaa scw waxa uu yidhi **نعمتان مغبون فيهما**

كثير من الناس: الصحه والفراق Macnha xadiiska ***laba nimco ayaa dadka badankiisu mooganyhiin: caafimaadka iyo firaaqada].***

Wakhtigu waa mid ka mida arimaha Aakhiro ilaa laynaga xisaabiyo aynaan ka dhaqaaayn goobta is xisaabinta waxana uu yidhi nabigenu (scw) isago ka hadlaya arinkaa **لا تزال قدم عبد يوم القيامه حتي يسال عن عمره فيم افناه , وعن علمه فيم فعل وعن ماله من اين اكتسبه وفيم انفقه وعن جسمه فيم ابلاه,** Macnaha ***Qofna meshiisa ka dhaqaaqi maayo ilaa laga xisaabiyo waxa u kuso qaatay dhalinyarnimadadii, camal ahaana waxa uu samayn jiray, maalkiisana waxa uu ku bixin jiray, iyo waxa uu jidhkiisa ku gaboojay****).*

Ummad walbana waxay ilbaxnimadedu leegtahay intay wakhtigoda ka faa'idaystan waxa uu tillmaamay nabigeenu (scw) isago ino dardaaraya wakhtiga waxa uu yidhi

اغتنم خمسا قبل خمس : شبابك قبل هرمك , وصحتك قبل سقمك , وغناك قبل فقرك , وفراقك قبل شغلك , وحياتك قبل موتك ***(shan ugu sii faa'idayso ka hor intanay shan iman dhalinyarnimadada ugu faa'idayso ka hor intanad gaboobin, caafimakaga uga faa'idayso intanad xanuunsan, hodanimada uga faa'idayso ka hor intanad faqiir noqon, fursadahaaga uga faa'idayso ka hor intanad mashquulin, noloshadana uga faa'idayso ka hor intanad dhiman).***

Wakhtiga waxa lagu tilmaama inuu ka mid yahay sadexda hantiyod ee aduunkan yaala sida marka laysku daro ***wakhtiga + dhulka + Dadka*** waxa la sheega in wakhtigu ka duwanyahay dhamaan hantiyaha kale ee aduunka yaala waxaanu la gaar yahay sifoyin dhowr ah oo ay ka mid yihiin, Wakhtigu waa hanti go'an oo xadidan qof kasto bashara oo dunidan jooga waxa uu leyahay ***24 saacadod, 1440 daqiiqadod 86400 ilbidhikhsi*** intaso isbiirtasayba cimrigaaga ah.

Kuna darsoo wakhtigu Ma kaydsamo dhamaan hantiyaha kale kaydka way galaan sida aqoonta, maalka iwm Lakin wakhtigu kaydka magalo 1saac hadu ka tago noloshaday ka go'antahay mana so noqonayo.

Wakhtiga lama iibsan karo dhamaan nolosha kale odhan wala iibsan Kara wala kiraysan karaa lakin wakhtgu la mid maaha Keena ugu taajirsan iyo keena ugu faqiirsan waxay wada haystaan saacado isku mida midkeen hadu u baahdo saacad dheeri ah ma heli karo waxa uu leeyahay xasan al- basari , **انما انت ايام مجموع كلما مضي يوم مضي بعضك يا ابن آدم نهارك ضيفك فاحسن اليه , فانك ان احسنت اليه ارتحل بحمدك, وان ا سات اليه ارتحل بدمك** (Ina Aadanow waxad ka koobantahay habeeno iyo maalimo waliba Aadbay u yaryihiin markastoy qayb tagto waxa tagtay qayb cimrigaaga ka mida, ina Aadanow maalintaadu waa martidaada ee wanaaji hadii aad wanaajiso waxay socdaali oo dhamaani iyado ku mahadinaysa hadad xumaysana waxay socdaali oo dhamaan iyado ku dhaleecaynasa).

Mudnaanta Sii Wakhtigaaga

Maaraynta wakhtigu waa qorshaynta iyo istaratiijiyada aad noloshaada ku marayn lahayd waxana muhiima inaad samaysato xeelado wax ku oola oo aad iskugu dheeli tirto baahiyaha isdhafsan waxkasta oo aad haysatana waxa ka qaalisan wakhtiga oo aad maarayso waxana muhiima inaad ku dabaqdo noloshada talaaboyinkan dhaxalgalka ah.

1. ***Xoogi xidhiidhka Rabiga (swt):*** Wakhtigu waa hadyad ilaahay kugu deeqay aduunkan waxa yaalana waxa ugu qiimo badan waa wakhtiga ilaahayna waka

xisaabin doona daqiiqad kasta oo wakhtigaga kamida waxad ku qabatay hadaba waxa muhiima madama uu miisanka intaa leeg leeyahay wakhtigu inaad uga faa'idaysato dhanka wanagsan maalintii ugu yaran **5** jeer ayuu ilaahay kugu leeyahay inaad caabudid hadad samayn waydo oo dayacdo soo faa'ido la'an maha hana noqon kuwa odhan doona ***ilaahayow dib noo celi si aan wax fican anu soo shaqaysane*** hadad jogta fursadna haysataye ka faa'idayso wakhtigaaga.

2. ***Ogow hadafkaaga:*** Qofku marka uu ogyahay hadafkiisa waxa uu xisaabinaya daqiiqad walba halka ay ku baxayso, Rasuulkenu (scw) waxa uu xadiis ku yidhi ***wakhtigaa hadlaya isagoo leh Ina Aadanow anigu waxan ahay maalin cusub, camalkaga marag baan ka ahay ee iga faa'idayso masoo noqon dono ilaa inta qiyaamaha la gadhayo*** hadaba ogow hadafkaaga si aanu kaga dayacmin wakhtigagu.

3. ***Ogow mesha uu ku lumo wakhtigaagu*****:** Waa muhiim inaad ogaatid mesha wakhtigaaga inta u badan uu ku lumo, hadad ogaatid mesha wakhtiga ugu badan kaga lumo waxad si fudud u ogaanasa mesha u baahan inaad wakhtigaaga galisid, Waligaana ha odhan wakhti mahaysto inta ku dhaaftay waxad uga faa'idaysata inta ku hadhay waayo ah Nabigeenu (scw) ayaa ino sheegaya

wakhtigu inuu waasac yahay **اذا قامة الساعه وفي يدك فليغرسها** ***(haday saacada qiyaame timaado adoo gacanta ku haaya geed timireed yar beer oo abaqaal hadaad ka gaadhsiin karto)*** Iyado saacada qiyaami so dhowdahay ayaa lay nagula dardaarmayaa inaan beerno geed timired yar intaa waxa layno diidayn yahay inuu ***1minute*** inaga khasaaro hadaba garo qiimaha wakhtigaga oo ka faa'idayso ogowna ilaa geerida ka hor inay fursad jirto.

4. ***Hore u kac:*** ma isweydiisay waxa kugu wacan dib u dhaca iyo habsanka waxa macquula in badan oo inaga mid ahi haday ogaan lahayeen waxa habsanka ugu wacan inay isa sixi lahayeen lakin oganshi la'antu wata keenasa habsanka hadaba is ogow oo hore u kac si wakhtigaga iyo hadafkagu isku meel u noqdaan.

5. ***Ogow waxay tahay niyadaadu*****:** Hadaad ku seexato inaad so kacdo xili hore waad so kacaysa shaki kuma jiro taa, hore usoo kacaagu waxa uu ku xidhanyahay hadba niyadaada iyo doonistaadu intay leeg tahay, Niyada xoogani waa dilaaga caajiska iyo dib u dhaca ku seexo adoo niyada ku haaya inaad hore u kacdo si aad qorshahaaga maalin laha ah u fushatid isweydiina su'aashan intanad seexan ka hor.

Maxad u kacasa? Markay jiraan qorsheyaal iyo ahdaaf nololeed oo aad leedahay hurdo inaad ku daahdo macquulba maha waayo waxa jira awood doonis xogan oo kugu jirta taasi oo ka hor imanasa nafta oo u diidasa inay naftu qaadato hurdo ka badan, waayo waxa jira waxyaabo aad ku taamaso oo mustaqbalkaga dhow ama dheer.

6. ***Samayso wakhti kama danbaysa oo aad seexato:*** Waa inaad yeelata wakhti ku go'an oo naftada iyo maskaxdaduba la qabsato ma ogtahay in naftu la qabsato waxa la joogteeyo u baahan maysid saacad ku kicisa si kastoy ahaataba waa inaad samaysata wakhti ku go'an ood seexato si aad hurdada wakhti hore uga so kacdo hadaba adiga ayaa og jadwalkaaga nololeed iyo howlahaagu xiligay dhamaadane qorshayso wakhti anad ka danbaynayn si maskaxdada iyo naftaduba hurdo fican u hesho.

7. ***Uqorshayso Bari:*** Habeenki intaanad seexan waa inaad dajisataa qorshaha Bari iyo waxad qaban doonto markaa noloshu kuma noqonaso mid iska furan balse waxay ku noqonasaa mid xisaabsan oo qorshaysan guulna kuu horseedi donta, Qoraalku waxa uu kaalin muhiima ka qaata qabashada iyo qorshaynta howlahaaga mustaqbal ee dhow ama dheer iyo sida ay u kala horeyaan waana hab dhiirigalined oo ku tusaya waxa kuu qabsomay iyo

waxa ka qabyo ah Waa inaad ukala qaybisaa saddexdan qayboob wakhtigaaga mid walbana qayb iyo qorshe gaara siisa.

Tagto: waa maalin tagtay oo dhamatay guul iyo guul daro waxay kala tag tayba dhamaatay soona noqon mayso ilaa maalinka qiyaame ee laga xisaabinayo mooye, haka fikirin maxay maalintasi ku dhaaftay adigo murugaysan, adigo guul daraystay, adigo cadhaysan iska ilow oo qorshee sidii aad ta danbe uga faa'idaysan lahayd taa tagtayna cashar uga baran lahayd soomalidu waxay ku maahmahdaa ***Wax tagay tiigsimaad male*** sido kale abwaan ***weedhsame wuxu yidhi***

Wax shalayto kaa tagay

Intaad tiigso ledahay

Arin haatan taagani

Armuu kaa tartaraa

Tagto way tagtee tuur

Ka tir maanka teedi

How taahin taa daa

Bari iyo timaadada

How tiirin howlaha kadinkaaga tuban

Taagan: Maalintani waa maalinta ugu qaalisan maalmahaga waayo shalay way tagtay barina ma ogid waxay noqon doonto ama inaad gaadhi doontid sidaa darted maalintani waa maalintii mustaqbalkaga kugu soo wajahan aad dhisan lahayd ogowna waxad manta tabacdo ayaad mustaqbalka midhihiisa noqon doona.

Timaado*:** Maalintani waa maalin kugu soo fool leh inkaston la hubin inaad gaadhaso hadana waxa haboon inaad qorshe kayeelato hadiiba alle ku gaadhsiiyo qorshe ka yeelo markan ku leeyahayna kama wado inaad howlaga manta iska dayso oo tidhahdo bariban qaban dona maya taa kama wado howsha manta ku taala dhamaystiro barina qorsha kale u diyaari si ayna kaga fara biixn maalintadu odhaah xikmadaysan ayaa tidhaa ***hadad ku guulaysato saacadaha hore ee maalintada waxad ku guulaysan donta maalinta oo idil.

8. ***Ka fagow dib u dhiga howlahaga*:** Mar kasta oo aad shaqo dib u dhigto waxa ay ahaanasa mid joogta gadaasha caqligaaga mana heli kartid fur-fur naasho maskaxed wakhtiyada aad firaaqada tahay ama aad u baahantahay fursad aad wax kaga fikirto Sobobto ah wali maskaxdaadu waxay ku maqantahay shaqadii ay dib u dhigtay ee ahayd inaad qabatid, hadaba ka fagow inaad wakhtigaga ku lumisid wax bilaa

macniya in badana wan kaso hadalnay khasaaraha laga dhaxlo wakhti lumiska marka waxa fican sida ugu haboon inaad wakhtigaaga u maaraysato.

9. ***Usamee howlahaga xili dhamaad:*** Xili dhamaadku waa xeelad lagu joojin karo khasaarinta wakhtiga iyo dib u dhigashada qabashada howl waana hab dhiirigaliye ah kaso kugu qasbi Kara qabashada howshaasi, waxyabaha qabashadodu sahlantahay ayay ka mid yihiin xili dhamadku balse leh dhiirigalinta ugu badan Shaqooyinkad qabanasa waa inay lahadan xili dhamadyo kaso afka qaladna logu yeedho **Dead line** si aad ugu guulaysato wakhtigaaga.

10. ***Mudnaanta sii kolba arinka taagan:*** Ha isku dhexyaacin arimahu iskuma jiraane kala saar oo u kala gur siday u kala muhiimsan yihiin waxa jira wax la yidhaahdo ***Time management*** ama maamulka wakhtiga hadaba adigo habkan adeegsanaya ku kala saar arimahaaga afar waaxood oo waaweyn oo kala ah:
    - ✓ Arimaha muhiimka ah balse Aan degdega ahayn
    - ✓ Arimaha degdega balse Aan muhiim ahayn
    - ✓ Arimaha Aan muhiim ka ahayn degdegana ahayn
    - ✓ Arimaha Muhiimkana ah degdegana ah

Sidaa markad ukala saarto waxay maskaxdad fursad cajiiba u helaysaa arin walba xalintiisa waxayna wax walba kugu so dhamaanayan sida ugu quruxda badan waayo ah arin walba wakhi gaara ayad siisay kuna daali maysid hadad sidan yeesho.

11. ***Sii howl kasta wakhti gara:*** Marka aad rabto inaad howl qabato waa inaad siisa wakhti u gaara taasina waxay kaa caawin doonta in Aanad ka caajisin ama ka jeesan ilaa inta ka dhamaynaso howshaasi, Macalinbaa wuxu na odhan jiray wax kasto adag waxa ka adag wakhiga maan fahmi jirin odhahdaa xikmadaysan waxay faa'idaynaso balse markan tijaabiyey wan fahmay xikmada ku jirtaa hadalka waxan ku dabaqay dhamaan waxan islahaa uun way kugu adag yihiin wakhtina wan siiyey allena waa igu guuleyey.

AHmiyada wakhtiga



Wakhtiga oo la dayacaa waxay ka daran tahay geerida maxa yelay wakhtigod dayacdaa waxay kaa jarasa xidhiidhka idiin dhexeeya adiga iyo Rabiga (swt) iyo daarta aakhiro, geeriduna waxay ka jarasa oo kaliya aduunyada iyo ehelkeeda oo kaliya, qofka munaasibka kugu ahina wuxu kaso muqan doona noloshaada wuxuna soo muqan doona wakhtigad u baahan tahay.

Muhiimada uu leeyahay wakhtigu waxay tahay hadad dayacdo wakhtiga waxad dayacday cimrigaagii in badan oo dadka kamid ahina ma garanayaan Aadna uma dareensana in wakhtigo la dayaca ay tahay cimmrigo la dayacay qofkii cimrigiisa dayacana maalinta qiyaame wuxuu rajayn doona in loso celiyo aduunyada si uu uga mid noqdo kuwa sameeyay wanaaga.

Haka fikirin wixii laso dhafay hana isku mashquulin wakhtiguna laba mid ayunbu ku noqonayaa saaxiibkaga ama cadowgaaga taasina waxay ku xidhan tahay sidaad uga faa'idaysato.

Wakhtigu Wax Haka Badalo

Way dhamanayaan saacadahan iyo waliba sanadahan murugada badani waliba way la dhamaan doonan dhamaan murugooyinkii iyo xasuusihii wanagsana ama xumaa eed wakhtiga gudihiisa kuso qaadatay waxana bilaabmi doona wakhti iyo waayo kale oo cusub inkastoo wakhtigu ceeb lahayn hakugu adkaado ama haku fududaadee alle ayaa xukuma amarkiisa oo kaliya ayuuna ku socdaa kuguna wajahayaa mana aha wax lagu kala nasiib badan yahay.

Hadii wakhtiyo badan oo wacan kuso mareen waa nimco lagugu imtixaani doono ka mahadnaqeeda sido kale hadii ay kuso maraan wakhtiyo badan oo xasuus kugu lihi sido kale iyaguna waa imtixaan lagu eegayo samirkaaga iyo taqwadaada hadaba adigoon dhaleecayn wakhtiga ka qaado wixii casharo ah kuna maaree noloshaada danbe waxay ku noqonasa waayo-aragnimo aad dadka dheertahay.

ogsoonow wakhtiyo waxa jira aad jeceshahay in ayna kaa dhamaan balse dhamaantood way ina sogootiyaan inago u baahan la joogidooda taasina waa sunada uu allah subxanahu watacala u dajiyay aduunkan aynu ku noolnahay waxanad qaabili donta sanad cusub, maalmo cusub, xalado cusub iyo waraaqo banaan oo buuxin kaga bahan.Waxanay soomalidu ku maahmahdaa ***wakhtiga intanu ku goyn adigu go*** iyago ka cabir qaadanaya

dhakhsihiisa waxan uga socdaa munite kasta oo ka taga waa mid ka go'an cimrigaaga waa mid ka go'an noloshada waliba aan so noqod lahayn waa kii abwan xaji dhamac gaariye laha:-

Hadaan guga ku kordhaa
Gabow mooye ku tarin
Garaad iyo waayo arag
Ileen geed wax ma dhaantid

Maxsuulka Wakhtigaaga u dhabar Adayg

Wakhtigaaga inaad ka faa'idaysataa waa muhiim hadad se ka faaidaysan waydo maxsuulka xun ee ka so baxa wahsigaga wuxu ku goyey waa inaad masuul ka noqota labadan ayunbana loo kala qaada maxsulka wakhtiga:

Maxsuulka kobaad: ilaahay waxa uu leeyaha كلو واشربو هنيئا بما اسلفتم في الايام الخاليه ***(cuna oo caba cuno iyo cabitaan bogaadin leh waa waxad soo hormarsateen maalmihii tagay)*** waxan ka qaadana inay yihiin dadkasi kuwo aduunkan intay joogen wax badan qabsaday Aakhiradoodana aan ilaawin**.**

Maxsuulka labaad: waxay qaadanayaan wuxu Ribogod siiyay lakiin waxa is waydiin leh maxay u qaadanayan waxa Rabigod siiyay jawabtu waa tan انهم كانو قبل ذالك محسنين ***(iyagu waxay ahaayen arinkan ka hor yacnii <intii aduunyo la joogay.> Kuwo samo falayaala oo***

waxbiya). Ilaahay qur'anka kariimka ah wuxu ku leeyahay wax I amaahsada oo wax la baxa waa idiin laba jibaari doonaye sadaqadu maalka way barakaysa oo wax Kama nusqaamiso balse sadaqa casriyeysan ee aynu manta la baxno looma bahna qaab ayuu ilaahay inogu tillmaamay inaynu wax u bixino.

Maaxsuulka saddexaad: Sheikh Raslaan ayaa yidhi wakhtigu wax kale mahane waa cimrigaagii wuxuna ku gaadhsiin laba midkod sacaado iyo badhaadhe ama halaag iyo hoog, xaqiiqo ahaan natiijada wakhtiga kaso baxda waxa lagugu abaalmarin doona cimrigaaga maalmihii tagay haday ahaayen kuwo ku gabogaboobay alle ka cabsi iyo daacadnimo Rabi xagiisa bishaaro ayaa kaga sugnatay balse hadii cimrigaaga iyo wakhtigaagu ku dhamaden shar iyo balaayo hoog ayaa alle agtiisa kugu diyaara aan kaso noqod lahayn hadad dhowdahee is qabo oo towbad keen Rabigaana Raalligali kuna ducayso waafajinta jidka hanuunka.

Hadalo Xikmadaysan Oo Laqa Yidhi Wakhtiga

- Wakhtigu waa sida biyaha wabiga oo kale marnaba macquul maha inaad hal mar wada taabatid biyaha wabiga waxa taa la mida wakhtiga waayo mar kasta wuu socda inaad ka wada gun gaadhana macquul maha.

- Ha odhan waliga wakhti igu filan ma hasyto adigo garanaya in dhamaan dadka aduunka horumarka ka gaadhay oo dhan ay haysteen **24** saacadod ayna ka faa'idaysteen.

- Hanti haday lunto mar kale ayaa la shaqaysan Kara ama la heli Kara lakin wakhtiga maya taa waka duwan yahay marba hadu ku dhaafo sidu kugu dhaafay ayuu ahaanaya.

- Maalintu waa isku mid lakin dhacdooyinka ayaa lagu kala duwan yahay way kala xanuun badan yihiin, way kala farxad badan yihiin, way kala firaaqo badan yihiin, waxanay ku xidhan tahay sidad ka dhigato.

- Maaraynta wakhtigu waa xirfad iyo khibrad hab maamul ku dhisan lakin in wakhtiga la hakiyaa waa wax ka baxsan awooda basharka oo ilaahay u gaara.

- Wakhtigu wuxu noqonaya saxibkaga ama cadowgaaga tasina waxay ku xidhan tahay adigu sidad u isticmasho.

- Wakhtigu waa sida seefta oo kale hadanad jarin isaga ku jari doona wuxuna kaga tagi doona qoomamo iyo ciil aan dhamaad lahayd.

Ma wakhtiga I Baday Balaayada

Badana inta malin walba cabanasa ee dan iyo daruuf ay haysato, badana inta dhakhtarada u jiifta xanuuno waliba aan haysan cid caawisa, badana inta oohin iyo ciil gabalku ugu dhaco waaguna ugu baryo, badana inta horumar nololeed iyo caafimadba la siiyey een is ogayn oo u haysta inay wanaaga iyo waayaha wanagsan la dhasheen, badana inta malin kasta nafta isku dhaafisa isku buuq ay ka qaadeen aduunkan, badana inta aduunkan ku macasalaamaysa geeri qaflo ah oo ku timid, badana inta agoon iyo rajayba ah oon haysan kaalmo nololeed, badana inta dulsaarka ku ah qoysas aan kuwooda ahayn oo dhibaato aduun lagu hayo, badana inta guryo dhaadheer oo qurux badan ku nool hadana gudaha guryahasi ay ka jirto dulmi fara badan, badan

inta gabadh geenyo ah gayaan aan garad lahayni qayrkeed ka reebay, badana inta geesi daruufaysan oo dantu ciishay, badana faqiiro waligod haysan 3 wakhtiba ilaahay u farjaday oo hantiilayal noqday, badana inta waalid ee u badan korintiisa la dhibaataysan, badana inta waxbarasho la'aana, badana intay hoy u tahay goobaha qashinku oo qaada ma dherge ahi.


Ma dhamayn karo dhibaatoyinka ay dad badani tabnayaan balse ilaahay ayaa aduunkan abuuray wax kastana wuxu qorsheeyey qof kastaba intana aduunkan iman xaalada adag ee ku haysata waa mid ilaahay kusii qorsheeyey si loo ogaado samirkaaga iyo iimankaga.

Aqoon la'aani ilaahay kama hayso marka uu ku imtixaanayo oo isaga ku abuuray kuna garanaya waxad gudaso iyo galaso balse si lays kugu cibro qaato ayuu ilaahay jidka u sameeyey waxanu ilaahay qur'aanka ku leeyahay سورة العنكبوت احسب الناس ان يتركو ان يقولو ءامنا وهم لايفتنون macnaha ***ma waxay moodayan kaliya inay odhanayan wanu rumaynay oo aan la imtixanayn.***


Hadaba imtixanku waa sunada nolosha su'aal ba halka taala oo ah hadii imtixanku noqday sunada nolosha maxa kula gudbon oo aan kaga bixi karaa? Jawabto kooban waxay tahay ilaahay subxanahu watacala wakhtiga iyo waayaha nololeedba isaga ummadiisa u kala qaybiyey qofna isaga ka dhigay taajir, qofna faqiir, qofna farxad

noloshiida ka dhigay, qofna murug iyo balanbal aduunyo mariyey, hadaba xikmada ku jirta waxay tahay aduunku waa malmo kooban oo laguma waarayo qofkuna nimcada hadii la wada siiyo wuu ilaawa aakhiro iyo dhibkeeda waxanu is idhahda maba dhimanasid balse hadii aduunkan lagu dhibo oo dhibaato iyo xanuuno iyo hanti yaraan ama garab la'aan la dhigana wuxu bartaa halka ugu dhow ee uu garab ka helayo iyo in anay ahayn bani'adamka salaadu badiyaa soonku badiyaa sadaqo wuxu helo wuu bixiyaa intaa wuxu rajaynayaa inuu ilaahay u danbi dhaafo noloshiisana badal khayr qabta siyo.

Farqi weyn ayaa u dhexeeyo labada qof ee midna aduunkan logu nimceyey midna aduunkan lagu imtixanay xikmada uu ilaahay ka lahaana taasay ahayd in laysku cibro qaato mida kale ilaahay waxa uu qur'anka ku leeyahay hadii lagu nimceeyo iyo haduu lagu imtixaanaba labaduba waxay kaga baahan yihiin alle ka cabsi iyo xusid badan, Ha Eedayn wakhtiga waayo ilaahay ayaa sidaa ugu talagalay inuu u socdo waayuhu haday kugu adkaadana naftada iyo noloshada ha nicin ilaahay tala saaro tasbiixda badi horena u talaabso wayahana cashar ka qaado.



Cutubka 5aad Kobci Garaadkaga iyo Maskaxdada



Cutubka 5aad Kobci Garaadkaga iyo Maskaxdada

Cutubkan waa mid ka duwan dhamaan cutubyada ka horeeya iyo kuwa ka danbeeyaba sobobto ah waxa uu ku tacaluqaa cilmiga sayniska u jeedada aan cutubkan uguso darayna waxay tahay maadama uu buugenu ahaa ***Anigu Yaan Ahay!*** Waxa waajiba qofka bani'adamka ah marka wax loo sheegayo in dhinac walba wax laga tuso oo lagala hadlo si ay noloshiisa iyo caqliyadiisuba u noqdaan kuwo wax badan dareensan oo ogaal badan.

hadaba sida ka muuqata magaca cutubkaba waxan u bixiyey magac ah ***kobci Garadkaga*** muhiimadenu may ahayn inan wax walba duudub ku qaadano waayo ah buugan shakhsiyo gaara ma khuseeyo yar iyo weynba way wada akhrisan karayaan si markaa qofka weyn iyo ka yarba isku fahan iyo fiiro u noqdaan waxan tiir ka dhigtay cilmiga sayniska ***(Biology)*** waxanu inaga caawinaya inaynu naqaano marka hore awood ahaan muxu laahay ina siiyey ka dbna qodobka ciwankeena aan u daadagno.

Intad ku dhexjirto akhrinta cutubkan waxad arki doonta waxbadan oo u baahna bayaamin badan iyo wax badan oo aad si u taqanay balse aan ahayn sidad u taqanay waxan adeegsiga ugu badan siiyey diintena suuban iyo sayniska waayo ah madama aynu nahay bulsho Muslim ah waxa muhiima inayu wax walba diinta ka cabir qaadano.

Ma jiro cilmi iyo ogaal ka dhiman diinta islaamka waa diin ku sifaysan sifada dhamaystirka waayo ah Rabigii khaliqa aha ee aduunkan maamulkiisa iyo mulkigiisuba

gacantiisa ku jireen ayaa diintana samada ka so dajiyey marka waxa ino muhiima markan aqoon baranano ama bulsho wax usheegano inaynu dhagax dhig uga dhigno diinta islaamka iyo waxay ka tidhi.

Akhriste waxan kugu qeexay kuguna baayinayey dhamaan afafka ama luuqadaha kala duwan eed ku maqashay erayadan oo Ibo fur u ah ciwanka cutubkena.

Maskaxdu waa xubin ka mid ah xubnaha jidhkeena waxana xarun u ah madaxa qaybihiisa sare waana tuunboyin isku laablaban oo ah sida cadiin iyo dhiig isku jira lakin baruur ma ahan balse waa cadiin gubad ah oo aan wada dhalaalin.

Maskaxdu waa mesha laga maamulo dhamaan dareenada ka imanaya jidhkeena ama ku dhacay sido kalena waa xarunta laga maamulo dhaqdhaqaqyada ay ka midka yihiin: ***Urta, Dhadhanka, Taabashada, Maqalka, Araga, Socodka, Garaaca wadnaha, Falcelinta dareemada).***

Qaybaha Maskaxda

Qaybta fikirka: waa qaybta ugu shaqada badan maskaxda wana qaybta kaydka xasuusta waa qaybta qorshaha dajisa waa mida u horaysa ee xalisa dhibaatoyinka ka dhex dhaca jidhkena.

Qaybta dareenka: waa qaybta Ina siisa dareemada kala duwan sida ***Cadhada, Farxada, Cabsida*** iwm, waxanay shaqo gashaa marka qaybta hoose usoo dirto fariin ah inay dhibaato jirto maskaxduna isla markaba waxay isku daydaa inay xaliso.

Qaybta neefsiga iyo garaaca wadnaha: qaybtani waa qaybta noloshena hagta guud ahaanba Waana qaybta Ina siisa noloshena qaybta joogtada ah waxanay surogalisa socodka iyo dhaqdhaqaaqa qofka iskuna dheelitirta, Waxa usii dheer inay door muhiima ka qaadato badbaadada nafteena, sido kale wanay inagu wargalisa haday dhib soo socoto.

Dhamaan qaybahaa aan soo sheegnay waa qaybaha nolosheena qaabeya inaga dhiga noole ka duwan noolaha kale ee xayawaanka ah haday tahay hab fikirka, dareenka iyo fcilkuba waxay u wada shaqeeyaan si wada jira dhamantood.

Culayska Maskaxda

waxana lagu qiyaasa culayska maskaxda marka jidhka intiisa kale loo eegoyo qiyaastii 2.5**%** ama **2% 1330g** intana waa celceliska miisanka ay ku fadhido maskaxdu runtii waa wax aad u yar balse qaadkeedu badan yahay waxa la sheega in xata raga iyo dumarku anay ka sinayn oo ay ku kala duwan yihiin cabirka maskaxda raga waxa lagu qiyaasay ***40g*** halka ay dumarku ka yaryihiin celcelis ahaan.

Mid kamida culimada mulsimiinta ah ayaa waxa uu yidhi haduu laysku wada keeno waxa aduunkan technologyad taala oo dhan oo la yidhaa hala yareeyo oo maskaxda bani'adamka oo kale halo leekaysiiyo waxay ka badnanasa maskaxdeena yacnii ma qiyaasi karno ayuu ka wada mana keeni karaan mugeeda wax leeg oo memory ah yacnii waxay cadaynasa in alle subxanahu watacala ka yeelay maskaxda mid aad u fudud oon culays inagu haynin isla markaana mugeedu aad u weyn yahay.

Balse ka soomili ahaan ma adeegsano maskaxdena sidaa u balaadhan intan adeegsanana waa **10%** sido kale Maskaxdu waxay ka qaadata tamarta jidhka qiyaas dhan **20%** waa xadi aad u badan marka la eego qaybaha kale ee jidhka taasina waxay cadayn buuxda kasiinasa markad gaajonaso maskax ahaan iyo jidh ahaanba waxad dareenta inaad daalan tahay.

Qaab Dhismeedka Maskaxda

Nidaamka ay u dhisantahay maskaxdu waxa la yidhahdaa ***NUERON*** waxaana ku jira malaayin dareen-wadayaala, Dareen-wade kastana waxa dhexdiisa socda **1000- 10,000** kuwaso isku xidhaya maskaxda qaybaheda kale, sido kale maskaxdeenu waxay dhalisaa tamar badan oo markii la qiyaasay gaadhay **10-25 wtt** tamartasi hadii si kale loo isticmaali laha waxay shidi lahayd aad u badan oo iftiimi lahaa **24** ka saacadodba.

Qolyahan engineerada ah ee sameeya electronigu waxay ku xisaabtaman markay Aalad cusub ikhtiraacayan inta gibibyte GB/s ee ay qaadi karto Aalada cusubi taa badalkeeda maskaxda bani'adamku waxay samayn karta halkii daqiiqo macluumad xadigiisu dhan yahay **4000,000/m** (***Afar boqol oo milyan***) sido kale waxay hal mar ururin karta ama xifdin karta macluumad dhan **3,000,000,000** ***(saddex bilyan)*** sido kale waxa la qiyaasa in **22dm** oo maskaxda ka mid ahi ay qaadi karto **20,000,000,000** oo buug tiro ahaan way badan tahay balse balaadhnida maskaxda marka la eego dhibic yarna kama aha.

hadaba makula tahay maskaxdaa yare ku saarani qiyaasta intaa leeg oo waxqabada inay qaban karto run ahantii waa maya haday nala ahan lahayd waynu ka faa'idaysan lahayn balse taa ma Aaminsanin xata hadii aynu isku

dayno waxan Aaminaa inaynu u baahan nahay nasiimo maadama aynu howl badan ku qabanay.

Inta badan waxad is weydiisa sobobta ay gaaladu inooga waxsoosar badan yihiin jawab ku qancisa markad weydo ayad ula tagta dadka kaa waaweyn si aad wax uga ogaato arinkaa balse iyaguna waxay kugu qanciyaan odhaah odhanaysa ***gaalada awoododa ayaa aduunkan logu soo saaray*** Marka sida dareted ayay wax kasta uqabanayan adiguna markad intaa maqasho waad ku qanacdaa oo waxad Aamintaa in anay awoodada wax-soosar intaa dhaafsiinayn balse sirta arinkaa ka danbaysa waa mid u bahaan caqli iyo fikir cilmiyeysan hoos u raac oo dhugo ka dibna qiimee afkaraha qaldan eed hore u aaminsanayd iyo xaqiiqada dhabta ah ee jirta.

Dhoohananta Muslimiinta Iyo Dhiirananta Gaalada

Gaaladu inagama caqli badna inagamana maskax badna balse waxay inagaga fican yihiin fikirka iyo u fiirsiga, inteena badan ma fiir fiirino nolosha oo mashqulkaba ma jeclin balse alle jalle wacala waxa uu leeyahay افلا ينطرون الى الابل كيف خلقت ***Miyaydaan arkay sidaan geela u abuurnay*** والى السماء كيف رفعت ***iyo sida samada loo kor yeelay*** الجبال كيف نصبت ***والي iyo sidaa buuraha loo taagay*** والي الارض كيف سطحت ***iyo sidaa dhulka u fidinay,***

Rabi (swt) inbadan ayuu Ina yidhi u fiirsada Aayadkayga si aad u aragtayn awoodayda Rabanaagi ah oo wax ugu qaadatan balse taa fursad waxan u siinay gaalada kuwaso ku bixiyey juhdi iyo wakhti waxanay ku qateen ku mashquulka Aayadka ilaahay iyo ka fikirida abuurka alle ee layaabka leh.

Aayadka ilaahay waxa ka mida ***habeenka iyo maalinta, iftiinka iyo mugdiga, qorax dhaca iyo qorax soo baxa, gu'ga iyo jiilalka, barwaaqada iyo abaarta, dhalashhada iyo dhimashada, dhismaha iyo burburka, taagnida circa udub la'aan, iftiiminta xidigaha, fidsananta dhulka hadana aan la arkayn wareegsanidiisa, joogitanka baddaha amarka ilaahay ay ku joogto , abuuritanka*** aduunkan mudo **6** cisho ah hadana marka la gaadho malinka qiyaame la laabi doono bani'adamka waxa ka so hadha oo dhan ee xaywan leh waxay noqon doonan ciid oo way baaba'ayaan,

soo saarida basharka laga soo bilaabo Aabaheen Aadam ilaa ummatu maxamed laga so gaadhayo xisaabinta malin dharerkeedu leeg yahay **50,000** oo sano, cadaalad falida ilaahay ee loo kala cadalad falayo basharka mid walbana wuxu mutaystay la mudan siinayo, digida cad ee ilaahay umadiisa uu u digayo una sheegayo waxa u danbayn doona si khiyaamo la'aan ah waxanu Ilaahay ayaa qur'aankiisa ku leyahay hadad tiriya is tidhahdaan nimcooyinka ilaahay tirin Kari maysaan taa waxa la mida hadad tiri is tidhaa aayadka cadaynaya ilaahay

jiritankiisa ma tirin karasid lakin waxa muhiima inad xikmada ka qaadato oo markad waxaso dhan oo cadaymo ah een kor kuso sheegnaya ragto aad qirto ilaahay weynidiisa.

hadaba halkan u socdaa waxay tahay axsabtii iyo dadkii noola wakhtigii nabi muxamed scw waxay ahayeen kuwo aragti dheer u leh aayadka ilaahay kuna khushuuca markay arkaan gartana weynida ilaahay oo ka cabsada cadadka ilaahay iyo cadho galintiisa, lakin muslimiintii intaa ka danbaysay waxayba ku mashquuleen aduunyo tabaceed oo waxay iska dhaadhiciyeen maadama ad tahay qof islaam ah ilaahay iyo jiritankiisana garanaya muhiimba maha inad ku mashquulto aduunkan iyo sida ilaahay u sameeyey taasina waa ta inaga dhigtay kuwo aan waxba u arkinba waxa ku xeersan, hadad weydiiso sida aduunkan ilaahay u micneeyeyna waxay kugu jawabay waa arimo ilaahay u gaara ee hagalin arimahas waxba kama taqaanide ayey jawab ahan ku siinayan.

Hadan Soomali nahay waxa caado iyo dhaqan ino ah ilmaha yar yar markay wax inaga weydiiyan aduunkan iyo sida ilaahay wax walba ugu dhigay mid cajiiba waxan ugu jawabna inagon ixtiraamayn baahida ay ilmaheenu u qabaan inay ilaahy awoodiisa wax ka ogaadan ayaa waxan markaba afka kagala boodna Aamus waa danbiye yaan Aakhiro laga jarine ilmihii wuxu wax kasta ku ilaawaya oo uu aaminaya hadii uu abuurka cajiibka ah ee ilaahay u fiirsado inuu danbi

galayo ka dibna markay weynaadana maba danaynayaan inuu wax u fiir-firsado isaga sidii laguso barbariyey ee ahayd Aamus waa danbiye ayuu isna ilmihiisa kusii barbarinaya taasina waa ta inaga dhigtay dad aan u fiirsan abuuritanka ilaahay oon wax ku qaadan kaliya waxan baraarugnaa marka musiibo Rabaani ahi timaado oon waxba laga qaban Karin ayan dareena awooda ilahaay.

Hadana markay gaalada isku dayeen inay u fiirsadan abuuritanka ilaahay iyago diidan jiritanka ilaahay ayaa waxay garteen oo la yaaben sida xirfdaysan ee ilaahay wax walba uga yeelay mid qurux badan oo bani'adamka faa'ido u leh sido kale waxay ogaaden inaysan jirin cid ilaahay ka xirfad yaqansan oo aduunkan uga cilmi badan ilayn waa gaalo eh gardkooda sida ku leh.

Tusaalaha Ilaahay Iyo Tijaabadii Gaalada

Markay u baahdeen inay u kala gooshan dunida dacaladeeda waxay arkeen badaha u dhaxeeya waxayna ogaaden inay u baahan yihiin waxay baddaha ku maraan si ay u gaadhan halkay doonayan waxay damceen inay sameeyan ***doonyo qoryo*** ka samaysan oo shiraac leh kuwaso ay ugu tala galeen inay ku tagaan dhulalka bad-mareenka leh waxay mudo doonyaha ku safraanba waxa u surtagali wayday inay wakhti kooban ku gaadhan meshay rabaan fikir badan kadib waxay isku dayeen inay sameeyan doonyo ka casri san kuwii hore hadana waxay u baahdeen cid ay kaga daydaan oo hore u samaysay waxay heleen ikhtiraace wax walba sameeyay iyaga ka hor balse ay manta kaga daydaan cid kale maahe waa ***Alle subxanahu watacala*** waxay u fiirsaden sida kaluunka ilaahay u abuuray ee uu ugu sahlay in badda biyaheeda u dul socdo kadib waxay isku dayeen ***markab*** ka dheeraynaya doonta hadaad u fiirsatana fuqa hore iyo qaabkiisuba waxay aad ugu dhow yihiin kaluunka xogaa waxay noqtay siday rabeen waxana u kaydsamay wakhti badan sido kale waxa fududaatay wakhti badan oo kaga bixi jiray hal meel inay gaadhan, isticmaal dheer ka dib waxa baahi wayn loo qabay in la helo wax badala markabka oo kana qaad weyn kana dhakhsiyo badan fikir dheer ka dib waxay isla garten inay sameyan wax hawada mara madama ay sameyan wax dhulka iyo badaba mara markaan ay donayen inay sameyaan wax

cirka mara waxay u fiirsaden shinbiraha hawada duulaya iyo sida sahalka ah ee alle ugu fududeyay inay hawada dhex mushaaxan isku day badan kadib waxay sameeyen ***diyaarad*** hadad u fiirsatana shinbiraha iyo diyaaraduhu waba isku qaab, waxa taa soo raaca isgaadhsiinta oo iyadna marxalado kala duwan soo martay mantana joogta heerkii ugu fiicnayd waxay isku dayayeen gaalada inay sameeyan Aalad yar oo fudud oo qaadkeduna aad u badan yahay iyago marba marka ka danbaysa casriyeynaya oo raba nay soo saran wax la mida ***maskaxda bani'adamka*** ama wax u dhigma ma samayn karaan balse isku daygoodu waka sameeyey Aaladaha aan wada isticmaalno ee manta nolosheena ka mid noqday maskaxdeenu speed aan la qiyasi Karin iyey uga jawabta fariimaha jidhka ka imanaya iyaguna waxay isku dayeen in laga marmo dadkii fariimaha u kala qadayey magalo ilaa magalo kale ama qof ilaa qof kale taso wakhti ku qadanaysay in layska wer helo .

Al-muhim waa taa sirta gaaladu iyagoo diiday rumaynta ilaahay ayay hadana kaga dayanayan waxqabadka inagana taa wan iska jaahilsiinaa oo iyagu waxay so saaran ayan horumarba u haysana inago og in muslimkii hore ay halkan iyo meel ka saraysaba horumar ka gadheen hadana warkasi inaguma socdo tasayna inagaga horeeyan hadaba kama taag yarine u fiirsasho la'an iyo howl necayb ayaa halka inaga dhigay.

Ma isku Midbaa Caqliga, Garaadka, Wadnaha iyo Qalbiga

Bulsho walba waxay ledahay Eray bixin u gaara oo ay u la baxdo wax gaara taso bulshadasi ay isla taqaano marka waxa la tilmaamayo, Hadaba Erayga Caqli waa eray bixin ***carabiya*** halka afka soomaligana loga yaqaan ***Garaad*** Labadan eray waxa laga yaaba in dad badan ay iskaga dhex qasan tahay kala garashadooda kuwaso u haysta inay laba macno kala leyihiin balse maha waa laba eray bixin kuwaso sheegaya inay kala yihiin laba luuqadood xaga macnahana wax isku mid ah ayunbay timaamayan.

Garaadka iyo caqliguba waa awooda garasho iyo kasmo ee aan leenahay wana halka aynu kaga soocanahay noolayasha kale wana ka aynu ku kala saarno xumanta iyo samaanta, waana mesha kaliya ee laga qiimeeyo qofka banidamka ah haday noqoto Odhaan, Aragti, iyo Ficilba.

Hadaba garashadasi waxay noqon karta mid macnawi ah oo lama taaban karo, lamana arki karo, lama sawiri karo, lamana suuraysan karo, balse waa la dareema karaa, waxaana loo qaybiyaa laba qaybood oo kale ah ***weeleye iyo ma weeleye.***

Ma Weeleeye: waxa uu la socdaa oo gartaa oo fasiraa oo kaydin aan xooganayn ku sameeya Arimaha dareen ahaanta kuso gaadhaya nafta.

Weeleye: Kani waxa uu kaydiyaa arimaha uu qofku la qabsado ama caado ka dhigto tusaale waxa jirta mararka qaar inago salad ku jirna in aynu iska baxno oo sahwino inago maskaxdeena ay kuso dhacayaan howlahena aduunyo oo iska ilownaba inaynu salad ku jirnay balse hadana inago maqan oo fikirka ku jirna hadana salaadu siday ahayd waan u tukana khushuucda uunba inaga maqan mooyane sida kale wan saxna inta badan shaqadana waxa ino qabanaya oo halkeeda dhiga garadka qaybtiisa lo yaqaan **ma weeleye** oo qaybitaan iyo kaydinba ku samaynaya waxan si joogto ah u samayno.

Boos Ahaan Halkay Kaga Yaalan Jidhkeena

Caqliga ama garaadka diintenu meel ayay kaga hagagtay oo inogu sheegtay muhiimad iyo danayn dheeri ahna way siisay ilaahayna(swt) **13** jeer ayuu ku shegay qur'anka ***Miyaydan caqli lahayn*** tasina waxay macnaynasa in garaad aan wax ku kala garanano ilaahay inogu deeqay isla markaan ay tahay in sida alle amray ugu dhaqano Eebe (swt) waxa uu leeyaha في سورة الحج

اعيه 45 [افلم يسيرو في الارض فتكون لهم قلوب لا يعقلون بها او ء ادان لا يسمعون بها فانها لا تعمي الابصر ولكن تعمي القلوب التي في الصدور macnaha ***(ilaahay waxa uu leeyahay miyey ku socdaan dhulka kor kiisa kadib ay u ahaato qalbiyaal ay wax ku gartaan ama dhago ay wax ku maqlaan indho beelka dhabta ahina waa indho beelka quluubta ku sugan)*** Ishu waxay leedahay aragti qalbiguna waxa uu leeyahay aragti aragtida ishuna waxay ku xidhantahay aragtida qalbiga.

Halkana waxan ka fahmana oo ka qaadanana in caqliga ama garaadku ku yaalo ***Qalbiga ma Wadnaha*** waayo garashadii iyo aragtidii isha waxa lagu xidhay aragtida qalbiga ama wadnaha.

Maxay Kala Yihiin Maxayse Qabtaan

Wadnahu waa Eray bixin Soomali ah sido kale Qalbiguna waa eray bixin carabi ah kuwaso sheegaya macno isku mida, Markan ka hadli mayno shaqada wadnuhu qabto oo saynis faraha la gali mayno balse waxan ku dabaqaynaa diinteenu waxay ka tidhi shaqada ugu muhiimsan oo ah gadhsiinta jidhka dhiiga marka laga yimaado waxa kale oo uu qabtaa shaqoyin farabadan oo ay ka mid yihiin Caadifada dareenka iyo Dhaqanka Aaminaada taasina ilaahay ayaa qur'ankiisa inogu sheegaya waxanu leeyahay ولقد درانا لجهنم كثيرا من]

الجن والانس لهم قلوب لا يفقهون بها , ولهم اعين لايبصرون بها, ولهم ءاذان لا يسمعون بها اولئك كا الانعام بل هم اضل و اولئك هم الغفلون

*Macnaha (**xaqiiqi ahaan waxan u abuurnay naarta jahanma la yidhaa in badan oo Jin iyo insiba leh waxan u yeelnay wadnayaal waxna kuma fahmayan, waxaan u yeelnay indho waxna kuma arkayaan, waxan u yeelnay dhago waxna kuma maqlayaan, kuwaasi waa xoolaha oo kale waliba way ka lumitaan badn yihiin waana kuwo mooganayaal ah oon waxba ogayn)***

Sida macnaha Aayada ku cad meesha qofku wax lagu fahmaa waa qalbiga mesha sida dhabta ah wax looga arko ee indheer-garadnimada iyo fiiri badnaanta leh waa qalbga, mesha dhawaqa dheer ee macnaha iyo murtida badan samaynaya ee rasmiga iyo runta taabanaya laga dareemana waa qalbiga, meesha aynu xoolaha kaga soocanahay ee inaga iyo jinkuba ku noqonay labada qoom ee xoriyada iyo rabitaanka madaxa banan ilaahay siiyayna waa qalbiga, Meesha aynu ku noqonano dad mutaysta Amaanta ilaahay iyo mudnayntiisaba ama dhaleecaynta uu ilaahay usoo jeediyay moganayasha dantooda seegay waa qalbiga.

Mar kale ayuu ilaahay leeyahay isaga oo inagu Amaanaya quraanka والله اخرجكم من بطون امهتكم لا تعلمون شيا وجعل لكم السمع و الا بصر والافدة لعلكم تشكرون

Macnaha ***ilaahay waxa uu idinka soo bixiyay caloosha hooyooyinkiin waxba idinkoon garanayn wuxuuna idiin yeelay maqal iyo arag iyo quluub waxana***

laydinku shegayaa inaad ku shukridaan yacnii in laydin siiyay maqal,arag yo qalbi Waxa cadaynasa Aayadan in ilaahay Ina sharfay oo inaga soo saaray caloolaha hooyooyinken isla markaana inoo sameeyay goobihii ugu muhiimsana ee qaabilayay macluumadka iyo aqoonta waayo-aragnimada leh Intaa dabadedna inoo sameyay qalbigii oo ah goobta gorfaynta iyo ka fikirka xogaha lasoo ururiyay iyo xaasilinta aqoonta kaso hadana kaydinaya.

Maxa Cidhib Xumo ah Oo Ka Dhalan Kara

Iyadoo lay noga digayo cidhib xumadan kala kulmi doono hadaynu ku mahadin weyno nicmada weyn ee Rabi ina siiyay ayaa waxa alle inoga waramaya gaalada iyo calaacalkoda kadib markii caqligii iyo garashadii ilaahay siiyay ay u adeegsaden si aan Rabi jeclayn waxay maalinta qiyaame ku calaacali doonan ayuu Rabi subxanahu watacala ina leeyahay سورة الملك اء يه 9 وقالو لو كنا نسمع او نعقل ما كنا في اصحبب سعير Macnaha ***hadaanu ahaan lahayn kuwo maqla oo wax garta maanu noqon lahayn kuwo gala naarta saciira***

Nimco walba nusqanteeda leh in badan oo inaga mid ahi waxaynu kas iyo kibir u samaynaa waxaynu ognahay in ilaahay neceb yahay waliba si xaasidnimo iyo xushmad daro ku jirto ayaan ilaahay u cadho galinaa lakin ilaahay oo ah dulqaad badane naxarista ayaa dib inogu dhiga

ciqabtiisa mar walba hadana markasta oo aynu wax uga baahano inagon wali cafis iyo towbad weydiisan ilaahay ka barina in uu ina siiyo ilaahayna wuu inoo naxariista oo ina siiya wax kasta oon weydiisano kadib gafkeena aan kaso noqoshada lahayn ilaahayn.
Maxan gaal iyo gudasho la'anta waajibadkiisa ka sheegna inago Muslim ah ayaan tukanayn oo Aadanka mar walba maqlayna, bishii Ramadan ayaan ilaahay oo ina arkaya khiyaamaynayna waa sidan isleenahaye oo xaaran meela ku karsanayna, sadaqadiii bixiya la yidhi ayaan si istusnimo leh u bixinayna oo anigon waxba bixinayn hadana Tv ka duubayna dadkii, isku dirkii iyo war kala qaadidii ilaahay uu ydhi qofka dadka isku diraa janada ma galayo ayaa manta shaqada kobaad inoo noqotayba, faafinta xumaanta ee layna yidhi astura waxad aragtaanba ayaan badalkeedii hayna iska daaba inan asturnee waban sii faafinayna, masuuliyiinta xilalka idiin haya adeeca ayaa layna yidhi iska daa masuulka isagu wax isdaba mariyee ka aan waxba hagranayn ee tamartiisa wax ku qabta ayaa dhaleecayna oo dhibaatayna. Haye! Waxas dhanba soo ma ogin inay danbi inagu jiro oo ilaahay inoga digay hadana kas iyo kibir soo uma samayno inago garanaya in ilaahay aynu cadho galinano hadaba nimcadii ilaahay Ina siiyey wanku gabood falnay oo ka gaabinay waajibadkii laynaga rabay.

Waxqabad Wada Jira

Shaqada maskaxda hore ayaan ugaso hadalnay lakin shaqo kasta ma qabato maskaxdu balse waxay qabata shaqoyin u gaara, maskaxdu ma dareento xanuunka lakin waxay qaabishaa fariimaha uu habdhiska dareen-wadku kaso tabinaayo mesha xanuunsanasa waxayna celisaa shaqada ay tahay in marka la qabto ka mana fikirto xaqa iyo baadilka khayrka iyo sharka lakin wxay qabata uun arrimaha dareen-wadka uga yimaada oo ay ka samaysa falcelin.

Wadnuhuna waa mesha laga dareemo farxada iyo murugada, cidhiidhiga iyo badhaadhaha, waana halka laga dareemo dareemada niyad jabka ama dareemada wanagsan Waana xubinta Rabitaanka go'aan qaadashada kala rog-roga iyo ka hortaga waxa xun, waana mesha lagu kala sooco xaqa iyo baadilka ama sharka iyo khayrka, Waana halka ka danbaysa waxa la xeerinaayo ama la ixtiraamayo laguna qiimeeyo qofka hab-dhaqamadiisa iyo dabcigiisa.

Qalbiga ama wadnuhu waa halka uu daganyahay iimaanka ilaahay subxanahu wataaala lagu rumaysanyahay waana halka uu ka nusqaamo ama ka siyaado isla markaana sida ilaahay inoo shegay waa halka xuman kasta oo aad samayso oo danbi ahi ay ku noqonaso dhibic madow oo qalbigaga ku taala markasto xumantaadu badato waa markasto dhibicda madow sii

balaadhato haduu qalbigu madoobadana waa jidhka dhamantiis wuu wada xumaanaya sidana waxa inoo shegay suubanaheena muxamed scw.

Qaadashada Amarada Diinta Malaga Horaysiin Kara Fikirkeena?

Waxa jira dad badan oo sheegta caqli badnaan iyo garasho inay u saxiib yihiin sheegana diinta inay ka hormariyaan garaadkoda oo waxa garaadkodu yidhaahdo ay qaatan iyago ka tagaya amarada ilaahay sobobtana ay ku sheegen in caqliga iyo garashada ilaahay siiyay uga faa'idaysanayan oo kaga fikirayan ka hor intanay yeelin wax walbo la faray halkaana weydiimo ayaa yaala odhanaya sida tan.

Su'aal Caqliga ilaahay Ina siiyay Malaga horaysiin karaa diinta mase diintu Ina farasa waxan caqligeenu qaadan Karin?

Jawaab suuragal maaha in qofka ilaahay caqli ku abuuro kadibna caqligiisa wax kaso horjeeda ku amro oo sharci iyo shareeco uga dhigo kadibna uu ku qasbo samayntiisa suuragal maaha marka horeba ilaahay caqliga uu kugu abuuray iyo shareecada islaamku way isleeyihiin marmarsiyana u noqon mayso hadad adigu diido ku dhaqanka diinta inaad tidhaa caqligaygan kaga fikiraya waxa alle I amray.

Su'aal Marka Diinta islaamka Laguso Bandhigo Ma odhan karta Waxyar Aan kaso Fikiro?

Jawaab waxan ka odhanaya intii ilaahay ka yidhi oo kaliya وما كان لمؤمن ولا مؤمنة اذا قضي الله ورسوله امرا ان يكون ضل ضلالا مبينا لهم الخيرة من امرهم ومن يعص الله ورسوله فقد macnaha ***Umay ahaanin nin mu'mina ah iyo haweenay mu'minada marka Eebe iyo rasuulkiisu wax xukmiyaan inay kala doorasho u yeeshaan amarka ruuxii se caasiya ilaahay iyo rasuulkiisa waxa u lumay lumitaan cad*** Macnaha guud ee Aayadu maaha in layna leeyahay wixii diinta kusoo arooray qasab ku qaata oo Kama hadli kartaan balse macnaha dhabta ahi waxa weeyi diinta kumaba soo aroorin waxan xaqiiqo aheyn oo garaadka bani'adamkana kaso horjeeda.

Su'aal Sideebu Garaadku u Dagan Yahay ama Ugu yaala Wadnaha?

Jawaab su'aasha waxan horay usoo shegay in garaadku yahay macnawi ee aanu ahayn maadi oo Aan la arki Karin nabiguna scw waxa uu xadiis ku shegayaa isagoo leh ادا صلحت صلح الجسد وادا فسدت فسد الجسد كله الا وهي القلب Macnaha ***haday wanaagsanato jidhka intisa kalana way wanagsananasa haday xumaatana jidhka dhamantii wuu xumaanaya kaasina waa qalbiga.***

Caqli Badnow Oo Calaamadahan Lahow

Garaad badnaantu waa astaan ka mida astaamaha dabiiciga ah ee aynu kaga soocanahay noolaha kale hadii inta dabiiciga ah ee basharka lagu yaqaano hoos uga dhacdo waa calaammad tilmaamasa caafimad darro haday ka saraysana waxay tilmantaa caqli badnan, Laakin waa lagu kala duwan yahay heerka maskax ama caqli badnaanta.

Hadaba cilmi baadhista Aan sameeyay oo ah astaamaha lagu garto dadka caqliga badan waxa laga yaaba inaad aragto dad leh calaamadaha iyo kuwo ka duwanba marka astaamahan ma noqon Kara halbeeg Rasmiya oo lagu kala saarayo dadka balse waa inta laysku raacay inay astaan ahaan loo adeegsado.

a. Ilaali dareenkaga iyo doonistada: Ma tahay qof ka baqa inuu niyad jabiyo dadka, Ma uga tanaasushaa danahaaga danta dadka kale adigo is leh ixtiraam balanqaad yadadaada ma oofisaa xata haday dhib kugu yihiin adigo iyaga doorbidaya? Jawabtu haday Haa tahay waa kan xalkaagu iska daa inta badan danaynta waxa aan dani kugu jirin
   Iska daa daba-socodka dadka ku arkaya inad shaqo la'aani ku hayso adigo baylahdada uga sotagaya si aad iyaga u raaligaso wayna dhacda inbadana waa laynaga dheeleeceya dhaqanka ah danaynta saaidka

ah noqo qof dantiis garada mesha ku darana dantada ku dhaaf

b. ***Horumari Naftaada*****:** Inaad naftaada horumariso oo gaadho Ahdaaftada waxay muujinasa jiritaankaga hadaba dadka maskaxda iyo garadka badani badana waxay wakhtigoda ku qaatan sidii ay uga faa'idaysan lahayen nolosha inta ka dhiman waxqabadyo badan oo la taaban karana u gaadhi lahayeen, kuma mashquulan dadka kale iyo waxay haystaan waxa ku filan inta alle (swt) siiyay waxay la yimaadaan qanacsanaan badan iyo dagaanshiyo nololeed taasana u saamaxda inay noloshoda hore usocdsiiyan.

c. Garowso Daciifnimadooda: Dadka caqliga badani waxay ogyihiin inay mararka qaar guuldaraysan karaan oo ay fashilmi karaan balse daciftinimadaasi Kama joojiso sii wadida halganka nololeed waxanay ogyihiin in Aanay daciiftnimadu ahayn dib udhac ee ay tahay cashar barasho Halka dadka kale ay daciiftinimadoda ama guuldaradoda ay cudur-daar u raadiyaan si ay uga leexato Eedaynta guuldaradaasi.

d. Ogow noloshu waa meerto: Dadka caqliga badani waxay ogyihiin inay noloshu tahay meerto oo Aanay markasta ahaanayn nolol farxad, iyo badhaadhe lagu jirayo waxa kale oo ay ogyhiin inay noloshu leedahay hoos u

dhac sida ay u leedahay sare u kac waxay ogyihiin in dhibaatoyinka iyo halganka noloshuba yihiin qaybo kamida nolosha.

E. Haku tashan waxan awoodada ahayn: Dadka qaar ayaa jecel inay wax kasta maareyaan ama isku dayaan balse waxyabaha qaar aya gacmahena ka baxsan oo hadii aad isku dayno inaan hagajino inoo sobobi Kara buuq iyo tamartena oo lunta dadka caqliga badana waxay ogyihiin halkay kaga daali lahaayen waxan awoododa ahayn inay ku daalan tamarna ku bixiyaan wixii karaankodaah.

F. Ha cabasho badnaanin lakin waxqabad badnow: Waxad ogtahay in howl kasta oo lagu guulaystayba ay u baahan tahay dadaal iyo dhafar badan waxana jira caqabado kaa hor imanaya markad howsha bilobaso hadaba waxa muhiima inad u dhabar adaygto waxqabadkaga, cabashada badana iska ilaali oo alle talo saaro qalbigaagana saafi ka dhig oo howshaad qabanaso si niyad samaan ku jirto u qabso.

G. Garo Heerka Aqoontada: Dadka caqliga badan waa dad iska warhaya oo isla socda waxay garanayaan ee alle baray hadii wax laga waydiiyo ka jawaabi karaya hadii la waydiiyo waxayna garanayna yidhahda waxan

alle ima barin aqoona uma lihi isla markaana aan halka ku dhaafine daraaseeya oo baadhitaan sameeya waligodna isdhiibin.

H.Maskax Furnow: Dadka garaadka badan fikradaha iyo fursadaha albaabada Kama soo xidhaan khuburada cilmu nafsigu waxay tilmaaman in dadka maskaxda furfuran ay yihiin dadka Aragtiyaha kala duwan raadiya jecelna inay wax badan baadhan si caqligooda iyo cilmigoduba u koro inta badan bashaashnimada iyo dabeecad dabacsanaanta ayay u saaxiib yihiin.

I. Jeclow Cidlada: Qodobkan markad hoos usii dhexgasho ayunbad fahmi karta ujeedka aan ka hadlayo sobobto ah kalinimada siyaabo badan ayaa loo adeegsada anigo taa ka duulaya waxan si xikmadaysan uga hadlaya bal kalinimada iyo dadka saaxibu caqliga ah siday xidhiidh u leeyihiin hadan si dulmara uga hadalno badana dadkani buuqa kama helaan iyo wakhti la qaadashada asxaabta badan waayo ah waxa ka culays badanba naftooda iyo danahooda oo mashquul iyo wakhti siin uga baahan si hadad ugu fiirsatana dabeecadan wad kaso helasa dadkasi badana dadka oo lagu dhexjirana inyar mooyane faa’ido kuma jirto marka iyagu taa badalkeeda waxay wakhti siiyan danahooda iyo daryeelka naftooda.

J. Xakamee Naftaada: Nabigu (scw) wuxu yidhi qofka xooga weyn lehi maaha ka qofka dhulka dhiga ee waxa weyi ka naftiisa qabta marka uu xanaaqo xakamaynta qodobkan ka hadlayaa waa tan hadad naftaada qabato markad xanaqdo waxad tahay qof naftiisa ka adag nabigu scw mar kale wuxu yidhi ka aan cadhoon umaddayda ka mid maha ka aan cadhada kaso noqona umaddayda ka mid mahan macnaha wad xanaqi karta lakin xanaqagu yanu noqon mid aad dadka dhan u wada xanaqaso ama aad wada xumaynaso waayo ah waxan aragna dad badan oo markay xanaqan waxii afkoda kaso baxaba ku odhanaya hadhow markay cadhadu kaso dagtana ku imnaya oo ku odhanaya Raali noqo wan xanaqsanay oo isman ogayne intaad is ilaawi lahayd ee sharafta iska qaadi lahayd naftada qabo oo xasili.

K.Damqasho iyoNaxariisa Lahow: dabeecadan kuma xidhna caqli badnaan balse waa sifo lagaga baahan yahay mar walba ilaahay garasho iyo garaad bu ina siiye waxa lagama marmana inaynu isku naxariisano ka baahan eed arkaso ilaahay adigu kugu eegaya kan buka eed arkaso caawi oo hadanad waxba u tarayn ugu yaraan siyaaro mar walba una ducee markad u tagtana niyada u dhis oo dheh ilaahay danbi dhaaf ayuu kaga dhigayaye ku

Samir, kan waalid la'antu hayso u naxariiso oo fiiro gaara u yeelo waxad ku tari karasana ha sheegshegin oo sumcadiisa ilaali, qofkan halowsan ee xadkaba ka baxayna u ducee oo waani haku qoslin oo haku caayin xumantiise, waalidka itaalka darana u naxariiso oo u samafal xata hadanu ahayn waalidka waa muhiim inad noqoto qof qalbi saafi ah leh oo samaha jecel.

L. Yeelo Awood La Qabsi: Dadka caqliga badan waa dad dabacsan oo daruufaha markaa haysta la falgali Kara way la qabsan karaan waayaha kala duwan ee ku xeeran iyagoon dan ka galayn caqabadaha iyo cadaadiska saaran garadku waa sida aad adigu karti ugu ledahay hab dhaqankaagana u badali lahayd u lana qabsan lahayd markay timaado dantaada haka qashqashaadin waxqabadka hoose eed qabanaso waayo waa dantada waayaha ku badali doone adigu dadaal oo ha daalin.

M. Su'aalo badnow: Dadka badanaa weydiinta badan waxaynu ka Aaminsanahay inay yihiin kuwo fahan adag oo ku celcelinta badan iyo baadhida badan wax ku fahmaya sidaan ka aaminsanahay maaha dadkaasi waa dad doonaya inay ogaadan waxayna ogayn oo jecel waxa ka maqan ee anay wali baran inay bartan lakin waxagu ha xadidnadaan oo haku kala socnadan waxad weydiinaso dadku.

Sidani Maku Dhaqanbaa

Bal astaamahan iska baadh oo hadanad lahayn dhaqan gali si aad u noqotid qof kasto iyo garasho badan.


1. ***Dadka iskuma haleeysid:*** Tani uma aha astaama dadka garaadka u saaxibka ah oo kaliya balse waa astaan loga bahan yahay qof kasta ha sugin oo haku tashan mar walba qof bani'adam ah ee isbar inad noloshada kaliga hogaamin karto noqona qof isku filan oo wixii karankiisa ah dhamaysan kara.

2. ***Wad cafis badan tahay:*** Cafisku waa wax aad u qaali ah dadka badan koodna ma sameeyan arinkan kaliya waxa sameeya kuwa alle siiyay qalbiga saafiga ah maxaad u dhibi naftaada oo aad cuqdad iyo calool xumo ugu ridi iska cafi oo caafimad qab ilaahayna ku daa qof kasta oo ka gardarna malin baa jirta aan xagtina laysku dhaafi doonine.


3. ***Nasiibka iskuma haleysid:*** Waxad iska ilaalisaa ku tiirsanaanta nasiibku waxa uu ku siiyo ee ah guul ama guuldaraba balse wad tabcataa oo shaqeeysata adigoo wax wanaagsan ka filanaaya ilaahay, ma jiro wax si fudud lagu helaa ee dadaal iyo shaqo ayaa lagaa rabaa laguna dhaafa qayrkaa.

4. ***Kama niyad jabtid hamigaaga***: Iska ilaali inay ku niyad jabiyaan hadalada dadku hadaad raacdo hadalada dadka waligaa meel sare gaadhi maysid dadka guulaystay hadii ay maqli lahaayen oo ay raaci lahaayen hadaladii niyad jabka ahaa ee la odha jiray halka may soo gaadhen

5. ***Kuma Mashquultid wixii laso dhafay:*** In badan ayaan meelo badan kaga soo hadalnay ka fikirida waxa lasoo dhaafay maahan marnaba wax wanagsan iska ilow waxa lasoo dhaafay ku nolow waxa hada taagan Soomaliduna waxay tidhaa ***Aabahay baa geel lahan jiray aniga dameer leh ayaa ka fican*** manta dhan inaad ka fikirto oo tidhaa waxaasan qaban jiray waxasan ahaan jiray, waxa ka fican inaad u howl gasho waxa hada taagan.



Cutubka 6aad Cafi oo Calool Fayoobow



Cutubka 6aad Cafi oo Calool Fayoobow

Cafisku waa ka tanaasulida ama saamaxada qof ama dad



Kuwasoo kagalay qalad ama kugu sameeyay waxanad raali ka ahayn ado ku cafinaaya ilaahay dartii oo raadinaya ajar iyo abaal-marin xaga alle ah.

ilaahay wuxuu kaga hadlay ***44 Aayado*** oo qur'aanka ka mida si layno fahansiiyo muhiimada cafiska waxaana ka mida aayadka ilaahay ku tillmaamay cafiska **وسارعو الي مغفرة من ربكم وجنة عرضها السموات والارض اعدت للمتقين , الدين ينفقون في السرآء والضرآء والكبطمين الغيط والعافين عن الناس والله يحب المحسنين** Macnaha (***u deg dega dembi dhaafka Eebe iyo jano balaadhkeedu yahay samaawadka iyo dhulka oo laysku daray janadaas oo loo diyaariyey kuwa dhowrsada kuwaas oo ah kuwa wax bixiya wakhtiga ay wax haystaan iyo wakhtiga ay dhiban yihiinba, sidoo kale kuwaasi waa kuwo cadhadooda qariya ee dadka iska cafinaya Eebana wuu jecelyahay samefalayaasha***

Sidoo kale alle jalle wacala waxa uu ku leeyahay فاعففو واصفحوحتي ياتي الله بامره ان الله علي كل شيء قدير macnaha (***cafiya oo saamaxa ilaa inta Eebe la imaanayo amarkiisa waayo Eebe waa mid wax kasa uu doono awooda].***

Sido kale allejalle wacala wuxuu ku yidhi فاعف عنهم واصفح المحسنين ان الله يحب Macnaha ***(iska cafi oo saamax ilaahay waa mid jecel kuwa wanaaga samaynaya)***

Sido kale alle jalle wacala waxa uu ku leeyahay فاصفح الصفح الجميلMacnaha ***cafi oo si hagaagsan u saamax***

Sido kale alle jalla wacala waxa uu ku leeyahay خد العفو وامر بالعرف واعرض عن الجاهلينMacnaha ***(qaado cafiska wanaagana far kana jeeso kuwa jaahiliinta ah).***

Cafisku waa qayb ka mida caafimaadka is cafintuna macnaheedu maaha in la hilmaamo wixii dhacay oo kaliya balse waa in la aqbalo wixii dhacay iyado aan la xumaynayn oon laga dabo tagayn siday wax u dhaceen.

Cafisku maaha macnaheedu inaad dadka unaxiisanaso oo kaliya balse adiga ayey dan ku tahay qalbigaga ayuu dan uyahay, caafimadkaga ayuu dan uyahay sobobto ah waxad ka helasaa sacaado aduun iyo aakhiroba ah, Cafiska wuxuu tirtiraa ama baabiiya xumaanta dhex fadhida qalbiyada bani'adamka wuxuna cusboonaysiiya xidhiidhka ka dhexeeya dadka

Cafisku wuxu nuur ku shidaa qalbiyada kala fogaaday mudooyin badan wuxuuna sifeeyaa wixii hore oo dhan ma jirto wax uga cidhiidhi badan hadad cafiso cadowgaaga isago iska weydiin doona su'aalo badan waxa sobobay inad cafiso isago waliba isagu qaldan.

Faa'iidada cafisku u leeyahay dadka

1. ***Cisi iyo sharaf ayuu ilaahay siiyaa:*** Qofka cafiya dadka xumaanta ugaystay isagoo awooda inu ka Aarsado balse qaata talada ilaahay ina leeyahay ee ah Hadii laba qof ay cadaawo ka dhaxayso oo midkod ka kale cafiyo kuna qaabilo wanaag cadawadaasi mesha way ka baxasa sidoo kale ilaahay Aayad qur'aanka ka mida wuxuu ku leeyahay **ولا تستوي الحسنة ولا السيئه ادفع بالتي هي احسن فادا الدي بينك وبينه عداوة كانه ولي حميم**macnaha ***(ma sina ka wanagsan iyo ka xun ka wanagsan kala hor tag ka xun kii shalayto adiga iyo isaga idiin dhaxaysay cadaawadu waxay isku badalasaa saaxib dhow inuu ku noqdo).***

   Ilaahay waxa uu leeyahay lama kulmiyo oo darajada ma gaadhan ilaa kuwa sabray mooye waxanay ku sabreen isago ciil qaba oo dhibaato lo gaysay ayuu cadhadiisi xakameyey kabidna cafis ugu daray kuwii dhibaateyey, dhaaf adoo awooda inaad ka Aarsatid nabi muuse (cs) ayaa su'aal weydiiyay ilaahay isago ku leh adoomahaga yaa ugu qiimo badan? Ilaahay waxa uu kaga jawabay su'aasha waxa ugu qiimo badan adoomahayga midka isago awooda inuu Aarsado iska dhaafa oo cafis ka door bida hadaba cafisku heerkas ayuu gadhsiisan yahay faa'ido aduun iyo midd Aakhiraba wad ka helasaye cafiska badi.

2. ***Danbi dhaaf iyo darajo dalacsiin*** ayay mutaystaan kuwa cafiska badan nabigu (scw) wuxu yidhi **تفتح ابواب الجنة يوم الاسنين والاخميس فيغفر الله عز وجل عبد لا يشرك بالله شيئا الا رجلا كان بينه وبين اخيه شحناء ,فيقول انطرو هدين حتي يصطلحا ثلاثه مرات** Macnaha ***(Albaabada janada waxa la furaa malinta isninta iyo khamiista ilaahay waa u danbi dhaafa adoon kasta oo Aan ilaahay u shariik yeelin danbigiisa waa dhaafa nin mooyane isaga iyo walaalkiis ay ahaatay cadaawad dhexdooda ilaahayna wuxuu yidhahdaa celiya Labadan warkooda loona danbi dhaafi maayo ilaa ay ka heshiiyan sidaa ayaa sadex jeer malaa'igta lagu yidhaa)***

Kawaran hadaba labada intaas oo sano cadaawad ay ka dhaxaysay oon isa salaami Karin, oon is arki Karin, oo khamiis iyo isniin kasta ka qatan ilaahay dani dhaafkiisa waxa makhluuq loo danbi dhaafayo iyagu kuma jiraan waa laga reebaya sanad kasta, bil kasta, todobaad kasta sidasay ahanayan ilaa ay isa saamaxan.

3. ***Cafi aday dantaada tahee:*** dadku ma oga danta ugu jirta cafiska balse akhriste danta kowaad aday kugu jirta ha yaabin waan kaa qancinayaa sobobto ah qof markaad cafinaso ha u cafin oo kaliya inuu gafkiisii iyo waxyeeladiisi qirtay oo ku raaligaliyey isagoo waliba isku canaanaya qaladku kaa galay intaa kaliya

ha u cafinin, balse waxad u cafisaa cafiska caafimadka ah ee adiga dantu kugu jirto kaso ah

hadanad qofka cafin oo aad cuqdad u qabto waxad noqonasaa qof mar walba maqane jooga ah oo ka fikiraya mar walba Aargudasho iyado mar kasta maskaxdaada ay kuso dhacaso uur-ku-taaladii qofkaasi kuu gaystay markastod magaciisa ama wajigiisa aragtana waad xasuusanasa oo xumaatadina way kugu sii baahasa taasina dhibaato caafimaad iyo mid nafsi ahba way ku keeni kartaa.

4. ***Ka guulayso cadowgaaga:*** waxa is waydiin leh sidee qof cadowgaga ah uga guulaysan karta adigo waliba cafinaya? Way fududahay hadad raacdo talooyinkan Qofka ku xumeeyay ama dhibaato kuu gaystay badanaa waxa lagu qabtaa maanka iyo maskaxda halka qofkad jeceshahayna qalbiga lagu haayo hadaba qofkad necebtahay ee cadowgaaga ah waxad ku haynasaa maankaga marka haduu qofku maankaga dego ogow qofkaasi isaga kaa guulaystay oo maba ilaawasid soo noq-noqoshada xasuustiisa ayuu kaga guulaystay maadama uu ku mashquuliyey lakin qaado maah-mahdii soomalida ee ahayd ***(dameer iyo labadiisa dhagoodba waa laysku tuura)*** isku tuur qofka iyo xumaantiisaba adoon naftaada dhibaatayn sido kale soomalidu waxay tidhaa ***sun ku siiye subag baa la siiya*** qof haduu xumaan kugu

sameeyay wanaag ugu badal isaga isku xishoon doone .

Qisooyin cafiska ah

Akhriste markad rabto inaad shay ogaato muhiimadiisa waxa la daraaseeya qisooyinkii iyo dhacdooyin ku saabsan sidasoy tahayna faa'iidada cafiska si aan wax badan uga faa'idno waxan kula wadagay qisooyin runa oo dhacay wakhtigii saxaabada.

Qisada kobaad

Qays ibnu caasib ***Al- Manqari*** waa saxaabi ka mida saxaabadii rasuulka scw waxa uu ahaa ***Reer banu-tamiim*** waa saxaabi geel badan dhaqan jiray sida axaadista lagu tilmaamayo inuu nabigu ku yidhi هدا سيد اهل البدو macnaha ***(kani waa sayidkii reer baadiyaha]*** ninkan waa Nin ka dhashay qabiil aad u xoolo badan.

Maalin maalmaha ka mida isagoo Naadigii reerka fadhiya oo laysku waramayo ayaa waxa la hor keenay wiil uu dhalay oo mayd ah Iyo kii dilay oo la wado

dabadeed waxay yidhahdeen ragii qisadan warinayay siduu u fadhiyay qaab fadhigiisii ma badalin ee qolodii maydka waday ayuu eegay wuxuna ku yidhi ***kan aad wadana waad ka nixiseene bal horta xadhiga ka fura)*** isagoo qays naxdin u muujinaya ninka inankiisa dilay wuxuna ku yidhi isagoo la hadlaya kii inankiisa dilay ***[waryaa adigu tolkaa tiradoodana waad yaraysay , cadowgoodna waad u jabisay , riximkaa/ qaraabadana waad goysay]*** wuu waaniyey ka dibna wuxu yidhi sii daaya , maydkana diyaariyo markay diyaarintiisu dhamaato ii yeedha, islaantii u hooyada ahayd ninkan dhintayna geelayga dhex tagoo magta wiilkeda ka siiya dabadeed hadal shireedkiisi ayuu iska watay ayaa la yidhi.

Akhriste waxad u fiirsataa halkay saxaabigan is- cafintu ka joogto inankiisii ayaa la dilay waliba xaq darro ayaa lagu dilay kii dilayna waa sii daayey magtii wiilkisana isaga bixiyey, maydkiina isaga Aastay, hadaba sobobto uu sidaa u sameeyay mataqaan? Sidaa wuxu u yeelay maslaxo darteed dhiig la daadshaa dhiig la daadshu leeyahay, naf la dilaa naf la dilay leedahay sida diintuba sheegtay balse wax walba cafiska ka horeeya, wuxu ka fikiray haduu ku kici lahaa ficilo Aar-gudasho ah imisa wiil ayaa wiilkiisa dartii u dhiman lahaa? Imisa xoolo ayaa la kala dhici lahaa? Imisa qabiil ayaa colaad ku kala qaadi lahaa Aargoosigaa dartii?

Hadaba Caqliga saliimka ah iyo iimaanka fayow waa ka maslaxadiisa Ta dadka ka hor mariya, waa ka ka fikira talaabada uu qaadayo cidhib xumada iyo cawaaqib darada ka dhalan Karta, Hadaan Soomali nahay waxa ma xeerino dagaal la qaado iyo wiil wiil loo Aargudo ayuunban naqana intaan maslaxad isku daynaa way yartahay soomaliduna horay ugu maahmahday ***dagaal wiil kuma dhashee wiilba ku dhinta,*** Hadaba Aan colaada cafiska ka hor Marino.

Qisada labaad

Dagaalkii uxud waxa kaso qayb galayashii ka mid ahaa ***xudayfa ibnu yamaam*** iyo ***Aabihii*** waxay imaaden madiina markii dagaalkii badar dhacay reer madiina may noqon oo lama aqoon balse dagaalkii uxud ayay kaso qayb galeen dagaalkasna muslimiinta walagu jabiyay markii calanka muslimiintu dhacay ee dadkii isku dhex qaldameen ayay muslimiintii dhexdoodii seefta iskula jeesten iyagoon is garanayn kooga muslimka ah iyo kooga gaalka ah si kadisa ayuu xudayfa u arkay Aabihii oo seefta lagu boobayo iyado la moodayo gaal dadadeed wuku qayliyay xudayfa saxaabadii muslimiinta ahaa isagoo leh ***waar waa Aabahay*** intuu qaylinayay ayay dileen xudayfa aabihii saxaabadii ayuu u yimid oo arkay in aabihii gacantii

musliminta ku dhintay wuxu ku yidhi ilaahay haydinka danbi dhaafo wuuna ka tagay.

Akhriste bal ila fiiri waa saxaabi aabihii isago araya la dilay waliba isagoo ku dhawaaqaya ***waa aabahay*** waliba uu ku yidhi asaxabtii gacanta lahaa ilaahay ha idiin danbi dhaafo waxay sheegen saxaabadi soo warinayay qisadan sida xudayfa dhacdada argagaxa lahi u qabsatay hal mar lagama dareemin wax yaroo miyir beela ama kalo garasho la'aan ah Yacni waxad dareemasa hadii bani'adamka wax kala gaadhan waxa u sareeya dhiig hadana iyado la baneeyey aargudasho cafis ayaa la hordhigay.


Nabigu (scw) wuxuu yidhi qadiyad ama xukun looma keenin ***Anas binu maalk*** ilaa uu yidhaa is cafiya intaydan xukunka qaadan sidaa darted ayay asxabtuna si xooga ugu dhaqantay.

Ha Muujin OOHintaada


Aduunyadan intaad ku dhex sugan tahay dadku waxay kaa sheegayan waxanad ahayn iyo waxanad jeclayn in lagugu sheego ama lagu tilmaamo sidaa daraded qaado cafiska, wanaagana far dadka, kana jeeso jaahiliinta iskana dhago tir xumaantooda Tanina ogow dadku markay dhagaxa wabiga ku tuuran waxay sugaan dhawaqa dhagaxa sidaasi darted qofka si ula kac ah kugu

dhufta dhagaxa wuxuu sugaya falcelintada yacnii si kasa ah ayuu kuu dhibaateynaya hadaba adigu iska jaahilsii maxa yeelay qofka si kasa kuu xumeeya waa mid sugaya inuu maqlo oohintaada iyo xanuunkaga hadaba iska jaahilsii oo ha dareensiin inuu ku xanuunjiyay ilaa uu ka yaqiinsado in akhlaaqdada iyo dhaqankaga aanu lahayn wax dhawaaqa.

Dadku waa sida ***dhagaxa, qalinka, macdanta iyo birta*** marka laso muujiyo oo bananka la keeno qofka macdantiisa dhabta ah kulaylkiisana bananka la keeno waxa soo baxasa xaqiiqadiisa dhabta ah hadaba adigu soo muuji macdantada dhabta ah oo ah akhlaaqdaada wanaagsan ee ilaahay kugu manaystay.



Cutubka 7aad Guulayso Guusha Dhabta ah



Cutubka 7aad Guulayso Guusha Dhabta ah





Waa suuragal in qof walba dhinac ka eego fasiraada guusha balse qeexitanadani waa inta xulka ah uguna macquulsan.

Guushu waa in Aad alle swt isku dhiibto Aamintana in wax kasta ood Rabto xaqiijinteeda alle ku xidhan tahay ilaahayna waa bixiyaha nolosha dhabta ah ee Aadanahu Raadinayo.

Guushu waa himilo iyo hiigsi aad leedahay oo aad gaarto mana aha mid ku timaada xaglo laaban, sahal, fikir gaabni, hami yari iyo Samir yaraan toona.

Guushu waa go'aamiyaha hanka, hiigsiga iyo humaagyada mustaqbaleed ee qofku meel dhigtay, markaa waxay ka dhigan tahay qof waxa u guul ah ayaa mid kale u ah bilowga hayaanka guuleed ee uu hiigsanayo.

Guushu waa helida dhamaan waxad ka doonayso nolosha amase fulinta qorshihii aad hore u dajisatay, sido kale waa adigoo subaxii kaca oo dareema farxad oon dareemin cidhiidhi iyo diiqad.

Guushu waa kalmad soo koobasa wax si wanaagsan u qabsoomay ugu danbayna kusoo dhamaaday heer sare.

Guusha dhabta ah waa guusha aad ku guulaysato janada ilaahay iyo raaligalinta Eebe hadaan muslimin nahay hiigsigeena u sareeya waa jano Erayga ***guul ama najax*** ilaahay qur'aanka kagama hadlin balse waxa kuso Aroortay qur'aanka kelimadaha ah ***falaax ama fows ilaa 20 jeer*** ayuu ilaahay ku shegay qu'aanka kalmadahasi dhamantod waxay si cad u qeexayaan inuu ilaahay kaa badbaadiyay naarta janana kugu abaal mariyay ilaahay isago ino sheegaya liibaanta dhabta ah ayaa waxa uu ku yidhi فمن زحزح عن النار وادخل الجنه فقد فاز

Guushu maaha xoolo badnaan, mana aha mansab sare, balse guushu waa xasilooni nafeed iyo dagenaansho niyadeed waxanay qofka u sahashaa inuu si niyad samaana ugu dhex noolado bulshadiisa

Sido kale guusha waa baadi kaa maqan ood raadinaso sida uu abwaan ***Qamaan Bulxanba*** yidhi:-

- ✓ Baadida ninbaa kula daydayi daalna ka badane
- ✓ Oon doonahayn inaad heshana daayin abidkaaye
- ✓ Dadkuna moodi duul wada dhashoon wax u dahsoonayne

- ✓ Dallo malaha aakhiro hadii loo kitaab

Qeexitaanka erayga guul intaas ayaa inagaga filan balse hami kasta oo aad lahayd markaad rumayso ma waxaynu ku tilmaana ***guul*** mise ***libin*** Aan faalo ka bixino.

Guushu waa guulaysiga la guulaysto iyadoon warwar ka danbayn oo markad gacanta guusha ku dhigto aad dhibaato oo dhan ka raysanaso taasina inta aduunkan lagu nool yahay lama helayo waxana tusaale u ah kaso qaad waxad bilowday mashruuc ganacsi ah oo ah shirkad isku socdoka gaadiidka dalka ah ayaad bilowday oo magaaloyinka iyo gobolada iskaga gooshta hanti badana waad ka shaqaysay,waad ku nasatay oo wad ka midho dhalisay dadaalkii aad ku bixisay shirkadaas,waana lagugu hambalyeeyay adiguna waxad isku aragtay guulayste ,dadkuna waxay kuu arkeen guulayste isla saacadasna waxad tahay guualayste, balse adigo nimcada iyo faraxada ku jira hadii bas ka mida basaskagii uu shil galo dad badana ay ku dhintaan intaaso nafood magtooda lagugu qabsado hantidii aad shaqaysanasay mudoyinka badana aad ku bixiso magtii dadkii dhintay

Hadaba saacadas ma isku arkaysa in dhismaha shirakadaasi ay ahayd mid aad ku guulaysatay waxtarna ku leh Waa maya jawaabtu isla markasba waxad bilabasa adiga iyo dadkuba calaacal iyo catow aad ku durasan shirkada Aasaskeeda aad shalay u araksay nasiib wanagaga iyo dadaalkaga inaad ku gaadhay markaas ayanay kula wanagsanasaa hadaladii dadkii ku odhan

jiray iskadaa faa'iido malahee lakin aad hadaladas shalay u arkasay inay ku niyad jabinayaan oo ay ka xun yihiin horumarkaga dib ayad ka rumaysanasa adigo leh miyaan dadka warkoda maqlo hada khasaaran imaso gaadheene.

Hadaba qodobka fahanka u baahan wuxu yahay wax kasta oo aad samayso inta aduunkan lagu nool yahay oo aad ka midho dhalisaa maaha ***guul*** ee waa ***Libin*** mar hadiiba uu warwar iyo fashil dabayaal waxkasta oo aad u aragto guul hadana ay dhibaato iyo fashil ka danbayso maaha guul ee waa libin guushuna waa dheefta Aanay dhibi dabo oolin.

Waa Maxay Dheefta Aan Dhibi Ka Danbayn?

Jawaabtu waxay tahay waa janada, janada ayunba ah dheefta Aanay dhibi ka danbayn ee hadii aad hesho oo aad gacanta ku dhigto anay ka danbayn wax kadeeda ama warwar ah, Aduunkan inta la joogana ***libin, [نجاح], success*** ayuunba la gaadha sobobtuna waxay tahay libintu waa guul ay guul daro dabo taalo

Nabigeena (scw) ayaa ino shegay oo yidhi dhamaan umadayda oo dhani janada ayay gali doonan ilaa qof iska diida mooyane sido kale waxa uu yidhi قل آامنت بالله ثم استقم

Ugu danbayntii aduunkan libin ayaa la gaadha Aakhirana guul ayaa la gaadhaa ee muhiimadu waa guusha tasana ah guusha dhabta ah ee aan ku dadaalno

Ha Quusan

Nabigu (scw) waxa uu yidhi mu'minka xoogan ayaa ka khayr badan mu'minka daciifka ah xooga la sheegayana maaha murqaha ee waa awooda iimanka lakin labadaba kahyr ayaa ku jira ayuu yidhi sido kale nabigu (scw) waxa uu Ina leeyahay ku dadaal wixi ku anfacaya ilaahayna kaalmayso hana caajisin, caajiska ugu weyni waa adigo awoodada arki waaye.

tusaale ahaan Qaabiil kibirkii iyo isla weynidii qaaday ee walalkii noloshiisa uu kaga xumaaday intuu gacantiisa ku dilay hadana wuxu awoodi waayey inuu asturo cowrada walalkii oo uu Aaso kadibna ilaahay ayaa uso diray tuke waxbara marku arkay siduu tukihii u aasay maydka tukihii bakhtiga ahaa ayaa waxa uu ku jawabay qaabiil [اعجزت ان اكون مثل هدا غراب فاواري سوءة اخي] waxa uu leeyahay ***(ma waxan awoodi waayay inaan noqdo ama sameeyo siduu tukahan sameeyay oon asturo cawrada walalkay)*** xooga wuu qabay'e jahli ayaa hayay oo aqoon uma lahayn hadaba taa waxa la micno ah inago nafteena jahli inagaga sugan yahay oon aqoon fican nafteenii u lahayn ayaa hadana isla weynahay oo kibir badanahay ilaahay markii uu shaydaanka usheegayay awooda uu siiyey nabi Adam waxa uu kugu yidhi

ilaahay subaxanahu watacala nabi Aadam magacyo oo dhan ayaa la baray oo malaa'igta la barin si kibirka iyo isla weynida shaydaanka alle u jabiyo ayuu ilaahay sida ugu yidhi maadama uu shaydaan xaqirayey nabi Adam oo uu diiday inuu u sujuudo hadalkan laba mid ayaa ka qaadanan tan kobaad oo ah inaan lagu kibrin awooda ilaahay ina siiyeyadnaqo tan labaad in kibirka iyo islaweynidu anay bani'adam u sugnaanin oo anay ahayn awood uu sheegan Karin.

***Imaan xasan al-basari (ahn*)** wuxu leeyahay nafta hadanad xaqa ku mashquulin iyada baadilka kugu mashquulin doonta ogowna nolosha ma jirto wakhti aad firaaqo ledahay hadad arin u dib dhigto wakhti aan ahayn wakhtigeeda adigo sugaya inaad fursad u heli doonto, hadaba naftada been ayad u sheegtay howshaana waad dayacday wakhtigana wad lumisay, ma jirto firaaqo haday jirtana waxad haysa howl anad filanayn meelay kugu sugasay wakhtigaga qaybi howlahagana u kala horaysiiso siday kugu kala muhiimsan yihiin kana bilow hada wax kasta oo ay tahay inaad manta qabsato waxba Bari hala sugin howlahaga ma ogid inaad Bari gaadhaso mana ogid inaad caafimad ku gaadhi kana fagow dadka dadka cajis galiya cajiska aan sheegayo maaha wahsiga balse waa awood la'aanta nafta hadad Aaminto in anad waxba qaban karin maba qaban karasidba xata haduu aha waxad qaban karaso.

Nabi muxamaedna (scw) oo ahaa dhiirigaliyaheena aduun iyo aakhiraba wuxu jeclaa dadka dhanka khayr ka wax ka eega afka qaladna logu yaqaan (**optimisstic**) culumada cilmi nafsiguna waxay sheegan nafta in lagula hadlo hadalo rajo galinaya oo hami sare siinaya inay qayb weyn ka qaadato waxtarka naftaada ka niyad ahaan iyo ka ficil ahanba hadaba garo awoodada kuna kalsoonow kana fogow waxa isdhiibitanka la yidhaana oo ka tanaasul xata haday xaaladu kugu adkaato idam alle guusha garabkagay ahanasaye.

Guusha Waxa Keena Dadaal

90% guushu waa dadaal 10 so hadhayna waa nasiib iyo waafajinta ilaahay dadaalku waa sirta qof walba oo wax ku guulaystay uu sameyay waxana xaqiiqo ah in wax kasto lagu dadaalo la gaadhayo soomaliduna waxay tidhahda dadaala wuu gaadha sido kale taa caksigeeda waxa ah in waxanad ku dadaalin anad kaso hoynayn guul xitaa waxasi haday yihiin wax hore oo aad aqoon uleedahay waxa kaga dhow kan hada ku cusub ee ku dadaalaya rajaynayna inu ku guulaysto Wax qabad la’aan, dadaal la’aan iyo ficil la’aan dadku guul daro ayay kala kulmaan kadibna nasiibka ayay Eedeyaan nolol aan lahayn aragti fog, geesinimo waa indho la’aan.

Badana maskaxda yare daciifka ah ee cajiska badan ayaa markasta doorbida wado yaro fudud waxa jira waxyaabo ayna dad badan ahmiyad siinin balse laysku dhaafay waa

dadaalka iyo juhdiga qofba qofka uu ka howl karsan yahay ayuu ugu dhow yahay guushanasiibkuna waa halkiisa.

Wakii ***abwaan xasan dhuxul laabsalax*** lahaa

Darajo iyo karaamoy

Marna deeq ilaaheey

Marna duubka Sharafeey

Guuley Dagaal badan

Qof alle ayaa ku daydaya

Damaclaa ku raadsada

Dadaalba kuso hela

Qasab maaha inaad gulaysataa balse waxa qasaba inaad isku daydo inaad guulaysato Akhriste waxan tix iyo tiraaba kuso sheegnay doorka muhiimka ah ee uu dadaalku ka ciyaaro guusha wax kastana waxa lagu fahmaa tusaalaha tana waa sheeko dhiirigalin ah tusaale cadna u ah in guul walba lagu gaadho dadaal.

Sheeko

Bablo waa shaqaale maherad macmacaanle ah isagoo ku jira shaqadiisii maalinleha ahayd ayaa si kadisa waxa ugu so galay mulkiilihii meharada waxanu ku yidhi

bablo waxyar makula hadli karaa bablona isago isku huba shaqo hufnan iyo karti waxqabad aya waxa uu is yidhi manta nasiibkagii aya ku hor imid oo waxad heli doonta dalacsiin isago taa niyada ku haaya ayaa waxa uu ku yidha manta waxan ku wada war Aanad ku farxi doonin waraaq aya uu u dhiibay waxanu ku yidhi waxad ku qasbantahay inaad iskaga tagtid meheradan bablo waa yabay! waxanu yidhi maxa jira mudane waad igu ciyaarasa sow mahan anigu waxan ka mid ahay dadka ugu howl karsan meshan mulkiilihi waxa ugu jawabay waxan samaynay shaqaale dhimis waxanan rajaynayaa inaad ku qanacdo go'aankayga ood mesha ka tagtid wanu ka tagay gurigiisa ayuu iska tagay balse xaaskiisi aya la yabtay sida dhakhsiyaha leh ee uu shaqada uga so noqoday bablo aya hadalka bilaabaya waxanu ku yidhi ma aqaan inaad I rumaysan doontid balse shaqadii waa layga soo eryay waxay ugu jawabtay side? Maxa dhacay sow ima lahayn Malmo gudahood waxan rajaynayaa dalacsiin waa maxay waxad ka hadlasa aad bay ugu qaylisay Bablo wuxu isku dayay in badan inuu xaaskisa ku qanciyo dhibaatada haysata oo ay u samirto balse arinkaa dhagaysigiisa way ka dhago adaygtay waxanay ugu hanjabtay inay ka tagi doonto madama shaqadii laga so eryay oo aanu ka faalo qaaadi Karin nolosheeda iyado ugu cago juglaysay inay helaso Nin kale oo nolosheda kaafin Kara isagana dhaama.

Dabcan nabar kale iyo niyad jab kale ayay ku noqotay markan waxa uu isku dayay inuu madaxa soo dagsado

waxanu tagay goob cabitaanada lagu cabo si kadisa ayaa waxa uso wacay saaxiibkii waxanu la wadagay xaaladiisi iyo wax ku dhacay waxanu ka codsaday inuu iso celiyo lacag uu hore uga amaahday oo ahay **$5000** saaxibkii wuu daremay dhibka haysta waxanu u balan qaday inuu siin dono lacagtiisi balse anu hada hayn boblo aad ayuu uga xumaday arinkaa telephonka ayuu ku damiyay balse waxa xaaladiisa dareemay ninkii meherada cabitaanka lahaa aadna wuu uga murugoday dhibta qabsatay iswaraysi badan kadib ninkii wuu dajiyay wanu dhiirigalaiyay waxanu usheegay cabitanka uu cabay in isagu ka bixinayo oon wax qarasha laga rabin waxanu hadalkiisa sii raaciyay ninkii ***Tani waa bilow cusub*.**

Dhowr maalin kadib bablo waxa uu online ka ka arkay tukaan iiba oo qiimisa lagu shegay ***$5700*** boblo wuxu codsaday in isaga laga iibiyo waxa qaabilay mulkiilihi tukaanka gadayay waxanu usheegay inu meesha ku qancay iyado loo shegay inay lacagtu ahaynba sidu moodayo boblo wuu niyad jabay sobobto ah ma haysto lacagta inta leeg isago fikiraya ayaa waxa si kadisa ugu yimid isla goobti saxiibki oo usida lacagtii uu ka amahday iyo mid kale oo uu isagu ugu daray boblo lama filaan ayay ku noqotay arinkaasi balse waxa uu ku yidhi saxabikii hada waad furan kartaa tukaankan inta lacagata dheerna inuu iska soo celin karo xiligu awoodo, farxad badan kadib tukaankii howl gal ayuu ka bilaabay boblo tukaankii hada waxa ka shaqeeya shaqaalo fara badan subax ka mida subaxyada sidii caadada u ahayd boblo

isago shaqadiisa wata aya subaxa waxa kaso muuqday safafka dhaadheer ee ay macaamiishu ugu jirto mulkiilihi hore ee uu shaqayn jiray boblo marku arkay wuu uso baxay salaan kadib mulkilihii ayaa ku yidhi boblo ma meheradan ayaad ka shaqaysaa? waxa uu ugu jawabay kama shaqeeye ana lay shaqeeya cajiib iyo u qaadan waa ayay ku noqotay balse waxa uu ku yidhi mulkiilihi hada meheradayadii qayb cusub oo dalacsiina ayaan qaadananaa ee naguso noqo balse bablo intu dhoolo cadeeyay oo uu cabaar meheradiisii fiirshay iyo siday ukala socoto ayuu ugu jawabay waad u jeeda hada sidaan ahay mulkilihii ayaa yidhi waan fahmi karaa boblo waad mahadsan tahay waanu ka tagay.

U jeedada sheekada:

- ✓ Marka lagu liido ee waxqadabkaaga la xaqiro in aanad fadhiisan oonad niyad jabin ee dadaal la timaado aduunkuna waa hadhka labadiisa galin hadii manta aad hoos tagan tahay Bari ayad sare Mari karta hadad la timaado dadaal.
- ✓ Marka lagu cidleeyo ee lagugu naco xaalada adag inaad ilaahay talo saarato oo aad dadaasho niyadana ku haysato in maalin uun arimuhu ay iskugu kaa toosi doonan.
- ✓ Go'aan adag lahow iyo hami sare dhibaatoyinka kaso ajahaya guushana u adkayso.
- ✓ Cadowgagu way ku tijaabin donan mar walba balse tusi dhiiranan iyo karti.

- ✓ Dhiirigalin adiga iskugu filane naftada ka adkow oo ha noqon qof jilicsa

Side Loo Noqda Guulayste

Qof kasta waxa ku beeran hami ah inuu guul ka gaadho noloshiisa ruuxa bulshada ku qiyaasaso saraynta iyo karaamaduna waa Kan laga arko guul uu gaadhay hadaba akhriste waxan kula wadagay talaaboyin la hubo inay yihiin furayasha guusha sido kale hadad isku daydana guulayste aad noqonaso.

- ✓ ***yeelo hami iyo hiigsi sare:*** sirta kobaad ee guusha noloshu waa in uu qofku dhigto ujeedoyin cadcad iyo howlo qodobaysan oo uu doonayo inuu gaadho waxa muhiima in qofku ujeedoyinkaas uu rabo inuu xaqiijiyo u kala saaro kuwo himilada dhow ah iyo kuwo himilada fog ah, waa inuu qoro jidka uu u marayo himilada dhow xaqiijinteeda una kala horaysiiyo siday u kala horeeyaan, waa inaad qorotaa jidad badan ood ku talagasha inay wax walba suurgal yihiin oo ayba ku shaqayn wayaan wadooyinkii aad calamadsatay adigo haysta qorshe lagu meel mari karo bilow oo gudogali hadafkaga iskana ilaali niyad jab naftaada ku kaab iskuday iyo Samir badan.

- ✓ ***isku day in badan:*** caruurtu markay yaryaryihiin waxay isku dayan wax walba inay qaadan in badana

kuma guulasytan isku daygoda balse way joogteyan ilaa ay ka baranayan tan waxa la mida hab kasta oo waxa lagu barto ka dibna guul lagu gaadhi karto waa inaad barataa oo aad ku talagashaa sidad u yeelan lahayd Samir iyo dulqaad badan inaad marar badan guul daraysato waxay la mid tahay inaad aqoon durugsan u lahaato hababb badan oo aan lagu gaadhi Karin hadafkad doonasay marka guuldarada lafteeda ha ceebaysan waa balaayo loo bahan yahaye.

- ✓ ***Same isku badal:*** markaad rabtid inaad guulo badan gaadho wax lagama maarmaana inaad kolba badasho xeeladahaga isku day wax cusub ama hab cusub inaad raacdo Isla markaa is weydii sobobtaad u guuldaraysatay si aad u ogaato wixii ka qaldanaa intaa ka dibna samee isku daygaaga xiga markasta oo aad guuldaraysato waxad ogaan doonta wax cusub.

- ✓ ***Aamin100% inaad gaadhaso hadafkaga:*** aaminada ka horaysa waxqabadka hadanad aaminsanaynba waxqabadkagu inuu midho dhali doono waxad ahaanasa qof ka walacsan waxqabadkiisa oo ka yabaalsan taasina uma fiicna qofnimadaada waayo waxay dabrasa hankagii waxanay hoos u dhigasa hadafkagii waxqabad.

- ✓ ***Baro sobobto ka danbaysa guuldaradaada:*** inta ugu badan dadka aan guulaha gaadhin waxay dareeman garab la'aan taasina waxa badana ugu wacan ma garanayaan

waxaqbadkay ku gaadhi lahayen guusha noloshooda mar walba fashilkooda waxay u aanaynayan nasiib xumadooda kadibna waxay isku arkayaan qof aan waxqabad midho dhal leh samayn Karin marka intanay tasi kugu dhicin baro sobobtad u fashilnatay kadibna maarayso waxqabadkaga oo siday u kala mudan yihiin u kala horaysii.

- ✓ ***Lahow doonis xoog badan:*** doonista xoogani waxay kuu sahlasa inaad hadafyadaada nololeed xaqiijiso hadii aad leedahay doonis xoogan ogow cidina kuma hor istaagi karato kumana niyad jabin karto meelan biyo lahayn hadad tidhaa biyan kaso saaraya so cid waliba kula yaabi mayso hadaba hadii ay hadafkaga tahay waad kaso saari kartaye tamartada iyo tacliintada adgeegso.

- ✓ ***Samir iyo dulqaad:*** qof kasta oo nolosha hurumar ka gaadhay kumu gaadhin maalmo iyo saacado balse waxay qaaten go'aan adag oo ka midho dhal leh Sidaa darted akhriste hadaad rabto inaad nolosha tan ah ka gaadho guulo yeelo Samir iyo dulqaad oo xamil waayaha aad kala kulmi doonto xaqiijinta guulahaga.

- ✓ ***Yeelo kayd sired:*** ma ogtahay inad fashilmaso mar kasta ood xogtda rasmiga ah dadka la wadagto waayo ah dadku isku si wax uma arkasan wad kala aragti duwan tihiin wanad kala hami duwan tihiin

naftada la tasho caqligaga aqoonta leh adeegso kadibna ilaahay talo-saaro hore usocod iyo hami sarena yeelo.

AQbal Naftaada Guushana Isku Diyaari

Waxad aduunkan timiday aduunyadu iyadoy kugu faraxsan tahay balse Aanad adigu ku faraxsanayn waxad aduunka kuso gashay oohin aduunkuna wuuku rabay maadama Aad tahay bashar cusub oo kuso biiraya wuu kugu faraxsana dhamaan dadka hareerahaga joogana way dhoolacadaynayeen iyago isku hambal yeynaya lakin adigu kumad faraxsanayn imaanshiyihiisa madama oo Alle (scw) kugu abuuray meel noleshedu dhamaystiran tahay oo cimiladedu isleeg tahay.

Lakin kuso biiritanka bashar anad hore u aqoonin iyo jawi anad hore ugu noolaynin wuxu sobob u noqday Ooyintada waayo maad ogayn qofkad tahay iyo hlkad timiday iyo sobobtad meshan u timiday buuqa badan maalmo ka dib waxad aqbashay deegankad kuso biirtay oo wad la qabsatay hadana bilooyin ka dib waxad ogolaatay oo kala baratay dadkii kugu hareeraysnaa adiga ugu horaysiinaya hooyo macan kadibna waxad marba marka kasii danbaysa la qabsanasay nolosha maraaxiladeeda kala duwan sidaana waxad ku aqbashay noloshada waxad racday awaamirtii ilaahay waxanad

baratay ujeedka aduunkan lagu keenay, marka inad aqbasho naftada iyo noloshadu waxay kaa dhigasa qof la qabsada nolosha waaqicigeeda kala duwan.

Noqo Qof Nasiib Badan

Dadku markay arkan qof guulaystay oo nolosha horumar ka gaadhay waxay yidhahdan nasiibkisa caawiyey hadaba taasi waa hadalka dadka faashiliinta ah iyaguna markay fashilkoda iyo mesha ay joogan is arkaan ayaa waxay yidhadan nasiibku nama caawin lagama yaabo inay daba ordaan guusha waayo waxay aaminsan yihiinba inuu nasiibku xumeeyay kuwa kalena nasiibku saaciday, guul ma timaado ilaa la helo ***dadaal badan,so jeed badan, fikir iyo qorshayal badan, akhrin badan, baadhid iyo ka dabatag badan, diyaarin badan*** intas oo dhan oo isku tagtay waxay maxsuul u noqonasa guushada aduun iyo Aakhiraba.

Hadaba waxan leenahay nasiibku wuxu ku xidhan yahay dadaal iyo joogtayn badan, hadaba ogow laba qaaciido oo kaliyaay kaga xidhan tahay inad noqoto qof nasiib badan.

- ✓ ***Bixi dadaal:*** intaad awoodid bixi dadaal hana sugin wakhti ku munaasiba ama kugu haboon oo aad xaqiijinasid hadaf yadada iyo riyooyinkad ku riyoonasid iyo meeshad rabtid inaad gaadhid waa

inaad fursada gacantada ku samaysata si aad u noqoto qof nasiib ku leh wax kasta oo uu qabto.

- ✓ ***Ha is dhibin:*** hal mar oo aad kuftay oo aad dhacday yaanay caqabad ku noqon safarkaga guusha ogow guuldaro kasta ood la kulanto waxad ka dheefasa khibrad iyo waayo-aragnimo xeel dheer, ma ogtahay inaad ka fiican tahay qofka marka u horeeyaba guulaysta maxa yeelay adigu waad guul daraysatay waxanad taqana wadooyin badan kuwaso aan guusha loo Marin.

Guusha dhabta ahi waa raaligalinta ilaahay

In alle swt ku jeclaado waa guusha halka u saraysa hadii alle ku jeclaadana qalbiyada wanagsan oo dhan ayaa ku jeclaanaya khayr oo dhana wuu ku waafajinaya wuuna ku hiilinaya qalbigagana wuxu u hadyaynaya amni iyo xasilooni dhamaystiran, hadii alle swt ku jeclaado wuxu ku hibaynaya xikmad badni dhib walbana wuu ka ilaalinaya dadko dhana wuu ku sakhiraya.

Same wad samayn kartaye

Ma jiro shay ku diidi kara inaad xaqiijiso hadafyadada hadad manta turun turooto oo aad seegto ka dhabaynta hadafyadada bari kac oo u istaag sidii aad uga dhabayn lahayd marwalbana xasuusnow jabka kaa haysta

gudahaga iyo is Aaamin la'aantada ayaa ka adag kana khatarsan duruufaha adag ee kugu hareerasan markastana ku dheh naftada ***waad awoodaye same*** una sheeg inaad noqon doonto qof bulshada uu ku noolyahay ka dhex muuqda wanagana lagu soo xasuusto ogowna hadad waydo shay in anad alle jalle wacala anu ku wayin waxad doonasay balse maslaxadada aduun iyo tada Aakhiro oo gacanta ilaahay ku jirta darted wuxu ku qadaraya waxanad jeclayn balse danada ah marka taasina yeyna kugu noqon niyad jab.

Hadafku yaanu kaa lumen

Hadafka ugu weyni waa inaad muslinimadada xajisato oo anad diintada ka tagin kuna adkaato kana ilaaliso wax kasto dhib ku ah hadafkagu yaanu noqon aduun iyo tabcashadiisa garo qiimahagu inaanu ahayn kaliya inaad aduun xisaabiso oo ay jiraan ahdaaf badan oo ilaahay aduunyada ku keenay inta badan wan ilowna oo maba xasuusano aakhiro inay tahay hadafka kama danbaysta ah ee laga leeyahay keenista makhluuqa aduunyada balse marka ay timaado wakhtiga kala saarista ayuu qof walba tamanin doona in dib loo celiyo taasina ilaahay ayaa hore inogu shegay.

Aduun iyo aakhiraba u shaqayso oo mid kaliya u go' laguma laha balse niyadada yeyna ka bixin xaqiiqada

dhabta ah ee ilaahay ku keenay aduunkan iyo ujeedka laga lahaa abuuritankaga.

Hal abuur yeelo

Markad tahay qof waxbartay oo aqoon iyo cilmi ilaahay siiyey muhiim kuma aha inaad qof quudkaga udaba fadhiisato ood wax ka sugto cilmiga ilaahay ku baray intifaacso aqoon xirfadaysana la imo oo qorshe cad u dajiso noloshada qofba qofka uu ka hal abuursan yahay ayuu ka guulo badan yahay maskaxda ilaahay wuxu ku siiyey inad ku maarayso noloshada ee kuma siinin inad culayskeda xamaasho hadaba fikir oo fiiro dheerow han hal- abuurna yeelo.

Cutubka 8aad Ha Murugoon

Cutubka 8aad Ha murugoon




Murugo waa dareen qarsoon oon la arki Karin balse la dareemi karo wana xaalad dabiici ah oo qofkasta uu dareemo marka ay dhibato soo wajahdo sido kale waa xaalad ku salaysan dareen taban oo ay ka danbayso xaalad anad ka raali ahayn inay kugu dhacdo waxay noqon karta mid xaga ilaahay kaga timiday oo musiibo ah iyo mid xaga bani'adamka kaga timaday oo dhibaato ah, waa isku mid xaga dareen haan balse waxa dhici karta xaga wakhtiga ama culayska inay ku kala duwanadaan sobobto ah ilaahay basharkiisa waxa uu I dhibaateya si uu u imtixaano lakin bani'adamku waxay ku dhibaataynayan si ay u ogaadan xanuunkaga.

Waxa hubaal ah qofkasta inuu marun dareemay xaalad naftiisa murug galisay oo ay jiraan maalmo iyo sanadaba aanu ilaawin haba yaraate hadaba ogow akhristow murugadu ma ahan xaalad daa'im noqonaysa oo mar walba ku haysanaysa waa xalad xili gaara ku haysanasa kadibna dhamaanasa laga yaabe inay raad kugu yeelato.

Hadaba Maxaad u murugoonasaa adigo helaya daqiiqad walbo noloshaada ka mid ah fursad ayna kaga ahaatay Allah xagiisa?

Maxaad u murugoonasaa iyadoo ay arsaaqadaadu qorantahay cimrigaaguna kooban yahay geeridaadana Aanad ogayn?

Maxaad u murugoonasaa hadii aad danbi dhaaf weydiisato ilaahay isagoo ku arsaaqayo kaana tirtiraya dhamaan gafafkaagii yo danbiyadaadii oo naftada iyo noloshadana uu ilaahay damanad qaaday?

Maxaad u murugoonasaa ilaahay haduu doono shay wuxu odhanayaa noqo kadib amarka Rabi uuku noqonayo sidaa si lamidana waxad weydiisatana uu kugu ahaanayo ama ku fudaydinayo?

Maxaad u murugoonasaa murugadaada iyo guuldaradaada iyadoo ay ka qurux badantahay isku daygaaga iyo farxadaada?

Maxaad u murugoonasa isagoo Allah subxaanahu watacaala habeen walba kuu imaanayo samaa'u dunyaa isago kuleh ***adoonkaygiiyow I weydiiso waxad Rabto oo iga dalbo waxad u baahan tahay waan ku siinayaye*** hadaba adoo weydiisan karaya ha murugoon.

Maxaad u murugoonasaa adigoo Allah subxaanahu watacaala uu ku kala cadeeyay xaqa iyo baadilka, xalaasha iyo xaaranta kuna siiyay caqli wax weeleeya oo fahan badan?

Maxaad u murugoonasaa nafsadan Allah ayaa ku siiyay adigoon la gala tashana waa lagaa qaadaya marka arimahago dhanba iyagoy gacanta ilaahay ay ku jiraan miyaad ilaahay ku ledahay ilaahayow miyaad sidan wax igu xalisin miyaanu ilaahy maslaxadada kaa garanayn?

Hadaba ha murugoonina adoomihii ilaahayow hadu aduunku cidhiidhi kugu noqdo oo aad dareentid culays sida in aduunko dhanba madaxaga la saaray u dhawaaq oo dhankiisa u carar khaaliqii ku abuuray oo Rabigaga gacanta u tag adigo dhahaya **ربي اني مسني الضر وانت ارحم راحمين** macnaha ***(Rabiyow dhib ayaa itaabatay adiguna waxad tahay kuwa naxariista ka ugu naxariista badan)*** waxa kale oo tidhaa **انما اشكو بثي وحزني الي الله.**

Insaanku dhibta tirade badan uma adkaysto ilaa mid uun mooyane kaasina waa ka sida dhabta ah ilaahay xidhiidhka ula leh muslimka dhabta ahi wuxu sameeya markay dhib ka hortimaado inuu la xidhiidho ilaaha ay gacantiisa wax walba ku jiraan **من بيده ملكوت السمنوات والارض.**

Ogow akhristow markastu daciifo xidhiidhka kaala dhexeeya Rabigaa waa markasto noloshaada xaga xun usii badato, markastu xoogaysto xidhiidhka aad ilaahay la leedahayna waa markasta oo uu wanagsanaado ku dhaganaanshaha diintada iyo Aaminida qadarka alle (swt).

Balanqaadka Ilaahay iyo Mooganantеena

Akhriste aan kuso xasuusiyo 9 balamood oo ilaahay ku balanqaaday si aanay ku murjinin dhibaatoyinka aduunkan yaala.

Eebe waxa uu leeyahay فمن تبع هداي فل يضل ولا يشقي ***(Qofkii raaca hanoonkayga malumayo mana warwari doono)*** balantan helitankedu waxay ku xidhan tahay inaad raacdo jidka alle ku yidhi raac.

Eebe waxa uu leeyahay فاما ياتينكم مني هدى فمن تبع هداى فلا خوف عليهم ولا هم يحزنون ***(hadad raacdan hanuunkayga ruuxii raaca hanoonkayga baqdin iyo werwer korkiisa ma ahaanin)*** ufiirso mar walba noloshada danbe ilaahay ayaa balanqaadaya hadad amarkiisa aqbasho.

Eebe waxa uu leeyahay من عمل صالحا من دكر او انثي وهو مؤمن فلنحيننه حياة طيبه ولنجزينهم اجرهم باحسن ما كانو يعلمون ***(qofkii sameeya camal wanagsan ha ahaado Nin ama haweenay isago mu'mina waxan ku noolayn doona nolol wanasan waxan ku abaalin doona ajar wixii wanaaga ey sameeyen)***
Eebe waxa uu ku leeyahay ان الله يدافع عن الدين آءمنو ان الله لا يحب كل خوان كفو ***(ilaahay wuu difaaca kuwa rumeeyay Eebana ma jecla mid kasto khiyaani iyo gaalnimo badan)***

Eebe waxa uu ku leeyahay ان الدين قالو ربنا الله ثم استقامو تتنزل عليهم المئكة الا تخافو ولا تحزنو وابشرو بالجنة التي كنتم توعدون **(*kuwa yidhi Eebahena waa alle kadibna toosnaday***

waxa kuso dagta malaa'ig markay dhimanayan iyago ku odhanaya ha cabsan hana murugoon ku bushaarayso janadii laydiin yaboohay).

Ebe waxa uu ku leeyahay افمن كان مؤمنا كمن كان فاسقا لا يستوو ***(Ruuxa mu'minka ahi ma la midbaa midka faasiqa ah).***

Eebe waxa uu ku leeyahay [افنجعل المسلمين كا لمجرمين ***(Ma muslimiinta ayaan la mid dhigayna mujrimiinta).***

Eebe waxa uu ku leeyahay ما يفعل الله بعدابكم ان شكرتم وآمنتم وكان الله شاكرا عليما ***(muxuu Eebe ku fali cadabkiina hadad mahadisaan oo aad rumaysan Eebana waa mahadiye ogaal badan).***

Eebe waxa uu ku leeyahay افمن وعدناه وعدا حسنه فهو لا قيه كمن متعناه متاع الحياة الدنيا ثم هو يوم القيامة من المحضرين ***(ruuxan u balan qaadnay balanqaad fican mala midbaa kii aan ugu raaxaynay nolosha dhow ee aduunyo ee laso joojin doono maalinta qiyaame lagana xisaabin doono).***

Ufiirso adoonkii ilahayow waa lagu shegay in aduunkan lagugu imtixaani doono Aakhirana lagugu abaalin doono lakin kaliya waxa lagugu xidhay inaad amarka ilaahay raacdo kaliya waxan kor kuguso taxay 9 balanqaad oo ilaahay adoomadiisa rumaysan uu u balanqaday waxba kaa dhibi mayso murugo yar oo aduunkan kugu haysta hadiiba aad guulaysanayso maalinta danbaysa ee Aakhiro.

Adoonkii ilaahayoow aduunku waa daaru ibtilaa wa imtixaan aduunkan waa meel shaqo, waa meel laysku imtixaanayo abaalmarintuna waa Aakhiro Eebe waxa uu leeyahay احسب الناس ان يتركو ان يقولو ءامنا وهم لا يفتنون * ولقد فتنا الدين من قبلهم فليعلمن الله الدين صدقو وليعلمن الكدبين ***(ma waxay u malaynayan inaan la imtixaanayn oo la ibtilaynayn kadibna ay iska odhanayan uun waan rumaynay iyagon la fitnayn * xaqiiqdii waala imtixaani sidii kuwii idinka horeeyay loo imtixaanay Eebana waa muuin kuwa run shegay iyo kuwa beeniyay)*** sido kale Ilaahay wuxu leeyahay ما كان الله ليدر المؤمنين على ما انتم عليه حتي يميز الخبيث من الطيب ***(ha moodina ilaahay inuu sidaa idinku dayn doono wuxu kala saari doona ka xun iyo ka wanagsan).***

Dhamaan nimcooyinka Eebe ina siiyay oo dhan waa laynagu imtixaanaya haday noqoto ***Caafimaadka, Maqalka, Araga, Urta, Dhadhanka, Taabashada, Socodka caruurta, Ilmo la'aanta, Cilmiga, Jahliga, Nabada, Dagaalka, Barwaaqada, Abaarta, Waalid la'aanta/Waalidko nool, Xaaska/ xaas la'aanta, Hantida, faqriga, aftahanimada, madaxnimada, maamulka, iwm*** dhamaantood waa imtixaan
Ha moodin nimco kasta ood haysato inay tahay deeq balse waa tijaabo iyo imtixaan imisaa laxaadla oo aad ***adigu laxaad qabtaa? Imisaa indho la' oo adigu indho qabta?*** Waxa sida looga dhigay aduunku inuu isku dheeli tirnaado oo inagu dhexdeena isku cibro qaadano ilaahayna wuxu rabaa inuu ogado ka ku sabray xaalada adag iyo ka ku shugrinaya xaalada nimcada iyo badhaadhaha lagu jiro, Hadii lagu dhibaateeyo Eeg ka kaa hooseya nabigeenu (scw) wuxu leeyahay الى انطرو

من اسفل منكم ***Eeg ka baahan ee adiga kaa daran, Eeg ka xanuunsan ee kaa daran***, intaad meel yar oo ku xanuunasa ka cabanaso imisaa caban karayn oo sariiraha yaala oo xaalatul mowt ku jira, intaad faqri ka cabanaso imisa gaajo iyo haraad dartii u dhintay, lama so koobi karo sidaa darted ayuu nabigeenu inoogu dardaarmay inaan eegno kuwa inaga hooseeya si iimaan inogu kordho ilaahayna ugu mahadino.

Ogow akhristow qofba intuu imtixaankiisu leegyahay ayuu danbi dhaafkiisu leegyahay haba intuu imaankaagu xoogan yahay ayuu imtixaankaguna leeg yahay mar walba xasuuso waxad haysato oo ku mahadi ilaahay, bani'aadamka badankiisu ma eego wuxu haysto balse wuxu eega waxa ka maqan oo uu isku daaliyaa helidooda.

Ha murugoon murugtu waxay kuso xasuusinasaa wixii tagay waxayna kaa cabsi galinasaa waxa soo socda maalintado dhana way ka baa'binasa, ha murugoon waayo murugto waa wakhti lumis waxba Kama badalaso wixii tagay kaliya waxay wareerinasa maskaxdada waxayna kaa xadasaa farxadaada,
Ogow in aduunku isbadbadal yahay mugdi kastana iftiin ka danbeeyo, culays kastana fudayd ka danbeeya Sida alle (swt) leeyahay. ان مع العسر يسرا ***Culays kasta fudaydba ka danbeeya*** ilaahay waa dhiirigaliyaha bani'adamka intanu qof ban'adam ahi ku dhiirigalinba qur'aanka ilaahay shido oo dhagayso kadibna macnaha dhuux qalbiga ku dagi doone badankeenu markay xaaladuhu inagu xumaadan waxan daarana oo dhagaysana heeso khuseeya xaaladeena kadibna xanuun

ayaan dareena oo xaladii u baahnayd dajinta ayeynu xasuus galina maskaxdeena qalbiyadeena dhaawac kale ayan ku sii shidna heesuhu waa danqarayaal boogeed Qur'ankuna waa dhaye boogeed hadaba haku kala socnadaan dhibtada dhakhtarkii dhayi lahaa iyo kii dhibaatayn lahaa.

Ha murugoon ***xanuunka walaga caafimaadaya, danbiyadana wala dhaafaya, xaaladaha adag walaga baxayaa, daymaha wala bixinayaa, ka maqan wuu imaanayaa, qaladkana waa la saxayaa*** inshalah ee ha murugoon Nolosha aduunyo waxii lagugu talogalay waad helasaa xitaa haday laba buurood dhexdooda ku jiraan, waxan lagugu talagina ma helasid xitaa haday saaran yhiin labadaada dabnod korkooda, malaguna nafta kaa qaadi maayo ilaa luqmada ugu danbaysey eed aduunkan ku lahayd adoo ka cuna mooye.

Ha murugoon sobobto ah murugtu ma joojin karto waxanad jeclayn inay dhacaan lakin waxa ay joojin kartaa inaad ku raaxaysatid wanaaga iyo nimcada alle ku siiya kadib murgta iyo dhibaata haka murugoon in alle ducadaada iyo baaqaga aqbali waayo
sobobto ah xaqiiqda alle aya garanaya lakin cabsidiisa iyo rajadiisa ayaa ku wanagsan mar walba inad niyada ku haysato adigo danbi weyn galay ka toobad keen kana rajee in ilaahay ku danbi dhaafayo lakin yanay caado ka noqon.

Ha murugoon waayo xiligaad qaadatay neef adigo caafimaad qaba qof ayaa jira isna qaatay neeftii aduunkan ugu danbaysay oo sidaa nolosha ku macasalaameyay.

Ha murugoon hadii guuldaro iyo fashil kuso gaadhay ku farax oo ogow inad cashar ka baratay oo ay ahayd cashar ku dhinaa barashadiisu, hana ka murugoon waxa alle kuu dooray ayaa ka wanagsan waxad adigu doorataye ku qanac qaybta Rabigaa ku siiyey.

Haka murugoon waxanad awood ulahayn inaad xakamayso waayo alle masaarin garbahaaga culays aan Tamar taada ahayn hana ku mashquulin naftaada albaab soo xidhmay waa inay ishaadu qabataa albaabada kale furan fursada sii wax kasta cusub wixii horena ilow.

Haka murugoon hadii qof aad aduunkan u jeclayd ku cadeeyo inad agtiisa wax qiimo ah ku lahayn sobobto ah waxu ku baneeyey wadada si aad u aragto qof isaga ka wanagsan oo ka muhiimsan Ilaahay subxaanahu watacaala waxa uu qur'aankiisa ku leeyahay ereyo badan oo dhiirigalin ah sida **لا تحزن, لا تخف, لا تيئس' لا تقنط** (***ha murugoon, ha cabsan, ha rajo dhigin, ha quusan)*** Dhiirigalin iyo ilin tir waxa inoogu filan kitaabka ilaahay oon dib ugu noqono xiliyada adag si ay u qaboojiyan qalbiyadeena dhibaataysan.

Akhriste anigu ma ogi dhibaatada ku haysata balse waxan ogahay in dhibaato kastaa leedahay xal iyo wakhti dhamaad ah hadii mushkilada ku haysata hore u dhamaan waydo haka werwerin waxad naftada u sheegta

in wxii raga uu khayrku ku jiro ama in danbiyo tiro badan lagaga maydhayo oo lagu dib dhigayo xalka mushkiladada.

Maxad Bani'adam ka Rabta?

Sidaan hore kugu sheegba dhibaato marun way ku qabsan donta wanad murugoon donta lakin iska ilaali inaad bani'adamka isku bandhigto oo usheegato cabashadada iyo dhibaatoyinkaga hubaal waxa ah bani'adamku way kaga faa'idaysan doonan dhibtada iyago kugu jees jeesaya adigo moodaya inay garabkaga yihiin ayad arkasa iyago cadowgaga ah waliga qof ha uga sheekayn siday xaaladahagu yihiin haday tahay mid qoyskaga ah iyo mid noloshadaa ahba isku day dhibaatadada inaad adigu xalisato mar walbana ilaahay talo saaro oo garab waydiiso.

Bani'adamku markay xaladahagu hagagsan yihiin waa kuwo ku dhow oo ku jecel farxadada iyo badhaadhahagana way ku farxayaan balse malintay dhibaato ku hesho iyagu maaha kuwii aad hore u taqanay maxa yeelay marka horeba may ahayn saaxiibo sax ah adiguna waa diga is idhi bal la wadag xaladahaga si aad ugu yara nafisto balse waxay ku dhagaysan doonan si xaasidnimo iyo xumaan ku dheehan tahay markay ka tagana waxay kugu xaman doonan waxad si walalnimo ah ugu sheegatay, waxa hubaal ah inay tani tahay dhaqanka bani'adam oo astaanta bani'adamka ayaaba ahayn nusqaan balse miyeyna ka fiicnayn inaad arimahaga u bandhigato ilaahay oo mar walba ku leh

markay xaaladuhu kugu cuslaadan xagayga uso carar ana garabkaga ahe kawaran hadad diidaso albaabkii naftada iyo noloshadu ku badbaadi lahaa ood mar walba dooratid albaabada halaaga.

I Aamin wakhtigan la joogo way yaraatay wax walaltinimo wax iskugu qabanaya naftada nidaamso noloshadana intii macquula qorshayso qadarka ilaahayna ku qanac markay xaalad ku qabsatana dhanka ilaahay wax ku dhaama ma jirte xagiisa u noqo mar walba, culays kasta oo aduunkan yaala wad ka gudbi karta noocu doono ha ahaade hadad la timaado alle ka cabsi dhab ah iyo Samir badan ood mar walba jawaabi ilaahay ka sugto bashar dhanba aad ka maaranto waxad ogaata waxa yar iyo waxa weynba inuu ilaahay bixiyo gacantiisana ay ku jiraan hadaba Aamin rabiga saaxiib dhowna la noqo.

Xili dhamaad ayey leeyihiin dhibaatoyinku

Ma hami baa ku qaadaya isagoo uu yahay Rabigaa Allah murugadu boos miyay ku yeelanasa qalbigaaga? Ma waxad u ogolanasa wajigaga inay ka muuqato murugadu isago oo uu Rabigaga yahay Allah, ilaahay baa wax bixiya waxna manciya una sheega adoomadiisa in murugada laga bixi doono fudaydkuna xigi doono culayskuna uu tagi doono adoonkii allow miyanay kugu filnayn intaasi! Oo anad ku ilaawayn Rabiga khaaliga ah ee murugada iyo farxaduba xagiisa ka sugnaato.

Ogow aduunkan alle jalla wacala wuxu ka yeelay mid dhamaad leh waxa ku dhex sugana way dhamanayaan hadaba ha quusan markasta oo aad murugootana qalbigagu ha xasuuso in Allah yahay midka ugu khayrka badan inta wax bixisa waana mid maqla adoomadiisa markay baryayaan una dhow hadaba niyadada iyo naftadaba u sheeg inay murugadu tagi doonto maalin uu.

Xanuun walba wuu dhamaan balse adigu dulqaadkeeda lahow oo ku Samir oo xamil dhibaatoyinka duunka kasoo maraya naftaada iyo noloshaada ku jal yaqiinta ilaahay rajana niyada ku hay wax walba oo kula soo gudboonadana sida ugu haboon ku aqbal, ogolowna wax walba in qadarka ilaahay ay ku imanyaan kuna dhamaanayan, ha dhaawicin niyadaada hana rajo dhigin adkayso way dhamaanasaye.

Noloshu Maha Dhamays

Ha sugin waliga xaalad isku toosan noloshu waxay ka madhan tahay dhamaystirnaan dhankastod ka eegtana ma jiro ruux leh dabeecadaha iyo dhaqnada aad adigu rabto oo dhan mana jiro qof dhamaystiran adiga iyo iyaga toona, mana jirto xaalad isku toosan iyo qorshe sidii loogu talagalay u fulaya waxad arkaysa waalid ilmahooga kolba school gaynaya kuwo kale oo hadba guri u guuraya waxad arkaysa qof intaaso jeer guursaday

balse aan caruur helin ama ay kala tageen, waxad arkaysa qof markasta shaqo cusub raadinaya, waxad arkasa taajir aad u malayso inuu ku nool yahay nolol ta ugu saraaysa balse aan haysan caruur, xaas wanagsan,caafimad, sobobtuna waxa weyi hadii wax lagu siiyo ha moodin inaad dhamays tahay balse waxba ka maqan oon lagu siinin waana sunada nolosha.

Dhamaan dadku waxay raadinayaan aduun buuxa oon waxba ka maqnayn allena wuxu leeyahay meeshad dhamaystirnanshaha ka helaysan aduunkan maaha ee haku kadsoomina aduunkan, inaguna qasab ayaynu wax ku rabnaa lakin noqon mayso xeerka nolosha ayaa ah ***9*** hadaba soo qalad maaha inaad doonto ***10*** hadad xata is tidhaa ku darso kuma darsan kartid waayo ah ilaahayba uguma talagalin.

Aqbal xiirka nolosha sida ilaahay u qorsheeyeyna ku qanac naftada ka dhig mid qanacsanan badan oo ogolw qaybta Rabi u qayb yeelay.

Muhiim Kuma Ahan Dadku!



Aadmigu sidiisaba hadii aad u muujiso ku tiirsanaan badan iyo baahi ah in Aanad la'aantod noolan Karin way kuu iman doonan markay kuu baahan yihiin wayna kaa tagi doonan markad u baahan tahay, Hadaba waxad ogaata oo aad isbarta inaad kaliga xalisan karto noloshada naftadana bar kalinimada iyo iska wax u qabsiga ogowna waxad ahaan doonta waxad adigu iska dhigto iyo sidaad uga kaaftoonto bani'aadamka una bandhigo baahidaada ilaahay isagu kaa tagi maayo kuna dayici maayo markastood u baahato.

Faa'iidada Murugada

Adoonkii ilaahayow maxaad ka faa'idaysa murugada maalin walba ku haysta ee noloshaadii ubadashay mugdiga ee kaa dheeraysay bulshadad jeclayd ee ka goysay cuntadad ku noolan lahayd maxay faa'iido ku leedahay inaad mar walba murugooto oo walwesho maxad u dugsanasaa murugada maxad ugu kaliyoobasa cidlada maxad dhabanada u haysata mar walba ood hoos ugu eegasa? Hadaba bal ilaahay unoqo oo waxad naftada

waydiisa su'aalahan bal halka faaido eed ku qabto inaad u dulowdo xaalada murugo ee ku haysta?

- ✓ Murugada ku haysa miyay kuso celisay farxadii kaa luntay?
- ✓ Miyay kuso celisay hantidii ka luntay?
- ✓ Miyay kuso noolaysay qofkii kaa dhintay?
- ✓ Miyay ku Aarguday dhagarta kuwii ku dhaawacay ku gaysteen?
- ✓ Miyay kuso celisay caafimadkagii?
- ✓ Miyey noloshada qurxisay?
- ✓ Miyey ku caawisay oo garab ku siisay murugadu mise ka fogaystay wax kasta oo ku fiicna?

Waxaan filayaa intaa midna inaanay kuso celinaynin hadaba maxaad u murugoonasa? maxa yeelay qadarka alle waa mid dhacaya oon baaqanayn warqadaha qadarkuna wa kuwo la kor yeelay amarka allena waa mid dhacaya mar walba murugadu waxba kuma soo kordhinaso noloshaada,waayo waxay kuu diidasa inaad ka faa'idaysato wakhtigaga waana mid ka qarinasa ilayskii kuu muuqan lahaa waxanay ku horsedi karta dib udhac, hadaba ha murugoon maxa yeelay cimrigaaga saxda ah waa kan aad ku qaadato farxadaada iyo xal wanaagaga hadaba maalmahaaga qaaliga ah haku bixin murugo sido kale habeenadadana haku bixin welwel iyo oohin, saacadahagana haku qaadan tiiraanyo hana ku

dhamaysan noloshaada dayac iyo dulinimo hana ku xad gudbin maxa yeelay alle (swt) ma jecla kuwa xad gudba.

Ha murugoon adigo haysta Rabi aad u sheegan karto dhibtaada ama gacmaha u taagan karto kaso ah boqorka boqorada isago waliba ku leh ادعوني استجب لكم ***(I barya waa idin ajiibayaye)*** Ha murugoon adigo akhrin Kara kitaabka alle oo dhibkaaga u sheegan Kara waliba waydisan Kara waxad doonto.

Daawada Murugada



Akhriste I aamin ma jiro qof ka badbaadaya murugo oo aduunkan so maray ama hada ku nool tusaale cad waxa ino ah ***Anbiyadii, Saxaabadii, taabiciintii, shuhaadii, iyo saalixiintii*** dunida tan ah ee manta aynu ku noolnahayna xanuunada ugu badan ee la la tacaalayo waxa u horeeya ***isku-buuqa*** ama sida afka qaladba lagu yidhahdo ***stress*** ka xanuun walba xal ama daawo ayuu ledahay hadaba murugadu miyanay xal ama daawo lahayn waa su'aale? Haa way ledahay daawo sida tan ah waa inaad u qaadat.

1. ***Qur'anka iyo sunada:*** dhib kasta oo aduunkan ka dhaca xalkeeda halka laga helaya waa qur'aanka iyo sunada rasuulka (scw) hadaba waxan ka tilmaamaya dhowr qodob oo aan isleeyahay way ugu muhiimsan yihiin in laga qaato daawo.
    a. ***Caqiiqada islaamiga ah:*** qofka muslimka ahi wuu ka welel iyo welbahaar yar yahay qofka Aan muslimka ahayn sobobtuna waxay taahy kuwan soo socda.

    b. ***Waxay rumaysan yihiin qadarka alle*****:** qofka muslimka ah wax kasta oo ku dhaca waxa uu uqadanaya inay tahay qadar iyo xukun xaga alle ka imiday wax weyna uma arkayo oo wuu ku samraya wakhtigay doonto haku qaadate, halka ay gaalada ku fikiraan marka mushkilad qabsato inay is dilaan oo aduunkaba ay is dhaafiyan.

    c. ***Waxay rumaysan yihiin maalinka qiyaame:*** qofka mu'minka ahi waxa uu rumaysan yahay aduunkuba inu wax yar oo koban yahay sida bananba wax weyn marka la waayo aya la wel-welaa lakin nabigu (scw) waxa uu leeyahay لو كانت الدنيا تعدل عند الله جناح بعوضة ما سقي كافر منها شربة ماء ***(haday aduunyada dhamanted ilaahay agtiisa garab kaneeco ka leegtahay gaal koob biyo***

ah lagama siiyeen) waxa taa la mida inu qofka muslimka ahi rumaysan yahay in aduunkuba qiimo loo wer-wero aanu lahayn sidaa daraded wuxu rumaysnaanaya Aakhiro iyo dhibka yaala taasanu ku dadaalaya.

2. ***Ducada iyo tasbiixda:*** waxay ka midyihiin labadani waxyabaha muruugada yareeya sidaa darted ayu nabiga (scw) leeyahay qofka ku ducaysta ducadan ma asiibi donto murug اللهم اني اعود بك من الهم والحزن والعجز والكسل والبخل والجبن وطلع الدين وغلبة الرجال ***macnaha (ilaahayow waxan ka magan galay welwel, murugo,karti la'an,caajisnimo,darxumo,fulaynimo,dayn kor u kac ah …)***

3. ***Malaha wanagsan:*** waxyaaabaha ugu badan ee lagu daaweyo murugada waxa ka mida malaha aad shay ka filanaso ood wanajiso si aanay saadashu kaga xuman sida darted ayu ilaahay (swt) inoga nahiyey malaha kiisa xun يا ايها الدين اءمنو اجتنبو كثيرا من الظن ان بعض الظن اثمmacnaha ***(dadkii ilaahay rumeeyayow ka dheerada in badan malaha kiisa xun in badan oo malaha ka mid ahi waa danbi).***

4. ***Rajada wanagsan:*** waxa muhiima in Aanad rajo dhigin dhib kasta haday kuso gaadho inaa ogaato culays walba inuu fudayd xigayo, murug walba inay farxad xigaso, saadashuna marun way isbadali doontaye adiga yaan caajis iyo daciifnimo laga arkin waxad dhibta ku haysata ka gudubtaa hadba inta rajo ah ee kugu jirto intay leeg tahay.

Albaabkan Maba Xidhmo




Maxaad dadka uga baahan tahay adigoo arinkaaga iyo arinkooduba uu ahaaday alle jalle wacalaa, maxad uga baahan tahay dadka iyago ah kuwo xidhanaya albaabadooda adigo heli Kara albaabada alle oo mar walba kuu furan, maxad uga baahan tahay guryaha dadka ee xidhan adigo heli Kara guriga ilaahay oo ah masjidka kaasi oo xitaa hadii aad u lugaynasid laguu qorayo ***ajar*** marna lagaga tirtirayo ***danbi***, maxaad uga baahan tahay dadka waxay mulkiyeen oo hanti iyo dhaqaale ah adigo haysta Allaha sareeya ee qaniga ah kaso siiyey dadka waxay haystan adigana ku siin kara marnaba ayna nusqaamayn nimcadiisu, dadku way tagayan balse waxa baaqi ahaan doona ilaahay.

Hadaba marnaba ha baryin qof aad isla tihiin adoon waayo Rabigii isaga siiyay wax walba adiga kuma awoodi waayin balse waxa la eegaya samirkaagu intuu leeg yahay hadaba ku Samir xaalad.

waxa xaqiiqo ah hadad garaacdo albaabka bani'adamka inuu kaa furayo xiligii uu doono ama waxa suuragalba ah inuusan kaba furin balse markad garacdo albaabka Rabigaa lagama yaabo inaad soo noqoto iyadon laga furin laguna siinin waxad rabtay ee ahow qof Aan baryin cid aan ka ahayn alle, dadka waxa ka mida kuwo wax ubixinaya si istusnimo ku jirto oo isleh dadku ha ku arkaan kadibna markay kugu arkaan wixii ay ku siiyen oo aad haysato kugu jeesjeesaya hadaba dadkasi yaaney ku badin ciilka nolosha u taag gacmaha alle weyne.


Ogowna hadii aad ku tidhaa mahadsanid dadka markay wax kusiiyan kadib kuma kordhinayan xata waxa laga yabaaba inanay ku odhan adiga mudan lakin hadii Rabiga aad u mahad celisid wuu ku kordhinaya kuna balaadhinaya waliba barako ayuu kugu darayaa markastoo aad u mahadcelisidna wuu kugu farxayaa ajar iyo fadli dheerad ahna wuxu kugu daryaa diwaankaga ilaahayna in badan ayuu mahadnaqa iyo muhiimadiisa kaga hadlay qur'aanka [**لئن شكرتم لا زيدنكم** | macnaha ***hadad igu shukridaan waan idiin siyaadin doona*** hadaba waa inay kuu kala soocnadan cidda mudan inaad wax waydiisato iyo cidda aan mudnayn.

Baro oo balwad ka dhigo




Haday kaa adkaadan oo ku dulmiyaan oo kugu Dayan gafkooda iyo gardaradooda ka gaabso intaad gunuunici lahayd oo gooni isku tag garab ka dhigo guulaha gabigoodba isaga ka goon waxay gaf ka galeene.

Malmuhu kala wacan mudnanta sii xiliyada habeen badhka ah oo tuko laba rakcadooda kadibna ilaahay la xaajo oo u sheego waxad tabanaso.



Cutubka 9aad Noqo Mahadiye La Mahadiyo



Cutubka 9aad Noqo Mahadiye La Mahadiyo



Waxa aynu nahay bulsho ay ku yar tahay isticmaalka ereyada dabacsan ee ixtiraamka iyo naxariistu ay ku jirto, waxa laga yaaba in aynaan inta badan isticmaalin marka wax wanagsan layno qabto erayada ay ka midka yihiin ***Mahadsanid, Jasakalah,Fadlan,Xayakalaah*** haa ma adeegsano erayadan carabiga iyo soomaliga iskugu jira ilaa in yar mooyane inteena badan ka bulsho ahaan waxan u naqana qofka laga helo astaamahan qof jilicsan, sobobto ah waxan ku nidhahna qofkeena afkiisa naxariistu ka da'aso ***waa side jilaycu is adkee, jiljilayc yaan laga dareemin, nin raga iska dhig,doqon yaan lagu malayn, maskiin hanqon***, iyo kuwo kalo badan erayada aan iskula talino ayaa inaga dhigay bulsho qalafsan oo naxariista iyo dabacsanataba u arkaya doqoniimo, hadaba arinkaasi waa mid qaldan oo u baahan ka hor tag waxayna u muuqata inaynu shaydaanka fursad usiinay howlgalkiisa waayo shaydaanku marku ogaaday muhiimada mahadcelintu leedahay waxa uu dhaar ilaahay ugu maray in uu dadka ka dheeraysiiyo is mahadinta dhexdooda ah

Sida Eebe ku leeyahay ثم لآتينهم من بين ايديهم ومن خلفهم وعن ايمانهم وعن شمائلهم ولا تجد اكثرهم شاكرين ***(waxa uu leeyahay waxan kaga iman doona hareeraha, gadaashoda, dhanka midig iyo dhanka bixidba helina maaysid wax isku mahadnaqaya).***

Aad bay inogu badan tahay caadaysiga mahadcelin la'aantu in qofka xitaa hadad wax wanagsan siiso aanu odhanayn mahadsanid, xata hadad meel uu garan la'aa u tilmaamto ku odhan maayo mahadsanid, hadii qofka wax wanagsan bulshada u qabtay la arko looma quudho mahadsanid waba lasii dhaliila, xata shaqaalaha ku shaqeeya uma quudhid mahadsanid oo waxabad isku dayda inaad culayska isuu siyaadiso ood waxad ku xisaabtanta inay shaqada ay qabanayan tahay waajibadkoda aysan ahayn wax logu mahadceliyo, sido kale xata way kugu adag tahay inad waalidka ugu mahadnaqdo doorka ay noloshaada ku leeyihiin, run ahaanti tani waxay inaga noqotay caado balse waa caqabad aad u weyn oo ina haysata wallow ay jiraan isbadalo badan oo jahligii la dabar gooyey hadana heerki la rabay inaa u dhaqano uma dhawin.

Ilaahay (swt) waxa uu yidhi وقيل من عبادي الشكور ***waxa yar inta adoomahayga kamida ee mahadcelisa*** sido kale nabigena (scw) waxa uu yidhi ***qofkan dadka u mahadnaqin allena uma mahadnaqo*** kaalintaas weyn ayey kaga jirtaa mahadcelintu diintena.

Waxayna ka mid tahay dhaqanka iyo akhlaaqada wanagsan inad dadka ugu mahadceliso wax yar iyo wax weynba sida uu rasuulkenu (scw) yidhi ***(qofka wax wanagsan idiin sameeya abaal mariya hadad weydaan waxad ku abaalisan uduceeya oo dhaha jasakalah).***

Xikmad ayaa waxay tidhaa ***(ahow intad noshay mid uga mahadceliya dadka waxyabaha uu kala kulmo ha ahaadan waxad ugu mahadcelinasa wanaag ama xumaan, wax tagay ama wax joga, qof xun ama qof wanagsan, farxad ama murugo dhamantod mahadcelimahasi waxyabahsi waxay ka dhigayan qofkad manta aad tahay.***

Sido kale xigmad kale ayaa waxay tidhaa ***(dadka mahadcelinta badan had iyo jeer waxay u taagan yihiin inay dhacaan waxyaabo wanagsan maadama ilaahay iyo umadiisuba raali katahay)***

Sidaa darted Ilaahay (swt) waxa uu leeyahay واد تأدن ربكم لئن شكرتم لازيدنكم ولئن كفرتم ان عدابي لشديد ***(Rabigiin waxa uu idin ogaysiinaya hadad ku shukridaan inuu idiin siyaadin doono lakin hadad ku gaalowdan in cadaabkiisu daran yahay).***

Sobobto ay u Burburaan Qoysaskeenu



Ka dib marku shaydaanku ogaaday muhiimada mahadnaqu u ledahay bulshada waxa uu balan ku qaaday sida tan ولا تجد اكثر هم شاكرين waxa uu balan ku qaaday ***(inay yaran doonto inta isku mahadnaqasa oo uu weerar joogto ah ku hayn doono sidii aanay iskugu mahadnaqi lahayn)*** balanqaadkasna wax badan ayuu ku guulaystay waayo ah waxa maalin walba la arkaya qoysas badan oo islaam ah oo burburaya lana garanayn sobobto ka danbaysa runtii shaydaanku guryo badan ayuu ku dumiyay isku mahadcelin la'aan iyo is qadarin la'aan wuxu dhexdoda dhigay malo xun sida darted waxad arkasa ninkii oo dadalaya oo u hagar baxaaya qoyskiisa oo daboolaya baahiyadka gurigiisa oo dhan oon loo mahadcelinayn sido kale waxad arkaysaa xaaskii oo gurigii iyo howshii oo dhan dhabarka u ridatay iyado xaamilo ah oo xanuunsan hadana howsha guriga maamulasa haduu doonno marka uu guriga imaado buuq ayuu ugu daraya halkii ay ahayd inuu u mahadceliyo sida ay culayska badan u xamilaso.

Qadarin la'aantu waxay ka dhigasa qofka mid aan firfircoonayn oon howsha uu hayo ku faraxsanayn sida darted malaha xune qalafsani wuxu sobob u noqonayaa

in midba midka kale u arko inaanu danaynayn oo la kala jeclaynba dhibtiisa iyo dheeftiisa

Taasina waxay horseedasa in mar walba yimaado buuq iyo dood aan dhamaad lahayn kadibna nacayb fara badan ka dhasho arinkaa ugu danbayntana xal ay u arkaan inay kala dheeradan.

Taas waxay muujinasaa qalafsanaanta dhexdeena ka jirta iyo awood badnaanshasha uu shaydaanku inaga awood batay madamu balan ku qaday sidii dhexdena mahadnaqu ugu yaraan lahayd nabigu (scw) waxa u yidhi من لا يشكر الناس لا يشكر الله ***qofkaan dadka u mahdnaqin ilaahayna uma mahadnaqo*** wax badan oo jilayc iyo nacasnimo u haysano ayuu nabigena muxamed (scw) inagula dardaarmayaa isago u faanaya nabigenu wax badan oo raga mantu ay ka xishoodan ayaa wuxu ku yidhi saxaabada قال رسول الله صلي الله عليه وسلم خيركم لاهلي وانا خيركم لاهلي ***aniga idinku khayr badan ehelkiina.***

Inaad qoyskaga u dabacsanato ood caawiso inagu waxan u naqana doqoniimo balse waa raganimo waayo rasuulkuba (scw) gogoshiisa isaga hagajisan jiray kabihiisa isaga tolan jiray sida caa'isha ay warinayso marka Ina ragow maxay tahay raganimada aad sheegaso ee aanad xaaskaga oo xanunsan ku caawin karayn, maxay tahay raganimada aad sheganayso ee aanu haysan nabi muxamed scw maka khayr badan tahay?, maka barako badan tahay? Maya walahi Kama fiicnid kamana

khayr badnide qabka iyo isla waynida shaydanku ku galiyay ayaad ku kasban kari la'dihiin qaysaskiina.

Hadaba si wada jira ayaa laynoga baahan yahay inaan uga tanasulno dhaqanka xun oo ka guulaysano shaydaanka guryaheenana ka ilaashano waxa duminaya Ma ogtahay akhristow hadba sidaad dadka ula dhaqanto inay iyaguna kula dhaqmayaan sidaad u ***ixtiraamto, u sharafto, u jeclaato, u qadariso, inay iyaguna kula dhaqmayaan*** hadad aragto qof dabci wanagsan oo dadku wada jecelyihiin oo meshu joogaba lugu sharfayo laguna ixtiraamayo hala yaabin sobobto ka danbaysa waayo nabigu (scw) waxa uu leeyahay ما من شيء في الميزان اثقل من حسن الخلق ***(ma jirto wax kaga culus xaga misamka dhaqanka wanagsan)*** dhaqanka wanagsan waa astaamihii nabigena (scw) kana filo dadka sidaad ula dhaqanto inay iyaguna kula dhaqmayan.

Hano Qalbiyada Dadka

Akhriste sida ka muuqata magaca cutubka ee ah ***Noqo mahadiye la mahadiyo*** waxa xidhiidh mug iyo miisan lihi ka dhexeeya cinwaankan hada ***Hano Qalbiyada Dadka*** xidhiidhka ka dhexeeyana waxu noqonaya markad dadka kula dhaqanto dhaqan wanagsan kuwa ku wanaajiyana aad uga mahadceliso waxad noqonasa ***Mahadiye*** balse markaad dadka si naxariis iyo dhibirsanani ku jirto aad wax ugu qabato adigon wax abaala iyo dano gaara ka lahayn waxad noqonasa ***la mahadiye*** waka xidhiidhka ka dhaxeeya labada ciwaan.

Waxan si qodobaysan kugu tixayaa qaabkad u hanan lahayd qalbiyada dadka.

1. ***Dhoolocadee:*** ma ahan qof walbo dhoolo cadaynayaa uu yahay qof faraxsan balse dhoolo cadaynta gadasheeda waxa ahaday murugo fara badan, qof walbo qoslayana ma ahan inu ku sugan yahay nolol farxaded qosolka aad maqlaso ama arkasana kaliya wuxa u yahay ilinta codkeda qof walba aamusana ma ahan inu ilowsan yahay dhibatada loo gaystay waayo dhulkuba wuu aamusan yahay balse dhexdiisa waxa ahaaday kumanaan kun oo holac ah iyo dhibaato ah.

Waxa jira dad hadii la khiyaamo iska aamusa oo qariya khiyaanada iyo dhibta lagu sameeyay halkii ay ka ooyi la haayena dhoolo cadeya oo noloshoda hore usii wata oon

is dhiibin, sido kale waxa jira dad hadii lagu gafo ama la khiyaano meshii ay ahayd inay cashar ka qataan dhibta lagu sameeyayna badalkeda la yimaadan oo Aargosta ama noqda kuwo qalbi jabay noloshoduna sidaa darted u burburto.

Balse ma ogtahay in suubanahena muxamed (scw) yidhi عن ابي در رضي الله عنه قال: لا تحقر من المعروف شيئا ولو ان تلقي اخاك بوجه طلق ***(ha quusan oo ha yaraysan samo falka iyo wanaga wax ka mida waa walalka oo aad waji furnaan kula kulantid)*** Waji furnaanta iyo dabeecad wanaagu waxay ahaayen akhlaaqdii nabiga (scw).

Dhoolocadaynta iyo waji furnaanta waxay ka mid yihiin waxyabaha manta sida khaaska ah loo daraaseyo laguna qaato kuliyado qaasa ama loo qabto kulano lagaga hadlayo nolosha abwaanba waxa laga hayey intaan

U dhoolocadee khalqiya
Dhawaysana kii ku neceb
Ha dhaawicin ruux ku jecel
Dhagtaduna yey mid noqon
Dhagaysata kali xumaan

2. ***Hadalka dabacsan:*** ilaahay subxanahu watacaala waxa uu u diray nabi muse (cs) fircoon oo ahaa qof aduunkan soo mara kii ugu xumaa waxana lagu yidhi muse iyo haarunow (oo ahaa laba nabi oo walaalo

ah) فقولاً قولا لينا لعله يتدكر او يخشي ***(muuse iyo haarunow waxad ku tidhahdan fircoon hadal dabacsan waxa laga yaaba inuu waantoobo ama alle ka cabsado'e)*** sido kale xadiis ay bukhaari iyo muslinba ka wareyeen nabi muxamed (scw) ayaa ah والكلم طيب صدقه ***(kalmada wanagsan waa sadaqo)*** Marka aad qof la kulantid waa in aad salaantid waayo salaantu geedahayba ku wajibtay qofna maxad u malayn?

Nabiguna sir ayuu ino shegay aan isku jeclaanano [ولدي نفسي بيده لا تدخل الجنة حتي تؤمنو, ولا تؤمنو حتي تحابوا, اولا ادلكم علي شيء ادا فعلتموه تحابيتم ؟ افشو السلم بينكم] ***(waxan ku dhaaranaya allaha naftaydu gacantiisa ku jirto gali maysaan janada ilaa rumayn dhaba laydinka helo rumayntiinuna dhab ahaan mayso ilaa aad is jeclaatan, ma idiin sheega wax hadad samaysaan aad isku jeclaanasan faafiya salaanta dhexdiina)*** taasina waa sir nabigenu ina siiyay inaad dhaqan galinasa ay fican tahay.

Akhriste waad arkasa heerka ay diintenu ka istaagtay faafinta salaanta iyo wanaajinta hadalada dhexdeena hadaba ku dhaqan dabeecadan iyo sunadan ka ahaatay subanahena muxamed (scw) si aad u hanatid qalbiyo aad u qurux badan una liibantid aduun iyo aakhiraba.

3. ***Tixgali Dadka:*** Ma ogtahay akhriste sida aad naftaada ula jeceshahay in lagu qadariyo, lagu sharfo, laguna maamuso, halkad joogtaba laga

jeclaado, magacaga iyo mansabkagaba lagu ilaaliyo in dadka kalena sidad adiguba u jeceshahay iyaguna ay u jecelyihiin, hadaba dadka qadari oo u mahadceli qof walbana kula dhaqan dhaqan wanagsan ugu danbaynta adigana way ku ixtiraami donaan kuna qadarin donan.
Ha sugin dhaqan anad dadka kula dhaqmin inay iyagu kugula dhaqmaan wax aduunkan la hantiyo ama la beerto dadba ugu fiicane tabco bulsho.

Noqo Same Falle Wanaqsan

Samo fal waa howl ama fal aan laga sugayn inay kaso noqoto faa'ido aduun iyo dhaqaale ah waliba aad u qabanaso howsha si isxilqaan ah oo anay jirin cid ama cadaadis kugu xiiraya inaad howsha qabato adiga is diraya howshasna maxsuul ama abaal qofna kama sugasid aan ka ahayn xaga ilaahay, sido kale waa hurid iyo sifo aan huwanayn naf jeclaysi, waana waxqabad uu qofku bulshadiisa ugu qabanayo si naxariis iyo bani'adanimo ku jirto isagon howsha u qabanayn ha lagu amaano, ha lagu abaal mariyo, halagu ogaado inaad tahay same fale iwm, balse u u qabanayo kaliya dadkaaga caawi Allana agtiisa ajar iyo xasanaad ka shaqayso abaalmarinta aduuna uu ka doorbidayo ta aakhiro oo ah jano.

Maxa Samo Fal Noqon Kara?

Waxan qodobeeyey intii ilaahay inogu shegay samafal inago xaqa iyo xaqiiqada ku salaynana isla markaana diirada saarana inta alle iyo rasuulkiisuba scw sheegen.

- ✓ Dhisida masaajidada
- ✓ Dhisida goobo waxbarasho
- ✓ Dhisida madarasadaha qur'aanka ama malcaamadaha
- ✓ Dhisida goobo caafimaad
- ✓ Dhisida ceelasha biyaha, dhaamamka, barkadaha
- ✓ Waxtarka iyo dhaqaalaynta agoomaha iyo masaakinta
- ✓ Wacyigalinta iyo ka qayb qaadashada xalinta khilaafadka qoysaska
- ✓ Soo jeedinta muxadaroyin wacdiga ah sida farista wanaaga iyo reebista xumaanta
- ✓ Ilaalinta deeganka iyo dhowrista fayodhowrka
- ✓ Aasasida maktabado wax lagu akhristo

Faa'idooyinka Samo Falka

- ✓ Raaligalinta Eebe (swt) iyo abaalmarin aduun iyo aakhiraba ah

- ✓ Rabigaa ayaad u dhawaanasa hadad rabigaa u dhawaatana alle waku jeclaanayaa hadu alle ku jeclaadana dadka ayaa ku jeclaanaya hadii dadku ay ku jeclaadana waxad noqonasaa ***la mahadiye***.

- ✓ Badhaadho iyo sacaado nololeed ayaad helasaa nooloshadana wayku qurux badnanasa
- ✓ Helista bulsho horumarsan oo isku duuban.
- ✓ Buuxinta arimaha/ kaalmada ah ee ay dowladu ka gaabiso.
- ✓ Waxtarka qaybaha nugul ee bulshada sida barakacayasha, agoonta, fuqarada, iwm
- ✓ Kaso kabashada musiibyinka dabiiciga ah
- ✓ Helitaanka dad muxsiniin ah oo ku tabaruca hantidooda si loo fuliyo adeegyada ka dhiman bulshada iyo deeganka
- ✓ In la helo dad ku shaqeeya iskaa wax u qabso oo waktigoda u hura horumarka iyo koboca bulshad.
- ✓ Waxa la helayaa bulsho qalbiga ka caafimad qabta oo kalsooni iyo qanaaco leh
- ✓ Ma jirayso wax musuqmaasuq la yidhaa ka dib marka bulshada laga haqab tiro baahiyaheeda
- ✓ Waxa la helayaa bulsho ka caafimad qabta tuugo, iyo talo xumo.

Wax Anad Ka Helayn Dadka Kale iga Hoo!

Naftu waxay u baahan tahay in la hago oo lagu saacido siday aduun iyo Aakhiraba u liibaani lahayd soomalidu waxay tidhaa (***qof wax ku siiya wad heshaa balse qof talo ku siiya maheshid)*** way yartahay inta qof ee ku odhanasa waxan same oo taladan qaado way ku anfacasaye hadii la helana inta qaadanasa ayaa yar.

Hadaba waliga ha tagin halka ay ku kaxaynaso wadadu balse waa inaad tagta halka aan laga helin wado si aad adigu usamaysato wado isbar inaad kaliga wax qabsan karto kana tag saamayn badan si ay kugu xasuustan dadku, haku qasbin dadka inay ku jeclaadan balse naftaada ka yeel mid ku qasabta inay dadku jecladaan.


intaad nooshay ha u noqon garsoore kuwa murmaya balse noqo mid maslaxeeya, hana ku dagdagin inaad dadka ku xukuntid muuqalkoda adigon baran, mar walbana joogtee inaad raaligaliso dadkad ku qaldantay cafintana badi, ha noqon kabo lagu socde noqo cagtii ku socon lahayd kabaha, ha noqon qof dulaysta naftiisa si uu u xayaysiiyo dadka kale waxqabadkooda, ha nooqn qof dagdag badan oo ka shaleeya talaabada uu qaadayo balse noqo qof fiiro dheer oo meel fog wax ka arka, iska ilow dhacdooyinka qaar balse qaado casharaday ku bareen, noqo qof marwalba qalbigiisa nadiifiya oo ku

nadiifiya cafiska, la how tanaasul marka ay ku haboon tahay, yeelo hami aad u sareeya oo ka mashquul dantada, Ha noqon maqane aan la tabin balse ahow muddane sharfan, ha maqlin hadal kasta oo lagu yidhaa hana Aaminin wax kasta ood maqasho balse aamin waxad aragto, noqo qof wax badan dhagaysta si aad wax badan u barato, ha noqon dhinte aan la tabin balse noqo marxuum ku dhexnool qalbiyada dadka.

Mudane Wanaqsan Ka Noqo Ilaahay Aqtiisa

Dhamaanten waxan nahay bani'aadam waxa dhici Kara oo inasoo Mari Kara xaalado kale duwan oo dhibaatooyin iyo dheefba leh hadaba marxalad kasta oo kusoo Marta mahadnaqeeda waxa leh ilaahay munaasib maaha inaad maamusto oo sharfto bani'aadam caawimaad kusiiyey wallow ay mudan tahay inaad u mahadceliso oo sharfto qofka ku caawiyey hadana maaha inaad ka badbadiso adigoo isleh waji ka diyaarso qofka oo wanagu kuu sameeyay mid ka badan u qabo hadaba taasi waxay ku horseedasa in lagu arko qof istus

ah ama bilaa caqliya hadaba waxa mudan inaad ilaahay waji ka diyaarsato yacnii aad garowsato caawin kasto oo bani'aadam kuu qabto in anay kugu filnayn balse hadii ilaahay ku gacan qabto aad aflaxaso taa waxa la macno ah inaad u ogaato ilaahay nimcoyinka uu ku siiyay ood mar walba u mahadisceliso.



Cutubka 10aad Farxadu waa Gundhiga Nolosha

Cutubka 10aad Farxadu waa Gundhiga Nolosha



Farxadu waa eray af soomali ah inta badana qeexitaankiisa waa lagu kala duwanyahay waayo qof walba sibu farxad u yaqaana oo waxa jiro wax adi ku farxad galinaya oo midkale murug galinaya, balse hadaan eegno dadka bartay cilmu nafsiga waxay ka yidhaahden ama ku qeexen macnaha farxada.

Waxay yidhahden guud ahaan farxadu waa dareen ka yimaada maskaxda taasi oo astaan u ah fiicni

iyo wanaag isla markaana uu qofku dareemayo qanacsanaan uu ku qanacsanyahay waxa uu haysto ama xaalada uu ku suganyahay.

Farxadu waa iftiin ka baxa qalbiyada kalsoonida badan iyo wajiyada daacadnimadu ay ku dheehantahay.

Farxadu waa dareenka aad dareento markaad xaqiiqsato in waxkastaaba ay kuu yihiin sidii aad rajaynasay.

Farxadu maaha kaliya ***qosol,dhoolo cadayn,muusow***, iyo wax lamida waxase la odhan karaa waa qaybo ka mida farxada farxadu way ka balaadhantahay intaas wayna ka xeel dheertahay kana qiiimo badan tahay, qasabna maaha inay wajigaaga ka muuqato ama muuqalkaaga dibada laga arko.

Farxada maaha shactiro ama xaraabaysi kooban oo aad meel kuwada qaadaten qaar kamida asxaabtaada, mana aha riwaayado ama majaajiloyin qosol badan oo aad daawatay dabeetana aad ilmaysay sidaad u qoslasay, waxas waa wakhti kooban oo tirsan dibna u soo laabanaynin balse farxada dhabta ah een ka hadlayaa maaha taa, Farxadu waa marka aad hesho degenaanshiyo iyo xasilooni dhamaystiran ee aad fuliso raaligalinta ilaahay iyo raacida awaamiirtiisa kuna qanacdo waxa alle ku siiyay kana kaaftoonto waxa qayrka haysto kadib ayuu ilaahayna damaanad qaadayaa noloshaada wax ku dhibayana arki maysid.

Farxadu waa marka aad bulshadad ku dhex nooshay ugu nooshahay si bilaa fadeexada ah isla markana aad dareemaso dhowrsonan iyo lab furnaan iyo kalsooni dhamaystiran.

Halkee Laga Helaa Farxada Dhabta ah

Waxan wada ogsoonahay in aduunkan manta waxa ugu badan ee laga hadlaa ay tahay sidii loo heli lahaa nolol Dagan oo bilaa buuqa, waxan wada ognahay malaayiin qof oo dunida dacaladeeda ku nool inay u dhinteen fahan la'aan nololeed waxayna xalin kari wayeen mushkiladaha nolosha lakin waxan shaki ku jirin in dad badan ay ku wareersan yihiin halkii ay ka heli lahaayen farxada oo ay gafsan yihiin wadadii loo marayay ilaa inyar oo ilaahay waafajiyay maahane.

waxa suuragala inu qofku helo wadadii hadana uu ka leexdo isaga oo naftiisa ku qancinaya inanay ahayn mid saxan fikir ahaana dad badan waxay Aaminsanyihiin in farxadu ku jirto kaliya markaad haysato hanti aad u tiro badan iyo shaqo wanagsan waxaynu ku fikirnaa hadii nolosheena heerka ay gaadho inaynu ka xoroobi lahayn baahiyaha aduunkan yaala ama aynu ka kaftoomi lahayn dadka kale balse sidan wax u fahan saahay maaha oo

qalad ayeynu iska dhaadhicinay hadaba waxa su'aal ah halkeen ka helayna farxad dhabta ah?

Ma waxa laga helaa farxada kuwa aan jecelnahay oon la joogno? Ma waxa Ina siin Kara farxad kuwa inaga maqan imaanshiyahooda? Ma waxay farxadenu ku xidhantahay inaan ka tagno halka aan ku noolnahay oon u tahriibno ama u dhoofno wadano shisheeye? Farxada ma waxa Ina siin Kara oo inaga qaadi Kara dadka sida Ma waxan farxadeena ka suganaa dadka magaca iyo maamuuska leh oo hadii ayna sharfaana miyaan faraxnaa hadii ay Ina yasaana miyaan murugoona?.

Akhriste ogow hadii qof, qoys iyo dhamaan dadkuba ay ku wada kulmaan sidii ay kuu farxad galin lahaayeen macquul ma noqon karto kumana siin karaan farxad muhiimadu waa in aynu qalbiyadeena ku xidhnaa allaha Khaaliqa ah ee qaniga ah, Bixiyaha deeqaha balaadhan, Qaboojiyaha qalbiyada holocaya, Kaafiyaha kurboyinka fayda.

Ogow walaal waxa jira qof hanti lagu manaystay hadana aan haysan farxad sido kale waxa jira qof walaal iyo waalid hareero joogan kana helaya hiil iyo hoo hadana aan haysan farxad, qof waxa jira aqoonyahana oo laga yaabo inuu haysto darajaad aad u sareeya kana gaadhay nolosha guulo lataaban karo hadana aan haysan farxad, waxa kale oon iyana meesha ka madhnayn qof ku nool qasri aad u quruxbadan oo ku yaala qaarad ka mida qaaradaha dunida laguna tilmaamo kuwooga ugu

horumarsan hadana ku leh waan nacay nolosha oo inaan dhinto ayaa ii roon bal is weydii sobobto ay waxan u dhacyaan ee farxada loo la'yahay?.

Ogow walaal dhalanteedka iyo dhaldhalaalka aduunku maaha farxad lacagtuna maaha farxad, farxaduna maaha lacag, hadaba farxada meel kale haka raadin hareerahagay taalaaye, mana ahan mid aad safar dheer ugalayso, mana ahan mid aad malaayiin dolar ku kharashgaraynaso, mana ahan mid kaga baahan boqolaal sano inaad raadiso.

Akhriste habada waxaan kula wadaagaya ***12 sirood*** oo ah siraha farxada iyo meelo badan oo Aanad isla hayn faraxad ayaad ka helasaa balse ay tahay inaad ka baadi goobto meelahas, hadaba raac tilmaamahan hoose oon kugu sheegi doono meelaha ay farxadu ku jirto

Siraha Farxada

- ✓ ***Akhrinta Qur'aanka Kariinmka ah:*** kitaabku waa kaabaha nolosha waayo waa kaamil oo malaha wax nusqaana, waa kurbo fayde oo waxa uu faydaa kurbada, waxanad ka maarmasaa Aadanaha waxanad ku gaadhasa guul iyo garab Rabi jalla wacala sirta ugu wayn ee farxadu waa akhrinta qur'aanka kariimka ah balse lakin kuma xidhna inaad wada taqaanid ***30ka jis*** ee qur'aanka ah lakin waxan ku odhanayaa waxa kuu muhiima inaad joogtayso

akhrinta hab yar oo fududna aan kugu daro ood ku qaybaso qur'anko dhanba salad walba gadaasheda akhriso ***4 safxadood/ page*** bishii waxad ***dhamaynasaa 4 jeer 30ka*** jisba.

Bal qiyaas inta ajar ee aad ku helaso akhrinta kalaamka ilaahay nabigu (scw) wuxu ino shegay in halkii xarafba u dhigma ***10 ajar*** qur'aankuna wuxu ka kooban yahay ***320015*** xaraf oo min ***10 ajar ah*** imisa ajar ayaad bishii helasa bay kula tahay waa cadad aan la xisaabi Karin hadaba diintenu waa nasteexo talaabo kasta oo aad qaado ajar ayay kugu siinaysa noloshada waxay noqonasa mid murugo ay ka dheertahay hadaba waa su'aale adigo ajarka inta leeg ilaahay agtiisa ka shaqaystay miyay murugo ku qabanasa? Oo bilaa farxad dareemaya waa maya jawabtuye halka aan ka raadinano farxada ayaa ah meel qaldan oo anay farxadiba oolin.

- ***Digriga Badso*****:** Ilaahay jalla wacalaa waxa uu leeyahay فادكروني اذكركم واشكرولي ولا تكفرون ***(Ixusa Aan idin xusee iguna mahadiya hana iga gaaloobina) 13 aayadod*** oo ay ku kala jira ***11 suuradod*** oo qur'aanka kamida ayuu ilaahay ku shegay fadliga digriga sido kale ***114 ka suuradod*** ee qur'aanku ka koobanyahay ***7 kamida*** ayuu ilaahay (swt) ku bilaabay ***(tasbiix سبحان الله) 5 ka midana (xamdalada الحمد)*** sido kale cadadka qur'anku ka kooban yahay ee ah ***114 suuradod 47 ka mida*** waxa

ku jira ***Tasbiix*** waxa intaso meelod digriga loogu sheegaya waa baraarujin iyo xasuusin inuu muhiim ino yahay guud ahaan anigon kala qaadayn digriga balse qaar ayuu nabigu si gaara nogu tillmaamay sida ***istiqfarta, tasbiixda iyo saliga nabiga scw*** waa ku muhiim intii alle ku baray inaad ku barido carabkaguna laasimo si noloshadu u noqoto mid xumaan iyo xasad ka madhan.

- ✓ ***Ilaali Shanta Salaadod:*** Ilaahay subxanahu watacaala waxa uu yidhi حافطو علي الصلوات والصلاة وسطي وقومو لله قانتين ***(ogaada oo tukada salaadaha gaar ahaan salaada dhexe iskuna taaga ilaahay idinku khusuucsan)*** waa qali in la ilaaliyo salaada waxana cadaynaya salaada waxa laga soo waajibiyey ***Todobada Samood korkooda*** waana waxa kaliya ee u dhaxeeya adoonka iyo Rabigiisa.

suubanaheena muxamed (scw) waxu ahaa mid u dardaarma daqiiqadihiisii nolosha aduunyo ugu danbaysay tukashada salaada iyo Baraarujinteeda, wuxu ahaa nabigu (scw) isagoo sakaraadkii hayo hadana wuxu

dalbanayey in salaada uu jamacada la tukado ilaa uu ka miyir dorsomo oo uu istaaga xajin kari waayey Sidaas ayuu u ilaalin jiray nabigu scw salaada heer waxay ka gaadheen saxaabadu haday u baahdaan milix ***[cusbo]*** ama shay la mida ay ka bilaabi jireen laba rakcadod oo salaad ah ooy ku waydisanayan rabigood inuu uga sahlo waxay uga baahan yihiin dadka kale, taasi waxay cadaynasaa in farxada laga helo salaada liibanta kaliyee aduunkan taalana ay tahay salaada, Ku darso waliba salaadu waa waxa ugu horeeya ee uu ilaahay kaa xisaabin doono maalinta qiyaame marka ehlu naarku ay naarta ay galaan waxa la waydiin su'aalo ay ka mid yihi ***ماسلككم في سقر * قالو لم نك من المصلين*** ***maxa naarta saqara idin galiyey*** waxay ku jawabeen ***maanu ahayn kuwo tukada*** bal qiyaas waxa jira danbiyo ka waaweyn oo naartay ay ku muteen balse waxay so horaysiiyen in anay ahayn kuwo salad tukada.

Hadaba adigo Muslim ah oo ay kugu waajib tahay tukashada salaadu miyaad I odhan noloshaydu waa mid murugo iyo cidhiidhi badan hadana adigu anad ahayn qof xaga alle ujeesta markay arin ku cuslaato? Tuko oo alle u towbad keen ilaahayna ka sug taakulayn aan Tamar yarayn.

- ✓ ***Aqbal Qaab Abuurkaga:*** Tani waa dhibaatada ugu weyn ee badankenu aynu xalka u waynay inagana qaadatay farxadenii maxan sidaa u leeyahay waxan kawada waxan ku qanci waynay alle sidu ino

abuuray waxan dooranay oo raacnay farsamo gaal oo wakhtigeenii iyo hamigeeniba waxan galinay sidaan iskug eekaysiin lahayn muqaal aan shaashad ka aragnay taso inaga mashqulisay saladii iyo dhamaan waajidakii ilaahay ina saaray oo dhan makula tahay qof ilaahay ku qanacsanan waayay inu qanaaco iyo farxad ku halayo noloshiisa walahi waa maya iskada qanacsanane wuxu gaadhaya heer uu naco nolosha oo uu shalayto ku noolado.

Ogsonow naftada oo aad ku qanacdo waxay ku horseedasa inad nolosha alle ku siiyay aad raali ku noqoto kuna xamdido waxa qayrka haysatana anad dan ka yeelan waxan hadalkayga kugu cadaynaya kalaamka alle ku leeyahay qur'aanka dhexdiisa oo xaqiijin dhaba u noqonaya qaabka alle ku abuuray ay tahay mid aad adigu kali u ledahay **لقد خلقنا الانسان في احسن تقويم** ***(dhab ahaantii waxan u abuurnay bani'adamka suurad wanagsan)*** haa sida alle ku shegay weeyi ee Aamin oo rumayso inaysan jirin wax foolxumo la yidhahdo balse ay kaliya tahay aragtida bani'adamka sobobto ah waxa jira wax adiga kula qurxoon balse ani ila foolxun sidaa waxa la mida hadii qaabka uu ilaahay ku abuuray ay qof la foolxumaato

yacni isago qofkasi kugu dhaliilaya ***midabkaga, cabirkaga, hadalkaga, timihaga, socodkaga, aqoontada, danta iyo waayahaga nololeed*** intasi iyo kuwo kalo badanba waxay ka mid yihiin tilmaamaha ugu

dhow dhow ee ay dadku kaa eegayan hadaba ku qanacsanow naftaada hadad tahay ***qof qurxoon, foolxun***, ama ***iimo leh*** ku qanac waayo alle subxanahu watacala ayaa sidan ku abuuray waxa alle la quruxbadan Aadmiga hadu la qurux badnan waayo haku mashquulin naftana ku kalsoonow oo dheh ***Alxamdulilah*** waayo kuwo badan ayaan haysanba suuradan qurxoon ku mahadi oo garo qiimaha naftada.

- ✓ ***Ha Is Barbar Dhigin Dadka*****:** Qofku waxa uu leeyahay haybad u gaara ma jiro qof ku dhigma adiga waayo waxa dunida lagu keenay adigu inaad is ahaato oo kaliya una guulaysato sidaad u samaysan tahay laguma odhan u eekow cidd kale balse waxa lagu yidhi adigu is ahow, hana u eekaysiin naftaada qof kale, hana barbar dhigin naftada qof kale waayo ma ogtahay markad naftaada barbar dhigto qof kale inaad meel uga dhacaso qiimihii naftaada waxanad xayaysiinasaa qof kale, waxanad yasasa haybadaadii Rabi subxanahu watacala ku siiyay Ma ogtahay markad isbarbar dhigaso qof kale inay daciifaso qanacsanantadii ka digtonow waxa faraxada kaa qaadaya eed adigu sobobto u tahay.

- ✓ ***Ha Isku Dayin Inaad Dadka Raaligaliso:*** Mushkilada ugu weyni waxay tahay inteena badan waxaynu doona in dadka oo dhani raali inaga wada noqdaan midaasna waligeed ma dhicin mana dhici doonto! Waa waxan suuragal ahayn waayo waligeed

lama sheegin qof dadka oo dhani isku wada raacen ama wada jelaaden ama wada necebadeen maadama ay xaqiiqada dhabta ahi sidaa tahay maxad iskugu murjinasaa odhaahyada dadka iyo falcelitooda,Waxa jirta oon ku sheegaya odhaah can noqotay oo laga hayay ***imaamu-shaafici raximahul laah*** oo ahay ***رضا الناس غاية لا تدرك ابدا (raaligalinta dadku waa u jeedo aan waligeed lagaadhayn)*** waxan uga socdaa cida kaliyee raaligalin kaga baahan waa Allah hadad alle raaligaliso way ku dhantahay ta dadka waxba kama galin.

- ✓ ***La Tartan Naftaada:*** Aduunku waa tartan dhinac kastod nolosha ka eegto waxad arkasa noloshii oo u baahan halgan dhamaystiran hadaba uma baahnid inaad la tartanto dadka si aad u gaadho hadafkaga ee waxad u baahan tahay inaad la tartanto naftada si aad ugu guulaysato weerarka naftadu ay kugula jirto ogow sanadkii laso dhaafay sidaad ahayd inaad ka fiicnan doonto hadad la tartanto naftada.

- ✓ ***Dhoolacadee:*** Dhoolacadayntu waxa la yidhaa marka si cilmiyaysan loo qeexo waa hub fudud balse culays badan oo aad u adeegsan karto cadowgaga kuna khalkhal galin karto dadka ka xun noloshada iyago mar walba iska waydiin doona waxa noloshada farxada u badalay si kale hadaan u Egnana xadiis

ayaa ahaa تبسمك **وجه اخيك صدقه** ***(inaad walalka u dhoolacadaysa waa sadaqo)*** Waa suurtogal qofku inanu malin walba farxad dareemin sidaas ay tahayna dadka mar walba dhoolocadeeya waa kuwo ka fog murugada maxa yeelay waxyabaha yar yar ee noloshooda ka mashquulinaya iskuma dhibaanba adna sidasa laga raba si ay noloshadu u noqoto mid farxad badan.

- ✓ ***Ka Fogow Dadka Dhanka Xun U fikira:*** Dadku isku fikir maaha isku garasho iyo garaadna mahaa qofba sibu ilaahay u abuuray noloshuna uma baahna adayg hadaba hadad la saaxiibto ama taladooda dhagaysato dadka sida xun u fikira ee nolosha isku adkeeya waxad noqonasa sida ay iyagu yihiin, culays kasta oo jira waa laysku dayaa waliga lama niyad jabo dadaal iyo gargarka ilaahay ayaa garab laga dhigta lakin dadkasi kaliya waxay aqoon buuxda u leeyihiin sida qalbiyada argagaxa logu abuuro loona niyad jabiyo Run ahaantii hadad la qabsatid si xun u fikirka waxa suurogal ah inad waxbadan oo hamigaga ahaa taa darted u waydo sidad kolba isku ledahay hadad talaabada qaado armad fashilanta, ku guuldaraysata, dadku ku yidhahdan waxyaabo aan munasib kugu ahayn iwm Lakin ogow alle ma abuurin shay gabi ahantiisba wada xun ka fiiri labada dhinacba dhinac haday ku noqon waydo ha niyad jabin dhanka kale u wareeg oo tijaabi.

Suubanahena muxamed (scw) aya waxa utagay Nin saxaabadiisa ka mida oo xanuunsan markasu ku yidhi nabigu انشاء الله طهورا ***(inshalah dahuur iyo danbi dhaaf alle hakaga dhigo)*** markasu ninkii ku yidhi nabiga (scw) maya nabi allow tani duhuur Mahan, danbi dhaafna Mahan, tani waxay igaynasa godka isago ula jeeda xanuunkan waa kii aan ku firaaqayn laha aduunkan, wuxu ku yidhi nabiguna scw waa yahay sidaa aad sheegtay ayay ku ahaanasa madaama aad adigu Aaminsantahay in xanuunkan aanu ahayn danbi dhaaf iyo dahuuro balse uu yahay midkad ku dhiman lahayd sidas ayaa ku ahatay sidiibanu ku dhintay.

Tani waxay cadayn buuxda u tahy in malaheeno wanagsanada aynu ku heli karno ididiilo iyo rajo wanagsan oo dhanka nolosheena ah.

- ✓ ***Shaqayso:*** shaqadu waa furaha farxada waxa laga yaabaa inaad ila yaabto mar kaan ku leeyahay shaqayso balse waxan u malaynayaa inaad iga filaysay inaan ku idhaa iska fadhi oo raaxayso aduunku waa raaxo'e, hadaba mid ogow raaxada badan maaha mid lagu helo farxad balse raaxada badan waa mid keento caajisnimo, caajisnimaduna waa Aabaha murugada, walbahaarka iyo mural jabka, intaasna laguma gaadho farxad,Farxada dhabta ahi waxay timaada qofku marka uu ka dhabeeyo hadaf ka mida ahdaaftiisa nolosha hadaba shaqayso oo adigu abuuro farxada noloshada.

- ***Cafi Dadka:*** mowduucan hore ayaan uga soo hadlay balse waxa mar labaad igu so celiyay waa muhiimada iyo ahmiyada uu ino leeyahay cafisku maadama aan ku dhexjirno meelaha farxada laga heli karo tana waa wadada ugu muhiimsan eed farxad ku dareemi lahayd intena badan waxaynu dhabarka ku sidana oo aynaan doonayn inaynu ilowno xumano hore oo laynagu sameeyay oo qofkii inagu sameeyeyba iska ilaaway waxaynu leenahay haa kani waa ***hebel/heblaayo*** lama hadlayo waligay, mana cafinaayo, mana salaamayo iwm adigo sobobto ugu weyna ka dhiganaya inuu danbi aad u weyn ka galay oo uu ku xumeeyay hadaba isheeg sobobta anad u cafinayn adigo adiguba galaya khaladaad aad u badan waliba ka galaya khaaliqa ku abuuray ka dibna cafis weydiisanaya adigo rajaynay in alle ka cafiyo waliba si bilaa ciqaaba hadad doonto ku noqonaya khaladkagi marar badan cafiskii hore ka dib, Qalbigaaga nadiifi oo ka dhig mid deeqsiya oo qaada dhamaan dadka oo dhan si aad u noqotid mid faraxsan oo noloshiisa mugdiga ka saara oo cafi dadka alle haku cafiyee.

- ***Caawi Masaakinta:*** caawinta dadka kale waxa laga helaa farxad iyo qaninimo qofba qofka uu ka waxbixin badan yahay ayuu ka farxad badan yahay sida diinteenuba ino sheegtay, caawimaadu kaliya maha wax bixin balse waxay noqon karta talo bixin,

ama deeq bixin hadba kii laga dalbado marka kadibna waxad dareemasa farxda aad u badan ilaahay agtiisana waxad dhigatay amaah lagu gudi doono maalinka aakhiro taasina haka welwelin alle jalle wacala ayaa hore inagu shegay وان تقرضو قرضا حسنا يضعفه لكم ويغفر لكم والله شكور حليم ***(hadaad Eebe amaah fican Amaahisanataan waa idin libin laabi doona Eebana waa kan la mahadiyo)*** sida rasuulkenu (scw) shegay waa inay ahaata waxad bixinaso wax dadka ka qarsoon oo adiga iyo ilaahay uun idinka dhaxaysa.

Farxadu waa Qanaacada Nafta

Farxadu waxay ku xidhan tahay hadba xiliga iyo xaalada aad ku jirto tusaale ahaan waxad yarantadii farxad u arki jirtay manta farxad iyo wax u dhow toona uma arkasid laga yaababa in markad xasuusato aad isku qososho ama isla yaabto taasi waxay cadayn buuxda u tahay farxadu in anay ahayn wax ku xidhan shay ama xaalad joogto ah marba marka ka danbaysa ee da'daada iyo caqligagu koraba waxyaabo gaara ayaa ku farxad galinaya taana waxa keena qanaacada qofka.



Siday farxada iyo qanacadu iskugu xidhan yihiin waxa ka mida markad yar tahay waxa qanaacadadu tahay inaad hesho waxa ciyaalka yar yar ee kula faca ahi

haystan hadii wax ka mida lagu keenana waad farxasa isla markaan waad ku qancasa waayo doonistada ugu weyn ayaa ahayd lakin hadii adiga oo weynaaday lagu keeno waxyaabihii yarantadii ka farxin jiray kuma farxasid xata waxa laga yaba qofka waxa ku keenay inad la dagasho waayo doonistadu waxan yar way ka weyn tahay kumana farxad galinayo waxa hadba inaga maqan hadan qanaceena dul saarno waxan waayana farxadenii nololeed hadaba si aynaan u waayin farxadeena nololeed xalkan ku dabaq noloshada.

- ✓ ***La how Qanaaco Joogto ah***: waxan kawada hadii qanaacadadu ay ku xidhnaato kolba wixii cusub waxa hubaala inad waayaso farxadada waayo waxa dhacdo ah inad heli weydo wax aad si weyn u jeclaatay naftadana ku qancisay hadii aad waxa hesho inaad farxaso markad iskala garan weydo ee aad hareeraha eegto ee wixii aad doonasay weydo farxadu kaa lunto oo aad mrugoto waa inaad dib uso firisaa waxad haysato waxad ogaan doonta waxad haysata inay ka badan yihiin waxa kaa maqan farxaduna meel kale kuma jirtee kolba waa halka aad diirada saarto.

Ha Is Raacin Aduunka




Aduunyadu waxa ku sugnaaday dhexdeeda dhaldhalaal yar oo dhamaanaya ilaahayba waxa uu leeyahay انا جعلنا ما علي الارض زينا لها ***(waxa uu ilaahay leeyahay waxan ka yeelnay aduunkan waxa kor saaran oo dhan wax wax lagu qurxiyo)*** hadaba waxa su'aala maxa aduunkan loo qurxiyay waa tan jawabtu **لنبلوهم ايهم احسن عملا وانا لجعلون ما عليها صعيدا جرزا** waxan u dhaldhalaaliyay ayuu leeyahay ilaahay aduunkan ***inaan dadka ku imtixaamo oo aan Eego dadku mowqifkay aduunkan iska taagan dabadeedna waxan aduunkan ka dhigi doona ayuu ilaahay yidhi meel diri ah oo la tirtiro,*** Hadaba ma is weydiisay aduunkan sidaa u yar ee ilaahay agtiisa baal kaneeco uu ka fadli badan yahay waxad adigu uga daba-cararaso ee aad danahaga Aakhiro aad u seegaso?.


Fiiri saxaabi ka mida asxaabta ayaa nabiga (scw) usoo galay isagoo ay garabka kaga sawiran tahay saligii uu ku jiifay markasu saxaabigii ku yidhi ilaahay rasuulkiisiiyow aan furaash kusoo samayno markasu nabigu (scw) ku yidhi *** مالي ولي ذنيا*** ***Ani iyo aduun maxa nakala galay)*** ayuu nabigu (scw) ugu jawabay

Waxanu u raaciyey aduunkan anigu waxan ku ahay sidii qof safara oo meel intuu hadhsaday dabadeedna iskaga

tagay ayaan ku ahay aduunkan aad sheegasan, Hadaba aduunkan aan manta joognaa waa aduun markuu dhaqaale kuso galo uun aad farxaso hadad weydana aad noloshaba hiifaso hadaba qofka muslimka ahi waxa uu Aaamin san yahay ilaahay (swt) siduu wax walba u qiimeeyey iyo intuu ilaahay aduunkan agtiisa qiimo ka leeyahay waxa ilaahay nolosha aduun oo dhanba ku sifaynaya ***متاع*** ama ***raaxo gaaban*** hadaba aduunkan inta lagaga raaxaystaa waa in yar balse Aakhiro inta lagaga raaxaysto ayaa badan ka fikir waxa danbeeye een kaso noqod lahayn kana digtoonow inaad ku khasaarto noloshada danbaysa.



Cutubka 11aad Xakamee oo xisaabi Naftaada



Cutubka 11aad Xakamee oo xisaabi Naftaada

Cutubkan nuxurkiisuba wuxu ka hadlaya ka adkanshaha nafta iyo toosinteda waxan gunaanad uga dhigay dhiganaheena ahaa ***Anigu yaan ahay*** waxan jeclaystay gunaanadka buugu inuu noqdo waan iyo wax sheeg nafta ah in badan oo ka mida nuqulada buugana waxad ku arki doonta kobcinta nafta iyo sida loo gadhsiiyo badhaadhe aduun iyo aakhiraba

Xakamaynta naftu waa hakinta ama cadaadis galinta



doonista xaq darada ah ee nafta nafta iyo shaydaan ayaa walaalo ah haday ku tashadaan halaag ayaa ku sugnaaday xaqiiqadii in badan oo inaga mid ahi waxan la dhibanahay sidaan nafteena uga adkaan lahayn.

Naarta waxa lagu hareereyey wax kasta oo ay naftu jeceshahay balse ilaahay neceb yahay inagana xaaran tinimeeyey, janadana waxa lagu hareereyey wax kasta oo nafta ku adag ilaahayna uu jecel yahay in badana ina amray intaa ka dib waxay nafteenu ino hogaamisa wax kasta oo ilaahay inaga xarimay shaydankuna wuu ino qurxiya inagon nafteena ka adkayna wan samayna sidasana in badan oo danbi ah ku galna.

Edbinta Nafta

Edbinta naftu waa ka qaabilnoqoshada iyo ka



adkanshiyaha doonista nafta iyo rabitankeeda isla markaan aad ku hogaamiso ahdaftada nololeed iyadoon loo eegayn siday dareemaso dareen ahaan iyo jidh ahaanba.

Waxa jira waxyaabo ay nafteenu jeceshahay oo ay tahay inaan ka celino oo u diidno samaynta ficilada qaar Qoraagii weynaa ee ***ibraahim al-fiqi*** wuxu buugiisa la yidhaa ***awooda xakamaynta nafta*** kuso koobay ***5 tiir*** oo lagu xakamayn karo nafta hadii dhanka wanagsan laga eego oo kala ahaa

- ✓ La sheekaysiga nafta
- ✓ Aaminaada ama iska dhaadhicinta nafta
- ✓ Sida aynu u aragno ashya'da
- ✓ Dareemada
- ✓ Habdhaqankeena

Qodobadana inad u adeegsato naftada adigo si togan u eegaya waxay kugu saacidasa inad naftada ka adkaato oo ka hortagto doonisteeda, edbinta naftu waa inaad howlahaga ku qabato wakhigii logu talagalay kuna dhamayso isla wakhtigooda, edbinta naftu waa in anad u kala xulan howlaha ku horyaala siday u kala fudud yihiin balse waa inad wada qabato dhamantood inad shaqo fudud qabata waxay kuso jiidasa farxad goortad gacanta ku hayso lakin gunta iyo gunanadka waxad dareemasa quus iyo qalbi jab is huwan dhanka kale howlaha muhiimka ku ah adiga aadna u culayska badan waxa dhacdo ah bilowga horeba inad darento daal badan lakin gabagabada waxad dareemasa xasilooni nafeed iyo inad tahay qof howl kar ah waayo malintadu waxay ku ahayd mid dheef iyo qiimo dheeri ah wadata waxanad dareemasa inad naftada ka adkaatay.

Ha Raacin Hawada Naftada



Ilaahay waxa uu qur'aanka marar badan ku shegay badbadada naftu inay ku jirto hiwaayadka nafta oo la diido واما من خاف مقام ربه ونهى النفس عن الهوى فان الالجنة هي الماوى ***macnaha ruuxii ilaahay ka cabsada hor istaagiisa naftiisana siday rabto u diiday janada ayaa hoygiisa ah)*** fiiri akhristow galitanka janada laba shay ayuu ilaahay kaga xidhay oo ah naad ilaahay ka cabsato iyo inaad naftada hawadeeda u diido odhaah ahaan waa wax aad u fudud balse ficil ahaan way adagtahay in la sameeyo sidaa darted mesha aduun iyo aakhiraba lagu kala tagay waa xakamaynta nafta waayo ah nafta inagu jirta sidan horeba uso shegay waxay saaxiib dhow la tahay shaydanka oo adeegsada hadanad ka qaalib noqona waxay ku gaynayan meel aan cidhibteeda la mahadin dagaal iyo jihaadna naftada kugu filan intayna kula fogaan ka feejignow ficilkeeda.

Tarbiyee Naftaada

Naftu Kama maaranto in la tarbiyeeyo oo wax wanagsan



lagu rabeeyo naftu Kama maaranto jid iyo waaciga nolosha in la baro hadaba waxa su'aala qaab nooce ah ayad nafta loo tarbiyeyn karaa talooyin aan tuugna xadayn iga hoo!

1. ***Hel hadafkaga***: hadafkaga ood ogaata wuxu kaa dhigaya qof toosan oo xasilan in badana wan kaso hadalnay hadaf la'antu dhibta ay ledahay waxan wada ognahay qofka hadafka leh iyo ka aan hadafka lahayni in anay isku md ahayn noloshana isku si uma arkayaan inad hadaf ledahay waxay ka hor istaagasa inay naftadu ku jeediso jiho kastoy damacdo.

2. ***Iska ilow soo jiidashada***: waxan shaki ku jirin hadad soo jiidasho iyo damac badan tahay in anad xakamayn Karin naftada xata hadafkaga kama rumayn kartid waayo a waxa kaa qaalb noqonasa damaca naftada ku jira wax kasta ood aragto oo qurux badan wad rabta lacag kasta ood haysato waxad ku kharash garaysa iibsashada wax kasto cusub naftaduna ay jeclaatay hadhown markad aragto in anu ahayn wax ku muhiim ahaa balse damacagu ku geeyey ayad ledahay maxan ku falayey een u iibsaday damacagod xakamaysa waxay kaalin muhiima ka qaadanasa tarbiyeynta naftada waxay

naftadu kala baranasa waxad u baahan tahay ee ay khasab tahay inad hesho iyo waxad u baahnayn waxad kala ogaanasa maxa ku anfacaya maxanse ku anfacayn naftaduna xadgudubka badan way yaraynasa oo jeclaan mayso waxkasta kuna amri mayso.

3. ***Hadaf dheer yeelo:*** ma ogin waxa nagu dhici doona mana ogin waxa noo qorshaysan inay no wada hirgali doonan sidasoy tahay hadana waxamuhim ah inaad yeelato hadaf dheer oo aad xaqiijin karto hadan dib ku xasuusiyo buugan sobobahan u qoray iyo waxa igu kalifay waxay ahaayen uun hadaf ka mida ahdafta noloshayda u yaalay hadafkan dhigtay igamu dib dhigay inan naftayda wax u qabsdo oo aan wakhtigyga uga faaidaysto sida waxa la mida wax kasta oo kugu yimaada hadad marka hore hadaf kasii lahayd waxad u xalisan karta sida ugu macquulsan uguna haboon oo arimahagu iska kaa dhexgali maayan kuna wareeri maysid waaqiciga nolosha.

4. ***Ku celceli caadoyinkaga:*** dhaqan ma hirgalo ilaa la la yimaado ku celcelin waxan xasuusta macalin ka mid ah macalimiinta wax iiso dhigi jiray ayaa mar walba wuxu waano ahaan no siin jiray odhaah ahayd (***wax kasto adag wakhtiga ka adag)*** waxan ka wada hadad la timaado ka dhabayn iyo daacadnimo joogto ah hadaf kasta ood noloshada dhigatay wad gaadhasa

kana caajisi maysid waayo ah waxad ledahay hadaf iyo doonis xoogan hubaal waxa ah hadii laga helo tilmaamahan kor kugu shegay oo dhan inad noqonaso qof toosan oo wax layska waydiiyo sirta noloshiisa.

5. ***Yeelo caadoyin ku gaara:*** markad tahay bashar ilaahay khalqay oo karaameyey maxa ku diidaya inad yeelato wax ku gaara oo la yidhaa dhaqankas waxa can ku ahaa hebel/heblaayo dhanka xumanta kama hadlayo oo sifo xun hadad yeelato saamayntu naftada ayunbay haysanasa lakin sifada wanagsan waa mid qabsanasa qalbiyada dadka oo dhan indhaha dadkana ka dhigasa kuwo adiga uun kugu mashquula inad yeelato caado ku gaar ah waxay noloshada ka dhigasa qof jira oo leh astaan garasho ogowna waxad naftada barto balwad ayey u noqonayane bar dhaqan toosan oo ilaahayna ku dhawaynaya.

6. ***Fududayso wax kasta:*** maskaxdeenu waxay turjunta waxay indhaheenu qabtaan isla sidaa waxay niyadeenu macnayso ayey maskaxdeenuna go'aan kaso saarta hadad howl qabashadeed ama caado aad lahayd u aragto wax weyn oo adayg badan oo anad qaban karayn maskaxdaduna waxay kugu amri doonta ka tanaasulka arinkasi sidana waxad ku noqon doonta qof ay naftiisa hoganka u hayso.

7. ***Bar Naftada la xisaabtanka:*** bal iisheg sidad naftada u tarbiyeynaso hadanad naftada barin isla xisaabtanka side ku ogaan karta khaladadka aad gashay saxsanantoda iyo qaldanantoda ma ogaan kartid hadanad la hadaladka naftada barin oo anad xisaabin, xisaabi naftada oo kala sheekayso naftada waxay samaysay iyo siday wax kugu dhaceen kana digtonow inad naftada la sugto inta ay dadku ku xukumayaan adiga is xisaabin kugu filan tag meel cidlo ah oon qofna joogin naftada la hadal kana sax wixii khalad aad gashay oo la imo go'aan saxan.

8. ***Noqo qof iska warhaya:*** waxa dhacdo ah badankeenu waxan nahay dad aan is ogayn taasina waxay fursad cajiiba siisay nafteena sidasayna noga adkatay oo waxay rabto ino farta ma dhacda adigo dano uga soo baxay guriga in saxiibka/saaxiibada dhexda aad ku kulantaan oo ku tidhahdo meel hakan ah oo lagu caweeyo ayan u socdaye kaalay jawi ialso qaado ama ma dhacda adigon doonayn inad guruga ka baxdo in qof aad isku dhaweydeen ku imaado kadibna ka codsado inad raacdo adiguna aad ka ogolaato ama ma dhacda adigo dan suuqa ugu baxay inad mid kale oon muhiim ku aayd wakhti ku bixiso hadhowna baylah ku taalay markad wakhtigedii lumisay aad is canaanato adigo isku leh dib uma samayn doono

Hadana is arka adigo ku noqday ma is weydiisay sobobtad uga dhabayn la'dahay go'ankaga jawabtu waxay tahay waxanad naftada barin isla socodka waxa loo yaqan hadaf ayad dajisatay kadibna halkibad ku ilowday maba xasuusatid waxad dhigatay hadaba isla soco oo go'aanada noloshadu ha noqdaan kuwa ku hogaamiya ka leexan maysid hadafkaga hadad barto naftada isla socodka.

Goorma la Xakamaynaya Nafta?

Waxa la xakamaynaya markasta oo aad ka dareento naftu inay ku jihaynaso jiho qaldan oo rabiga cadho galinasa waayo ah naftu waa mid mar walba danaysa dhanka xumaha ogsonow xumo oo dhana waxa lagu hareereyy naarta *وان الفجور يهدي الى النار* naftu wanaga ma jecla wanaag oo dhana waku adag yahay haday samaynasa shaydaan ayaa dagaal kula jira oo isku daya inuu qaso oo khalakhaliyo kuna kari maysid ujeedsadka xaga ilaahay hadayda naftadu barato ka jeesadka la dagalanka nafta iyo shaydanku waa nuxurka cutubkeena sidaan ogaal ahaan ku hayno aduunkan manta aan ku nool nahay way yaratay wax la yidhaa xakamaynta naftu oo waxa ka qaalid noqday shaydaan isma ogin lakin malinka qiyaame ilaahay waxa uu leeyahay waxa laysla xidhi doona naf walba iyo shaydankeeda marku ilaahay su'aalo maxad u samayn weyday waxan ku faray oo aad uga jeesatay awaamirtayda

ayaa waxay naftu ku andacoon doonta shaydaan ayaa I lumiyey oo iga jeediyey inaan u hogaansamo amarkaga markas ayuu shaydaan isku dayi doona inuu is bari yeelo isago nafta daalac u raacaya oo leh اني بريء منكم اني اخاف الله رب العالمين (***anigu bari ayaan ka ahay waxad sheegasan aniguna ilaaha caalamiinta oo dhan rabigooda ah ayan ka cabsanaya)*** wata dhagarta shaydanku ilaahay ayaa qur'anka inugu shegay waxa uu hada samayayo iyo waxa maalinka qiyaame uu odhan doono hadaba anigun kaasaynu u hagsanay oo uga fogaanay dayrkii magangalka inoga noqon lahaa dainka shaydaanka wuxu odhan doona halked igu arki jirtay anig ku leh ha samayn amarka ilaahay anigu wan ku qurxin jiray xumanta adiguna wad samayn jirtaye adiga ka fogaaday Rabiga in badan oo inaga mid ahi haday ogaalkoda ka dhigi lahayeen mid so jeeda waxaynu noqon lahayd ummad ilaahay raacda oo ka dheerata dabinada shaydanka.

Ka Xorow Aragtida



Aragtidu waa nimco ilaahay bixiyo ta ugu weyn hadii laga qaadana waa niqmo aragtidu waa nimco ilaahay ino siiyey inan ku daalacano ayaadkiisa kowniga ah kadibna ku cibro qaadano waxan wada ognahay qofka manta indhoolaha ahi inuu waayey nico aad u weyn oo uu dareemi karo qofka bilaa

indhaha ah oo kaliyata waayo wuxu tamaniya mar walba ina marun la tuso nimcooyinka ilaahay ee aduunkan yaala waxayna ka mid tahay imtixaanada ilaahay ka qaado basharkiisa lakin qofkii ku samra aakhiro ayuu helaya wax ka wanagsan aduunkan hadaba inteenii indhaha qabtay maxan u dareemi weynay nimcada ilaahay iyo awood badnidiisa maxan indhaheena ugu adeegsan weynay waxa ilaahay ino ogolaaday ee layna yidhi ku arka ma ogtahay macsiyadu inay indhaha iyo qalbigaba madoobayso qofka laasima ama marun ku dhaca mase ilowday inaad ku gafaso oo ku kufrinaso nimcada ilaahay ku siiyey halkii ay ahayd inaad ku xamdido oo qur'aanka mucjisada badan ku akhrisato mase ilowday waxa dadkeena ugu wacan indha beelka ee ay u wada xidhan yihiin muraayada inay tahay gaabis xageena ka yimiday marka loo eego dadkii inaga horeeyey mase ilowday inay ku tirsan tahay xumaan kasta ood indhahaga ku eegtay adigo og hadana caasintad samaysay darted ilaahay wuxu ciqaab kaga dhigaya aragti gaabni iyo qalbi madoobad garo iyo goori goortahay qiimaha aragaaga kana faa'idayso rabigana ugu mahadi nimcada weyn ee uu ku gaar yelay.

nabigu scw isago in badan inoga digaya fadhiisadka suuqyada ayuu ku yidhi qaar ka mida asxaabta oo fadhiday meel majlis ah ragow wadada xaqeeda siiya markay weydiiyen wuxu ugu jawabay nabigu scw indhihiina laaba oo hoos u foorariya xata nabigu scw wuxu tillmaamay aragida kobaad inayna danbi ahayn lakin usii fiirsadku inuu danbi yahay macsidu waxay

raadaysa qalbiga qalbiguna hadu fasahado noloshiina fasahaday.

Maqalka ka xorow



Maqalku wuxu ka mid yahay nimcooyinka ilaahay inagu manaystay bani'adam ayaan nahaye abaalkii ilaahay inagu lahaa maynu gudin waxa ilaahay maqalka inoo siiyey inaynu intifaacsano oo kalaamka ilaahay iyo wanaag oo dhan ku dhagaysano balse taa badalkeeda waxan ku dhgaysana wax kasta oo ilaahay cadho galinaya iyo wax kasta oo xumaan ah oo aynu bani'adamka ka qarsanano inago ilowsan ilaahay oo maqal badane ahi inuu ina maqlayo caqli gaabnideenu waxay sobob u noqtay inan basharkana iska qarino ilaahayna iska ilowna isago ina arkaya aan hortiisa wax walba ku samayno, in badan oo inaga mid ahi waxay ku faanta garashada iyo dhagaysiga heesaha iyo wali ku luuqayntooda balse ma oga in markasta oo ay dhagaystaan hees uu qalbigoda dhibic yar oo madow ilaahay dhigayo mar kasta oo ay joogteeyan dhagysiga waxa balaadhanasa dhibicdaas ilaa qofka qalbigiisuba uu wada madoobado nabigu mar kasta oo uu salad tukato wuxu ku ducaysan jiray اللهم يا مقلب القلوب ثبت قلبي علي طاعتك oo la macno ah ***ilaaha qalbiyada gadgadiyow qalbigayana ku sug daacadaada*** nabi muxamed oo adiga kaa fadli badan kana cabsi badan ayaa sida ku

ducaysan jiray adigo og danbigad galasana ma ducaysatid oo ma toobad keentid bal waxabad isku haysata qof aduunkan la haysta oo update ah balse baadi ayad ku sugan tahaye isgaadh.

Hadalka ka xorow



Hadalku waa nimco ka mida nimcooyinka ilaahay ku galaday adoomihiisa carabku waa furaha bani'adamka waxa yidhi ***ibnu- qayim raximuhu-laah*** waxa uu lahaa القلوب كا لقدور والسنتها مغارفها ***(qalbiyada bai'adamku waa sida dhariyaha oo kale carabkuna waa mulqaacada lagu soo dhurayo)*** macanaha waxa qalbigaga ku jira ayunbuu afkuna ku dhawaaqaa Ilaahay subxaanahu watacalaa waxa uu leeyahay ما يلفظ من قول الاديه رقيب عتيد ***(qofkabani'adamka ahi war/hadal kuma dhawaaqo ilaa haduu ku dhawaaqo waxa sugaya kuwo ilaalinaya oo waxa uu yidhaaba qoroya)*** ilaahay mar kale waxa uu leeyahay لاخير في كثير من نجواهم الا من امر بصدقه, او معروف او اصلاح بين الناس ومن يفعل ذالك ابتغاء مرضات الله فسوف نؤتيه اجرا عظيما ***(khayr kuma jiro dadku waxay ku hadlayaan ilaa qof dadka amraya sadaqo, ama faraya wanaag, ama dad heshiisiinaya qofka sidaa sameeya waxa uu helaya raali'ahaanshaha ilaahay waxanu kusiini ajir weyn).*** Ilaahay waxa uu leeyahay waxad ku dhawaaqasaan oo aad afkiina ka odhanasan

wax badan oo aydaan ogayn waxyeeladiisa iyo waxtarkiisaba ayaa jira waliba warkaa waxad wadaan idinkoo u malaynaya inuu fudud yahay lakin ilaahay agtiisa wax fudu Kama aha badana inta xumaan ah ee aynu ku hadalno ama ku xamano dad aan ina ogow inagana raali ahayn waxaynu ku tilmaamano nimco walba nusqanteeda leh carabka hadan sida saxan u adeegsano walahi wan ku faa'idana oo ku aflaxana nolosheena aduun iyo teena aakhiraba lakin hadynu hadalno uun malaa'igtiina buuxiye baashash badan oo anad akhrin Karin malinka qiyaame oo anad xata xasuusan Karin goortad ku hadashay fursad ayad haysata towbaduna way ku furan tahaye ka faaidayso kana dheerow caasinta ilaahay naftada qabo intan la qaban.

Xasili xubnahaga

Ma ogid miyaa adoonkii ilaahayow in laga su'aali doono xubin walba waxad ku qabatay waliba adigu hadli maysid ilaahay ayaa ka hadlinaya xubnahaga oo waxay sheegi doonan wax kasta oo ad ku qabatay hadad wax xaday, hadad xoolo anad lahayd awood ku qadatay, hadad tagtay meel



ilaahay raali ka ahayn, hadad qof ku dishay, hadad cunto xaarana ku cuntay, wax kasta iyaga sheegaya xubnuhuna maahan uun faraha oo kaliya meel kasta oo jidhkaga ka mid ahi iyada ku khashifi doonta hadad isleedahay laguma arkaye same wax kasta ilaahay wuxu ka hadlinaya kuwad wax kuso samaysay kadibna halkad mudan tahay ayaa mudan siinaya ka digtonow ciqaabta danbaysa xasuusnow.

Nabigu scw waxa uu yidhi qofka ilaahay sida dhabta ah uga xishooday waa qofka xafida madaxiisa iyo inta ku hareeraysan, caloosha iyo inta ku xeeran, xasuustana dhimashada, kana taga aduunkan dhaldhalalkiisa wuxu ilaahay ka xishooday xishood dhab ah.

Marmarsiyo ku nooqn mayso iyadoo lahayo tusaalayal nool

Ma waxad ilaahay ku odhan ilaahayow waan tukan kari waayey xanuun darted iyadoo suubanaheena muxamed scw isagoo sakaraadaya uu lahaa igeena jamaacada xata ma odhan aan guriga ku tukad cudur daar nooce ah ayad ilaahay la hor imanasa iyadoo xata ay dagaal kula jiraan cadowga ilaahay ayey saxaabadu rc ahaayen kuwo tukada oo isku badbadala gaadhka rabigoodna way raali

galinayeen diintoodana way difaacanayeen adigu bal shaqadad naftada iyo diintaba u hayso bal sheeg?.

Ma waxad ilaahay ku odhan ilaahayow waxan bixiyo ayaan waayey oo baahi ayad uga caban isago nabi muxamed macalinkaga ahaa oo deeqsinimo la godgalay mararka qaar siduu wax u bixinayo ayaa waxay tidhi caa'isha 3 habeen iyo malmahodiiba waxanu karsano ayaan gurigayaga ka weynay hadana muu ahayn nabigu scw qof aduunyo jecel gaajo darted ayuu nabigu scw dhagax dhexda ugu xidhay isago dhisaya masjidkii ugu horaysay ee madiina laga taago hadana wuxu nabigu scw ahaa qof diinta sidaa ugu jihaadaya oo dadaal badan dadku ku tabcayeyna waxa ka mida manta kuwo bakhayliin ah oo iyago dharagsan xoolaha masaakiinta qaadanaya.

Ma waxad odhani ilaahayow naftayda waan xakamayn Kari waayey oo hawooyinka naftayda iga xoog batay maya walahi odhan maysid xata hadad taada ka adkaato oo lagula soo doonto waa inad u dhaqantii sidii nabi yuusuf cs oo naftada xakamaysa xasuusatana maalin ayna jirin cidd adiga iyo ilaahay idiin dhaxyn doonta abaalmarintaduna ayna noqon doonto meel aan kaso noqosho lahayn.

Ma waxad odhan ilaahayow maan ogayn inay xoolo xaarana ahaayen adigo dhacay raashin agoomo la siinayey ama beer ka goostay khudaar aan lagu fasixin, mase qadhiidhay tukaan aad alaab ka iibsanasay

sonkortiisa, mase marsaday saliid miska u dul taalay adigo isku halaynaya garasho aad garanaso qofka lakin aan weydiisa mase samaysan xaafad inta aad tagtay waxad cuni karasay iyo waxad marsan karasayba ma isku darsatay adigon qofna ka mar qaadan oo isku halayn inad famil tihiin ama aad is garanasaan hadaba waxyabaha sahalka kula ahi ilaahay agtiisa sahal kama ah malinka qiyaamana amar la'aanta walaga xisaabin doona ogowna cad xaaran ku beermay siduu doonaba ha kugu soo galee in ilmahad dhasho ilmihiisa saamayn doono hadaa waa danbi aad adigu gashay ka digtoonow oo fasax qaadashada bar naftada.

Dabinka dunida



Dhibic malab ah ayaa dhulka kuso dhacday qudhanjo ayaa aragtay oo dhadhamisay markay ogaatay in waxani malab yahay ayay ka dhaqaqday si ay asxabteeda kale ugu yeedho, hase ahaate macankii ayey ka tagi kari weyday way dhadhamisay hadana mar kale

ilaa ay gudaha u sii gashay malabkii markii ay ka dharagtay ayay damacday in ay ka dhex baxdo hase ahaate way ka dhexbixi kari wayday oo malabkii ayaa sida xabagta ugu dhagay sidaasayna ku dhimatay taa waxa la mida aduunkan iyo waxa dhex yaala oo dhaldhalaal ah qofka dhadhamiya ee ka dhaqaaqa wuu ka badbaadaya midka dhexgalaana wuu halagsamayaa sida qudhanjadaasi u halagsan tay oo kale

Suuratul- taxriim سورة التحريم

Suuratul-taxriim ilaahay waxa uu kaga hadlay **6** haween ah **2** ka mida quraanku wuu waaninaya oo waa xaasaskii nabiga (scw) oo kala ahaa **caa'isha** iyo **xafsa** xogaa hinaaso ayaa qaaday oo waxay isku dayeen inay dumarka kale ee nabiga (scw) ka dheereyaan labada haween ilaahay suurada wuku waaninaya, 4ta haweenka ah ee soo hadhayna 2 kamida nabiyo ayaa qabay lakin

ilaahay waxa uu ino shegay inay ehlu naar yihiin subxaanalah Aayada ilaahay ku sheegayna waa tan وضرب الله مثلا للذين كفرو امراة نوح وامراة لوظ كانتا تحت عبدين من عبادنا صالحين فخانتاهما فلم يغنيا عنهما من الله شيئا وقيل ادخل النار مع الداخلين aayadan waxay sheegasa labadan haween ee nabiyadu ay qabeen waxay diiden inay raacan oo diinta ku kaalmeyaan baadidaa ay noqdeen darted ilaahay wuxu yidhi waa ehlu naarka inaga waa laynaga digayaa talaabada ay qadeen.

waxa kale oo ilaahay tusaale ku bixinaya 2da haween ee ugu danbeeya ee ka midka ahaa 6dan so sheegnay lakin iyaga nabiyo may qabin balse waxa lagu tilmamay ehlu jano waliba kuwa ugu waaweyn ayay ka mid yihiin sobobto ah qofku wadada uu maro iyo dhaqanka uu qaato ayay ku xidhan tahay janadiisa iyo cadabtiisu waxa kale oo la tilmamaya qofka dumar ahi inay leedahay shaqsiyad madaxbanan oo waxay gudo laga abaal marin doono oo aan lagu dhaafay ninkeda nabi ahaa iyo ninkeda sheikh ahaa waayo waynu aragnaaba in haween nabiyo qabeen ay naarta galeen taana waxa u daliila Aayadan وضرب الله مثلا للدين اءمنو امراة فرعون ادقالت رب ابن لي عندك بيتا في الجنه ونجني من فرعون وعمله ونجني من القوم الظالمين fircoonkii ugu gaalnimada badnaa ayay haweenaydiisina islaamtay waliba aayadan ayay ku ducaysanasay in ilaahay ka badbaadiyo gaalinimada fircoon iyo halaaga mesh akas socda ilahayna waka badbaadiyey.

Haweenayda labad ee iyaduna ehlu janaha ahi waxa weyi **(Maryama bintu cimraan)** waa gabadha qudha ee ilaahay qur'aanka ku shegay **26 jeer**, wana gabadha qudhee loo abtriyay qur'anka dhexdiisa kuna caanbaxday cibaado iyo wanaag hadaba sifoyinkan ayuu ilaahay ku sifeeyay maryama bintu cimraan, Sifada ugu horaysa ee ilaahay ku sifaynayo kuna amaanayo maryama waa **dhowrsooni** ومريم ابنت عمران التي احصنت فرجها فنفخنا فيه من روحنا وصدقت بكلمات ربها وكتبه وكانت من القانتين Macnaha (maryama bintu cimraana ahayd ee dhowrsoonayd ee farjigeeda xumaha ka dhowrtay dabadedna aan ku afuufnay ruuxdayada kana run shegtay ilaahay kalmadihiisii iyo kutubtiisiiba ee ka mid ahayd kuwa cibaadaysta ee khushuuca) sidaa awgeed qofka dhowrsoonidiisu waa diin waana taa ilaahay ku amaanayo Maryam.

Qur'aan badan ayuu ilaahay kaga waramayaa ahmiyada dhowrsoonida oo maki iyo madaniba leh waxana ka mida والذين هم لفروجهم حافظون sido kale ilaahay marku ka waramay kuwa liibanay wuxu yidhi قد افلح المؤمنون * الدين هم في صلاتهم خشعون* والدينهم عن اللغو معرضون *والدينهم للزكواة فعلون* والدين هم لفروجهم حفظون* الاعلى ازواجهم او ما ملكت ايمنهم فانهم غير ملومين*

(Ilaahay marku shegay kuwa libanay sifaadbu ku shegay ah kuwan inay yihiin kuwo salaada ku

khushuuca, inay ka dheeradan laqwiga iyo xumaha, inay sakada bixiyaan, inay farjigooda dhowraan oo ka dhowraan waxan u xalaasha ahayn) waliba waxa ilaahay sii raaciyay waa kuwo janada dhaxli doona booskeda ugu sareeya ee janatul- firdows waxanay ku mutaysteen dhowrsoonanta ay dhowrsoonaden.
Dhowrsoonidu maaha wax kaliyata shakhsiyo gara lagu waajibiyey balse Waxa la faray qof kasta inuu dhowrsoonado ilaahayna wuxu ku shegay Aayadan وقل للمؤمنات يغضو من ابصارهم ويحفظو فروجهم ذالك ازكي **لهم** ***(waxad ku tidhahdabu ilaahay ku yidhi nabi muxamed (scw) kuwa iimanka laga helay indhihiina laaba farjigiinana ilaaliya sidaasa u dahaaro badane)*** hadaba mas'aladan dhowrsoonanta ah ajarkeda qur'aanka iyo axaadiistuba waxay ku sheegen ajar weyn oo wax lala mid dhigaa jirin tusaale waxa u aha maalinta qiyaamaha oo ah maalin adag oo dhererkeegana lagu qiyaasay **50,000** oo sano ah waa maalin cadceedu dhowdahay oo qof waliba dhididayo danbigiisu intuu leekaa oo kadeedkeda wax lagu qiyaaso jirin hadaba kadeedka iyo rafaadka dadba jira ka badbaday waxa uu nabigu ku tillmaamay **7qof** inay ka badbaadayaan oo ay hadhsadan hooska/ hadhka ilaahay waxa ka mida **7** bada dad camalo waaweyn sameeyay ayaa kuwo farjigoda ilaaliyey oo dhowrsonaday u fiirso camal kale may samayn balse naftoday ka adkadeen .
Waxan si cad oo aanu mugdi ku jirin u qeexnay ahmiyada dhowrsoonidu ledahay aduun iyo Aakhiraba

wana waxyabaha ugu waaweyn ee hadii la ilaaliyo jano lagu mutaysanayo hadii lagu fitnobana cabaad iyo ciqaab alle lagu mutaysanayo walciyaadu bilaah.

Ku Qanac Qaybta Rabiqa Ku Qorsheyey

Rabi subxaanahu watacaala waxa uu nimcooyinkiisa saamiyo aan isleekayn ugu kala qaybiyay adoomihiisa ujeedka sidaa loo yeelayna ay tahay xikmad aad u culus oo aynu ku fahmi karno caqligeena markaan si toosan ugu fikirno, u jeedka sidaa loo yeelay ee adoomaha ilaahay u kala fadiley ee midna u siiyey hanti badan midna u siiyey hanti yar waxay tahay inay isnaanka noloshoodu isku dheelitirnaato yacnii hadii laga wada dhigi lahaa taajiriin lama heleen qof baahan oo qof kale wax waydiisanaya, lama heleen qof qof kale u adeegaya oo muruqiisa ku shaqaysanaya, lama heleen bulsho is wada jecel oo isku dhago nugul, lama heleen bulsho is ixtiraamaysa oo kala danbaynasa oo leh maddax weyne iyo maddax- dhaqameedyo, cuqaal iyo waxgarad, lama heleen bulsho mutawaadiciina badalkeeda waxa la heli lahaa bulsho mutakibiriin ah oo yar iyo weynba lays aqoonin oo qof walba leeyahay maxan hebbel uga baahanahay anaba isku filane ku darsoo aduunkana waa lays raacin lahaa maadama wax walba dhamays yihiin hadaba si ayna fasahaadkasi bulshadu ugu dhicin ayuu ilaahay u kala saraysiiyay bani'adamka mana aha kala

jeclaysi iyo kala dhawansho la kala dhowyahay'e waxa ilaahay sidaa u yeelay ayaa ah imtixaan hadii lagugu imtixaanayo qaybta rabiga ku qorsheyey marka la gaadho maalinka qiyaamana su'ashani waxay ka mid noqon doonta su'aalaha ugu horeeya ee lagu weydiin doono.

Waxan uga socdaa qanaacada lafteedu waxay ka mid tahay waxyabaha loo bahan yahay in lagu xakameeyo nafta si loo helo naf tarbiyeysan oo toosan.

Aduunkan Dadaal Ayaa Dad is Dhaafshay

Akhriste ma ogtahay in qaar badan oo inaga mid ahi aysan helin fursadaha dahabiga ah ee aad adigu manta haysato nasiib umay helin inay caafimad taama aduunkan ku haystaan,nasiib umay helin inay wax maqlaan,nasiib umay helin inay indhahooda ku daawadan quruxda iyo dhalaalka aduunkan,nasiib u may helin inay fursado waxbarasho helaan si ay ula jaan qaadan qayrkood, nasiib u may helin labadoodii waalid

ee aduunkan keenay inay weheshadaan, sido kale nasiib u may helin inay socdaan oo cagahooda iyo xubnahooda ku ciil baxaan hadaba waxa adiga kugu waajiba inaad mar walba alxamdulilah tidhaahdo fursadahaa iyo janisyadaa ilaahay ku gaar yeelayna ka faa'idaysato.

Ku mashquulida naftaadu waa waxan dadka badankood wada fahansanayn ogow akhristow naftan kugu jirta hadad toosiso iyo hadad halaysab adiga kaliga ayaa wax laga weydiin doona cid kale mas'uuliyadeda kama qadaso waxa muhiim inaad garasho u lahaato naftada oo aad ka faa'idaysato fursadaha tirada badan ee ilaahay ku siiyey ahaatana adoon xamdiya oo xasuusnada nicmada ilaahay siiyo haku fikir oo marna hays odhan hadad xamdiga badiso ilaahay ayad wax tartay maya walahi ilaahay waxba umad siyaadin waxna mad tarin ee naftada ayunbad wax tartay hadaba naftada aduun iyo aakhiraba iyada ku liibnayse garasho xeel-dheer u lahow.

Noqo Qof Bani'adantinimo leh

Bani'aadantinimo markaan leeyahay waxad isweydiisa tallow maxa iska so galay bani'adantinimada iyo cutubka ciwankiisa oo ahaa xakamee nafta xumo doonta ah?

Waxa iska so galay waxa weyi waxad tahay bai'adam waxan iska nahay dad aad u xil jecel oo meel walba inay wax ka noqdaan raba taa badalkeeda wakhtigii nabi

(scw) waxay ahaayen saxaabadu kuwo ka carara xilalka oo ka cabsooda masuuliyada intay ka fogaan karayana way ka fogaan jireen hadii alle u qadaray oo ay qabtana waxay ahayeen kuwo si cadaalad leh u maamula masnabka lo dhiibay balse inagu waxan noqonay umad iska ilowday cabsidii ilaahay oo aad u xil jecel waxay ka dheefan mooyane waxay dadka manfac kuso celiyan ayna jirin waxan noqonay bulsho fusiq badan oo madaxdodu ay bulshada dhacayaan oo ay maatida xoolahoda cunayaan oo laysku aabo yeelayn.

Waxa jira xidhiidh ka dhaxaysa mowducan iyo ciwaanka guud oo ah hadii alle ku qadaro inaad maalin uun masuuliyad qaado intay doonto ha leekate oo ay u yar tahay tan aad naftada iyo qoyskaga u hayso wanaaji oo si daacdnimo leh u maamul xadiis ka sugnaday suubanahena (scw) ayaa ahaa (كلكم راع وكلكم مسئول عن رعيته) hadaba ilaahay uga cabso naftaada iyo nafaha kale ee aad masuulka ka noqonaysid oo cadaalad iyo daacadnimo la ogow naftaaduna yanay been ku sheegin oo yanay ku biddin awood anad lahayn mar walba xasuusnow in xabaal yar oo 2 mitir ahi kaliga ku sugaso waxad arkaso iyo waxad qabanasaba alle adigo ka cabsanaya qabo naftadana usheeg tan in layskaga danbaynayo oo anad xukun u lahayn kusii waarida aduunkan.

Xidhiidhka ka dhexeeya waa kaa aynu tilmaamanay meel walba oo u baahan baraarujin nafta ahna waa inad ogaata oo anad aduunkan iyo dhaldhalakiisa is raacinin.

Safarku dheeraa sahayduna yara

Dhamaan makhluugadka aduunkan ku nool oo dhani noole iyo ma noolaba waxay leeyihiin bar dhamaad oon u jeedo noole walba aduunkan maalin ayuu macasalamayn doona isagoon dib uguso noqonayn.

Ilaahay waxa uu leeyahay وما جعلنا لبشر قبلته افأن مت افهم الخالدون * كل نفس دئقت الموت ونبلوكم بالشر والخير فتنة والينا ترجعون * انك ميت وانهم ميتون وانما توفون اجوركم يوم القيامه فمن زحزح عن النار وادخل الجنه فقد فاز ومالحياة الذنيا الا متاع غرور* Xaqiiqada qudha ee gaal iyo muslinba ogsoonyhaya waa Geerida naf walba oo dunidan joogta way baxaysa rasuulku Rabi u jeclaa ayuu ku leeyahay aayadkan aan xaga sare ku qornay ***(Nabi muxamadoow scw adiga hortaa cid aan u ogolaanay inay waarta ma jirto ayuu leeyahay ilaahay swt adiguna waari maysid)*** ku la jecel yahay ayaa geeriyoon ku la naceb yahay ayaa geeriyoon, ku yar ayaa geeriyoon, ku weyn ayaa geeriyoon hadaba su'aashu waxay atahy geeridu ma waxay tahay dhamaadka nolosha mise bilowga nolosha? Sobobto aan sidaa u leenahay waxay tahay markad geeriyootid waxad tahay qof ka tagay noloshiisii aduunyo oo bilaabaya

nolsohii Aakhiro sido kale waa qof ka tagay noloshii su’aasha ahayd oo tagaya noloshii jawaabta ahayd waxa halka uga bilaabmi doona nolol ay adagtahay inaad ku guulaysataa ilaa qofka rabi haleeshiiso maahane waxad kala kulmasa halka su’aalo adag oon hore lagu weydiin intaad ifka joogtay hadii lagu weydiin lahaana aad si sahal ah aad uga jawaabi lahayd balse halkan ay adagtahay in qof walba garto jawaabahas ilaa qof alle u naxariistay maahane.

Su’aalahas maaha kuwo lagugu maagayo balse waa kuwo markad aduunkan joogtay lagu sii shegay oo lagu yidhi iska qayb maalinka aakhiro kuwasa lagu weydiin doonaye waxana ka mida su’aalaha من ربك؟ و ما نبيك؟ وما دينك؟ waa su’aal muqadama oo aad jawabteeda hada hayso balse insaanku xaalada dhabta ahi markay timaado ee uu naxo waa uu ilaawa waxa uu hayay sidaa waxa la mida inta haleelasa jawabta su’aashan ayaa yar.

Mid ka mida boqoradii muslimiinta ayuu Nin ku yidhi maxaan ku nacnaa geerida? Markasu ugu jawaabay waa macquul inaad nacdaan geerida maxa yeelay waxad camirteen aduunkan oo waxad ka jeesateen aakhiro marka halka lagu badan yahay ayunbad jeclaanasa.

Hadaba akhristow noloshu way gaaban tahay safarkuna waa dheeryahay sahayduna way yar tahay saacaduhuna way soconayaan xisaabteenuna waa mid mar walba la

qoroyo oo qalin dulsaran yahay hadaba suaashayda waxay tahay maxad kala tagasa duunka maxadse kula noqonasa Aakhiro?

Buugan waa barbarin iyo baraarujin bulshada ah hadaba maxay macno ledahay waano bilaa taqwo ahi? Maxay macno ledahay nolol bilaa xisaabtan ahi? Maxay macno ledahay rajo bilaa cabsi ahi? Ilaahay wuxu leeyahay ان الله شديد العقاب *ان الله غفور رحيم* ان الله يحب التوابين*ويحب المتطهرينdhamaan aayadkasi oo dhanba waxay noo cadaynayan in ilaahay yahay mid naxariis badan oo u kaadin badan lakin mar hadu qabto aan baxsasho jirin inta ka horaysa qabashadasina uu ku ogol yahay towbad iyo kaso laabasho kuna naxariisanayo.

Adoonkii ilaahayow mar walba xasuusnow inay ku sugayso malin dhererkeedu leegyahya 540 sano hada ognosow waa hal maalin oo dherekedu intaa leeg yahay maxad u malaynasa in laga xisaabinayo waxa laga xisaabin doona wax kasta ood fashay intaad aduunkan ku sugnayd ha yaraato ha badnaato saacad ha ahaato ama second habeen ha ahaato ama maalin alle wuxu garbahaaga yeelay laba malag oo lakala yidhaa raqiib iyo catiid waxay qorayaan shar iyo khayr waxad samayso iyadon waxna lagugu darayn waxna laga reebayn hadana ilaahay bal naxariistiisa u fiirso wanaag kasta ood samayso ajar ayaa lagugu qoraya hlka xumaato aan markaba lagu qorayn ee cabaar lagu yaro sgayo bal intad ka towbad keenaso hadad ka tobad keeni waydana

danbigagii uunba lagu qoraya waxba lagu dul saari maayo subxaanalah.

Adoonkii ilaahayow ma waxad hilmaantay ilaaha qurxaa ku siiyey oo ku dhamaystiray ee ku yidhi cun oo cab kaliya I caabud miyaa tidhi anaa isku filan oo wax walba qasbanaya Haa wan nidhi hadaan baniadam nahay wax walba oon suurtagl ahayn ayaan samayney oo ku gafnay Rabigeen, hadaba akhristow buugan gabogabo waxan ugu dhigay inaan naftayda iyo nafihiinaba ku baraarujiyo u noqoshada xaga ilaahay iskuna baraarujino u diyaargalowga maalinta dhererka badan ee dhibta badan ogsonow malinkas ka bixi maayo ilaa qof ilaahay u naxariistay oo isaguna shaqaystay maahane mid kale ka bixi maayo, waan ogahay oo in badan oo inaga mid ahi qoraalada ama cajaladaha noocan ah kama helaan wanay ku caajisay dhagaysigeda ama akhrinteda balse waxa jiri doonta maalin aan laga aqbalayn wax cudur daar ah adna aad ku danbayn doonto shalayto iyo waxan soo laabasho lahayn.

Ujeedka aan buugan u qoray ayaa ahaa baraarujin iyo wax usheeg ummadayda ah waxan ogohay wixii la yidhaa inuu lumayo ama Aanu bulshada wada gaadhayn balse wixii la qoraa uu quruumo raagayo waxa kale oo aan ogahay tabaca aan buugan galiyey iyo niyada xamaasadaysan ee aan bugan ku qoray in alle uu iiga aqbalo oo uu ka dhigo dhiganahan ama buugan mid dadka anfac iyo oo waxtar u leh,

Ma jiro wax la bilaabo oo aan dhamaad lahayn sidaan wada ogsoonahayba waxaynu ka abuuran nahay candhuuf yar oon anfac lahayn balse ilaahay subxanahu watacala aya awoodiisa inagaga dhigay qofka dhan ee soconaya oo maraaxil kala duwan inaso mariyay si aan unoqono baiadam jira oo jooga hadaba macula quman tahay inad madax adaygto ood tidhaa yeeli maayo amarkaga ilaahayow macnahaygu waxa weyi si toos ah uma odhanasid yeeli maayo balse si dadban ayad uleedhaya oon ula jeedo bal kawaran markad tidha waxan ahay qof muslim ah garnaya Amarada qofka muslimka ah ku waajibay hadana ma tukanayo,ma soomayo, xumaha kama tagayo…. Iwm taasi soo ma aha mar diido cadaana ilaahay subxanahu watacala dulqaadkiisa waxa ka mida inuu ku sugayo ilaa inta aad ugaso noqonaso oo aanu kuguso dagdagsiinayn ciqaabtiisa.

BAL kawaran maalinta lagu qabto hadad tamaniso wakhtigad dayacday ood leedahay alle ayaa hal mar dib ku celiya aad soo saxdid qaladadkad gashay'e lakin sidan horeba kugu shegay dhici mayso dib unoqosho sidad aduunkan ugu timiday ayad aakhirana ugu timid ogow walaalkayow/ walshayey aduunyadu waa qaflad sida alle subaxanahu watacala ino sheegyba ee ka digtonow

Qorax kasto dhacdana waa taad aduunkan ku macasalayn lahayd ee ha moodin cimri kusii kordhaya oo yaanay aduunkan rajo kasii galin mar walba ku xisaabtan oo niyada iyo naftaba usheeg inaad leedhay bar dhamaan bar dhamadkaas oon lagu sheegayn wakhtiga iyo maalinta ay kaga so hagaagaso balse waxa fican ina ku tashato naftadana ood qabato intii taagtada ah.

Wan kula talinayaa oon ku baraarujinayaa waayo ah lexejacla iga kaa haysa walasha /walalka ood arkaso inu ciqaab iyo cabaad ilaahay iibsanayo ku daawan maysid intii jiidhkagu damqanayaba waad la hadli ood waanin taa badalkeeda cilmi la barto waxa ugu wanagsan kan la sadaqadaysto yacnii dadka wax lagu taro ana intii tamartayda ah waxan bartay la bakhayli maayo soboboha ugu waaweyn een buugan u qoray ayay ka mid tahay inaan sadaqaysto aqoon iyo waxqabadba wixii alle ibaray ee bulshayahay idinkuna anfaceeda qaata.


Quraanka kariimka ah waxa kuso aroortay **93 Aayadod** oo ku bilaabmaya ربنا ma waxad odhan oo aad akhiro ku dacwoon ilaahayow imaad barin sidaan ku baryi lahaa ama wax ku waydiisan lahaa maya walahi odhan maysid waayo ah qiyaasta inta leeg waxa ilahay kugu sheegaya qaabkad ula hadli lahayd dalabkagana u dhiiban lahayd ma ogtahay mase xasuusata in dardaarankii u gu danbeeyey ee suubanaheenii udgoona bixiyo inuu ahaa
*يا ايها الناس موعدكم معي ليس الدنيا, وموعدكم معي عند الحوض *

Macnaha ***odhaahda (dadkaygiiyow balanteenu aduunyo maaha e balanteenu waa xowdka)*** macnaha ***xowdka (waa meel uu istaagayo nabigenu scw malinta qiyaame hlkasay umadiisu ugu imanaysa waxana la shegay wabiga umadda ugu horaysa ee ka cabi doonta inay tahay umatu maxamed scw).***

hadaba hadalkas oo ahaa mid aad uqiimo badan oo indhaha saxaabada ka oohiyey qalbiyadoodana holac ku shidan ilaa ay gadheen heer ay door bidaan la kulanka ilaahay iyo rasuulkiisa (scw) waxanu sii raaciyey nabigu (scw) ***(dadkaygiiyow walahi idiinkagama cabsanayo faqri lakin waxan idiinka cabsanaya inaad ku fitnowdaan aduunkan siday ugu fitnobeen kuwii idinka horeeyey)***


bal qiyaas nabigena scw ayaa sida inogu cabsanaya oo waliba dardaarano tiro badan bixinaya markii ay xaladiisu gabagabo taagnayd isago ka cabasanaya umadan uu tarbiyeeyey inay dabadii khasaaran oo halaaban, waxa la shegay malinka qiyaame inay iman doonan dad uu nabigu scw garanayo o dhnka naarta losii wado markasu odhanaya nabigenu scw kaas miyanu hebl ahayn maraksu ilaahay u jawabaya oo leeyahay hebel intad aduunkan kaso tagtay ayuu fitnobay subxanalah maxa ka murugo iyo xanuun badan waxad ku tabacday o lagu yidhi waxba kama jiraan weyi tabacas side dareemi lahayd?

Gunaadkan cutubkna waxa weyi bulshayahay aan noqono kuwo toosan oo xadhiga ilaahay qabsada oo isku naxariista dulmigana iskaga dhiidhiya rabiyowda u towbadkeena koga qaldana qabta koga liitana gacan qabta koga awooda sheeganayana xaqa tusiya, ka wax xumaynayana iska qabta xaqana iskugu gargaara *يثبت الله الدين اءمنو با لقول الثابت في الحيات الدنيا و في الاخر ويضل الله الظالمين ويفعل الله ما يشاء*



Dhiganahan waxu ku kooban yahay 11 cutub oo xul dhiganahan waa **Hage Nafeed** hami badana naftaada siinaya dhinacyo badana kala hadlaya anfac waara inad ka hesho ayaan rajaynayaa akhriste, dhug u lahow oo ilaali in badana wuxu ku noqon doona wehel aad waayaha ka weheshato.





Dhamaad

